

## HOW TO APPLY FOR ASYLUM, WITHHOLDING OF REMOVAL,AND/OR PROTECTION UNDER ARTICLE 3 OF THE CONVENTION AGAINST TORTURE

## SIDA LOO DALBADO MAGANGELYO, KASAARISTA DIIDMADA,IYO/AMA ILAALINTA HOOS IMAANEYSA QODOBKA 3 EE SHIRWEYNIHII LA DAGAALANKA SILCINTA

**DIGNIIN:** Buugyarahan waxa uu ku siinayaa macluumaadka ku saabsan sharciga socdaalka mana ka hadlo kiisaska shaqsiyanka ah. Inta badan sharciga socdaalka wuu isbedelaa, waana inaad isku daydaa inaad kala tashato qareenka socdaalka ama hay'ad sharci si aad uga hesho macluumaadka ugu dambeeyey. Sidoo kale adigaa iska wakiil noqon kara dacwadaha maxkamadeed ee socdaalka la xiriira, balse waxaa had iyo jeer haboon inaad caawimaad ka hesho garyaqaan ama hay'ada sharciga hadey macquul tahay.

Buugyarahan waxa asal ahaantiisa la diyaariyey sannadkii 2002 waxaana diyaariyey Muhaajirka Florence iyo Mashruuca Xuquuqda Qaxootiga (Mashruuca Florence), hay'ad aan faa'iido doon aheyn oo muhaajiriinta ku xiran Arizona siisa adeegyo sharciga la xiriira oo bilaash ah. Sannadkii 2011 waxaa lagu dabaqay inay dadka muhaajiriinta ee ku xiran dalka daafihiisa siiso macluumaad guud oo badan. Ma ayan diyaarinta Waaxada Nabad-sugida Gudaha (DHS)/Laanta Socdaalka Mareykanka iyo Meelmarinta Cashuurta (ICE) ama Xafiiska Fulinta ee Dib-ugu-laabashada Laanta Socdaalka (EOIR) balse hay'adahan waxay ku noqdeen dulucdeeda.

Nasiibdaro, sharciga socdaalka had iyo jeer ma cada, fahamsiinta sharciga ee Mashruuca Florence had iyo jeerna lama mid noqon karaan mida DHS ay tarjumaada ay kaga bixiso sharciga. Mashruuca Florence waxay aaminsan yihiin in macluumaadk ay yihiin kuwo sax ah oo caawimaad buuxda leh, balse xaqiiqdu waxay tahay in buugyarahan laga heli karo maktabadaha ku yaalo xarumaha laisku xiro si ay u isticmaalaan dadka xiran oo loomala jeedo in tarjumaada DHS ee dhanka sharciga ay la mid tahay waxa lagu muujiyey buugyaraha.

Sannadkii 2002 waxaan buugyarahan u qornay laba sababood. Mid waa inay kaa caawiso si aad u hesho haddaad u qalanto magangelyo iyo/ama ka saarista ee haynta (xitaa waxaa loogu yeeraa "ka haynta") sidaa darteed waxaad ka baxsan kartaa in laguugu celiyo dalkaaga haddaad cabsi ka qabto dib u celinta. Tan labaad waxay tahay inay kaa caawiso inaad dalbato gargaar kasta oo aad xaq u leedahay adiga laf ahaantaada waa haddaadan heli karin qareen adiga kaa wakiil ah, ama inay kaa caawiso inaad caawiso qareenkaaga hadaad mid leedahay.

**Yaa loo qoray buugyarahan**?
Buugyarahan waxaa loogu talogalay dadka ay DHS hayaan ama lagu hayo xukun ku saarista. "Ka saarista" waxaa loo isticmaalaa waxa loogu yeero "masaafurin". <u>Buugyarahani ma quseeyo dadka ku jira xukunka masaafuriska ama ka saarista</u>. Hadaad ku jirto xukunka laanta socdaalka kadib bishii Abriil 1, 1997, waxaa suurowda inaad ku jirto xukunka "ka saarista". Waxaad dukumintiga ku sheegi kartaa nooca xukun ee aad ku jirto ee aad ka heshay DHS ee laguugu soo oogay (ama sababaha lagaaga saarayo dalka Mareykanka).
Haddii dukumintiga lagu sumadeeyey**"<u>Ogeysiis Muuqaasho</u>"(Form I-862),** waxaad ku jirtaa **xukun** ka saarista.
Haddii dukumintiga lagu sumadeeyey "**<u>Amar in la Muujiyo Sababta</u>** "(Form I-221), waxaad ku jirtaa xukun musaafuriska.

Haddii dukumintiga laga lambareeyo salka hoose "Form I-11-" iyo "Form I-122," waxaad ku jirtaa xukun ka **reebis ah**.

> **Haddaad xukunka "masaafuris" ama "kareebis" ku jirto,**
> **Buugyarahan adiga kuguma qotmayo waana inaad kala tashato qareenka hadey macquul tahay.**

Buugyarahan waxaa loogu talogalay dadka ku jira xukun ka saarista**oo u qalmi kara magagelyada ama ka bixinta ee haynta oo waafaqsan Sharciga Laanta Socdaalka iyo Jinsiyada (INA), amam ilaalinta oo hoos imanaya qodobka 3 ee la dagaalanka silcinta (CAT), oo wadiiqo u ah ka saarista dalka Mareykanka**.

**Sidee baan u isticmaalayaa buugyarahan?**

Aqri buugyaraha oo idil si aad u hesho haddii aad u u qalmi karto magangelyo ama ka hayn oo waxa aad u baahan tahya inaad sameyso waa inaad dhameystirto foomamka aadna isu diyaariso dhegeysiga. Waa wax aad u muhiim ah inaad fahamto inay tahay wax ADIGA ku khuseeya inaad isu diyaariso kiiskaaga oo aadna hesho cadeymo (daliil), hadey wax un jiraan, si aad u siisoo xaakimka. <u>Haddaadan isu diyaarinin dhegeysigaaga, waxaa laga yaabaa inaad ku weydo wixii aad heli laheyd markaad isu diyaariso.</u>

## NACARA, HRIFA iyo TPS

Kahor intaanan si faahfaahsan uga hadlin shuruudaha is difaacida macquulka ah ee ka saarista, waxaynu idin ogeysiinaynaa laba sharciga kongoreeska la mariyey dabayaaqadii sanadihii 1997 iyo 1998 taasoo siin karta difaacyo macquul ah ee ku aadan ka saarista shaqsiyaadka ee soo buuxiya wax xaq u yeelashada looga cabbir qaato. Labadan sharci waxay kala yihiin: (1) Sharcigii Isku hagaajinta Nicaraguan iyo Gargaarkii Bartamaha Mareykanka ee 1997, oo inta badan looga soo halqabsado "NACARA," iyo (2) Sharcigii Cadaalada Laanta Socdaalka ee Dadkii Qaxootiga Reer Haiti ee 1998, oo inta badan iyadana looga soo halqabsado "HRIFA." **Fadlan ku noqo Lifaaqa A ee ku lifaaqan macluumaadka ku saabsan labadan is difaacida ah.**

- **Hadaad ka timid Guatemala, El Salvador, wadamada qaar ee ku yaala Yurubta Bari, Nicaragua, Cuba, ama Haiti, waxaa kuuu furan wado aad uga baxsan karto ka saarista dalka Mareykanka**

Marka la eego labada sharci ee NACARA iyo HRIFA, dadka qaar ee ka yimid wadamadaa kor ku xusan waxay heli kareen aqoonsi degenaansho joogto oo sharci buuxa ah iyo joogis dalka Mareykanka gudihiisa ah. Waxyaabaha loo baahan yahay waa ay kala duwan yihiin had iyadoo ay ku xiran tahay dalka aad ka timaaday. Haddaad soo gasho mid ka mid ah qeybaha ku xusan lifaaqa A, xaakimka laanta socdaalka ama DHS waa inaad weydiisataa inuu go'aan ka gaaro haddaad si sharci ah u joogeyso dalka Mareykanka iyadoo laga tixraacayo NACARA ama HRIFA. Haddaad tahay lamaanaha ama cunug qof u qalmay gargaarka loo tixraacayo shuruucdan waxaad kaloo u qalantaa inaad joogto dalka Mareykanka waana inaad warsataa xaakimka ama DHS.

Sidoo kale, sharciga saddexaad ee aan doonayno inaan kuu sheegno waxa uu ku saabsan yahay wax loogu yeero Aqoonsiga Badbaadinta Ku meel gaarka ah. Hadaad ka timid dalka Haiti oo lagu siiyey Aqoonsi Badbaadin Ku meel gaar ah (TPS), ama aad ku nooleed dalka Mareykanka tan iyo janaayo 12, 2011, ama aan dambi laguugu xukumin fal dambiyeed weyn oo aad kasii dartay laba ama wax ka badan oo dambiyo fudfudud ah, , oo aadna dalbatay TPS bishii Nofeembar 15, 2011, waxaad ku nagaan kartaa dalka Mareykanka.

# MACLUUMAAD KU SAABSAN MAGANGELYADA IYO KA SAARISTA HAYNTA

Buugyarahan waxa hadda uu qeexayaa waxa lagu micneeyo magangelyo, iyo ka saarista haynta, yaa xaq u leh, iyo sida loo diyaariyo kiiskaaga.

**Magangelyo maxay tahay?**

Marka loo eego sharciga Mareykanka u yaalo, waa dad ka soo cararay dalkooda sababo la xiriira inay ka baqayaan saxariirin waxay dalban karaan "magangelyo" sida ay ku xusan tahay qeybta 208 ee INA.Magangelyo waxay ku siisaa badbaado sidii qaxooti jooga dalka Mareykanka.. **Saxariirin waxay noqon kartaa dhibaateyn ama hanjabaad adiga ama qoyskaaga loo geysto ama dadka adiga kula midka ah. Qofku waxa uu magangelyo heli karaa hadduu isagu ama iyadu ka cabato saxariirin loogu geestay dalkiisa ama keeda waqtiyadii la soo dhaafay uuna soo buuxiyo qeexida "qaxooti" sida ku qeexan qeynta 101 (a) (42) ee INA. Waxaa magangelyada laguugu siin karaa keliya haddii ugu yaraan mid ka mid ah sababaha uu qofku ka dhib sheeganayo ama lagu soo dhibaateeyey sababtaasoo la xiriirta faracaaga, diintaada, dhalashadaada, fikirkaaga siyaasadeed (ama fikir siyaasadeed uu qof moodo inaad leedahay), ama xaqiiqda ah inaad qeyb ka tahay koox bulsho gaar ah.**

Haddaad magagelyo doon tahay waxaa laguu ogolaanayaan inaad si sharci ah ku joogto dalka Mareykanka oo aadna hesho ruqsad shaqo. Ninkaaga ama xaaskaaga iyo carruur aan guursan oo ay da'doodu ka yar 21 sano jir ayaa Mareykan jooga waxaad heli kartaa aqoonsi sharci sida magangelyo doone waa haddaad dalabkaaga magangelyo doonka ku soo darto. Hadey dalka Mareykanka dibada ka joogaan waxaad ku soo fayl gareynkartaa waraaqaha kuu ogolaanaya inay ayagana yimaadaan dalka Mareykanka kadib markii lagu siiyo magangelyo. Haddii magagelyo lagu siiyo, waxaad hadhow dambe codsan kartaa sharci buuxa deganaansho joogto ah ku joogto oo durbadiiba ku noqoto muwaadin Mareykan ah.

**Kasii daynta haynta maxay tahay marka loo eego qeybta INA 241 (b) (3)??**

Kasii daynta **haynta** waa nooc ka mid ah badbaadinta sharciga ay dadka qaar heli karaan halkii ay ka noqon lahaayeen magangelyo oo ah sida ku qeexan qeybta 241 (b) (3) (A) iyo (B) ee INA. Sababaha aanu faahfaahin badan hadhow dambe sheegi doono - tusaale ahaan, midkood hadaad codsato magangelyo sanad ka badan kadib markaad gasho dalka Mareykanka oo ma aadan u qalmin waxyaabaha ka duwan ama sabab la xiriirta dambiyada la galay aawadood - dadka qaar "xaq" uma laha oo ma "istaahilaan" magangelyo. Sidoo kale, xitaa dambi galida gaarka ah ama falalka xun kaama hortagayaan inaad codsato magangelyo, xaakimka laanta socdaalka wuxuu go'aan ka gaari karaa inuu qaadaco codsigaaga magangelyo dembigaa aawadeed. Xaaladahan oo kale, "ka haynta" ayaa waxay keliya noqonaysaa wadiiqada looga baxsan karo ka saarista.

Ka hayntu waa sida magangelyada oo kale waxay kaa ilaalinaysaa in dib laguugu celiyo dalkaaga, micnaheedu waa waxaad ku noolaan kartaa oo sharci ah uga shaqeysan kartaa dalka Mareykanka. Waxaad ku haynta u codsan kartaa sida ku magangelyada si la mid ah, adigoo isticmaalaya isla foomka codsiga. Balse waxaa jira farqiyo muhiim ah oo ukala dhexeeya labada foom ee ka gargaarida ka saarista.

- Way adagtahay in lagu siiyo diidmo. Waa inaad tusisaa wax intaa ka sii badan waxaa jira fursad wanaagsan oo waa lagu silcinayaa hadaad ku laabato dalkaaga iyadoo sabab ay u tahay sinjigaaga, diintaada, fikirkaaga siyaasadeed (ama fikirka siyaasadeed ee uu qof kuu moodo inaad aaminsan tahay), ama xaqiiqda ah inaad ka tirsan tahay koox bulsho gaar ah. Waa inaad tusidaa <u>in noloshaada iyo xoriyadaada</u> ay halis galeyso, waana inaad tusidaa in tani ay u badan tahay inayba dhacdo (ma aha

keliya inay macquul tahay).

- Hadduu xaakimka Laanta Socdaalka garwaaqsado inaad xaq u leedahay ka saarista diidmada, isaga ama iyada ma diidi karaan codsigaaga inta lagu jiro howsha ka fiirsashada.
- Haddii lagaa saaro diidmada, waxay keliya macnaheedu tahay inaan dib laguugu celin karin wadanka halista kaa soo wajahaysa. Haddii dal kale uu ku qaadanayo, Mareykanka halkaa ayey kuu dirayaan.
- Haddii xaaladaha dalkaaga isbedelaan sidaa darteed DHS waxay aaminsan tahay inaad ku amaan heleyso ku laabashada, DHS waxay makaa kuu bilaabaysaa kiis cusub ee maxkamada laanta socdaalka inay isku daydo inay ka dhaadhiciso xaakimka in adiga dib laguu celinayo.
- Diidmada kuma heleysid sharciga degenaashaha joogtada ah, laguumana ogolaanayo inaad soo keento xubnahaaga qoyska, mana kuu horseedeyso inaad noqoto muwaadin Mareykan ah.

**What protection is available under the Convention Against Torture?**

Dadka qaar waxay xaq u leeyihiin badbaadinta ku saleysan **Shirweynihii La dagaalanka Saxariirinta (CAT)**hadey muujiyaan inay saa u badan tahay inay dhacdo oo aysan aheyn in dowlada silcinayso, ama dad u shaqeeya ama ogolaansho ka haysta dowlada, haddii lagu celiyo dal gaar ah. "Saxariirinta" waxaa lagu qeexay Qodobka 1 ee Shirweynihii La dagaalanka Saxariirinta ee ku yaala xeerka 8 Sharciga Federaaliga (CFR) qeybaha 208. 18(a) iyo 1208. 18(a).. Diidmada ka saarista ee hoos timaada CAT waa sida diidmada ka saarista hoos timaada qeybta 241(b)(3) ee ku jirta INA, haddii foomkan badbaadinta lagu siiyo, waxay keliya macnaheedu yahay in aan laguugu celin karin dalka aad ka baqeyso in laguugu silciyo.  Si kastaba ha'ahaatee, ma jiraa waxa looga baahan yahay in silcinta laga baqay inay la xiriirto sabab badbaadsan sida looga baahan yahay magangelyada ama diidmada hoos imaanaysa qeybta INA 241(b)(3).. Haddii dal kale uu ku qaadanayo, Mareykanka halkaa ayey kuu dirayaan. Haddii xaaladaha dalkaaga isbedelaan sidaa darteed DHS waxay aaminsan tahay inaad ku amaan heleyso ku laabashada, DHS waxay makaa kuu bilaabaysaa kiis cusub ee maxkamada laanta socdaalka inay isku daydo inay ka dhaadhiciso xaakimka in adiga dib laguu celinayo. Ugu dambeyntii, diidmada hoos imaneysa CAT kuma heleysid sharciga degenaashaha joogtada ah, laguumana ogolaanayo inaad soo keento xubnahaaga qoyska, mana kuu horseedeyso inaad noqoto muwaadin Mareykan ah.

Haddii xaakimka Laanta Socdaalka ku qanco inay u badan tahay in aan laguugu saxariirineyn dal haddii lagaa saaro, balse uu ku qanco inaada xaq u laheyn diidmada ah in lagaa saaro ee hoos imaanaysa CAT waayo waxaa laguugu soo oogay dembiyada qaar oo ku saleysan inaadan xaq u laheyn, xaakimku wuxuu tixgelinayaa hadaad xaq u leedahay ka saaris dib loo dhigo.  Dib u dhigista ka saarista ee hoos timaada Shirweynaha La dagaalanka Saxariirinta waxaa lagu qeexay 8 CFR qeybaha 208.17(a) iyo 1208.17(a)..  Dib u dhigista ka saarista kuma siinayso wax aqoonsi sharci ah oo aad ku joogto dalka Mareykanka si lama huraan ahna looguma micneeyo in xariga lagaa sii deynayo.  Dib u dhigista Ka saarista waa la dhameyn karaa haddii muraajacada kadib go'aan laga gaaro inaan laga yaabin in lagu silciyo dalka gudihiisa ee ka saaristaada dib loogu dhigay, ama aad codsato in dib u dhigistaada inay dhamaatay.

Si aad u codsato diidmada ka saarista hoos imaanaysa CAT waxaad isticmaali kartaa isla foomka ee loo isticmaalo inaad ku codsato magangelyada ama diidmada ka saarista ee hoos imaanaysa qeybta INA 241(b)(3)..

Si aad wax uga barato diidmada ka saarista hoos timaada CAT aqri macluumaadka walxahan ee hoos imaanaya qeybta ku cinwaansan "Yaa Codsan Kara Badbaadinta hoos imaanaysa Shirweynihii La dagaalanka Saxariirinta?"

**Sidee baan ku codsan karaa magangelyo ama diidmada kasaarista?**

Waa inaad buuxisaa codsiga, Foom I-589 ee Codsiga Magangelyo iyo kan Diidmada Ka saarista,taasoo aad ku

sharaxayso waxa kugu dhacay markaad dalkaaga joogtay iyo sababta aadu ga baqayso inaad ku laabato. Waa inaad sidoo kale sharaxaad ka bixisaa dhamaan waxyaabahan oo faahfaahsan inta lagu jiro dhegeysiga ee aad xaakimka la hadleyso kana jawaabto su'aalaha. Xaakimku waxa uu go'aan ka gaarayaa inaad been sheegeyso iyo in kale. Isaga ama iyada waxay go'aan ka gaareysaa haddii laguugu soo silciyey dalkaaga ama aad halis silcin ku geli doonto haddii dib laguu celiyo. Isla codsigaa waxaa loo isticmaalaa inaad ku codsato diidmada ka saarista iyo ilaalinta hoos imaanayso CAT.

**Ma u dagaalami karaa magangelyo ama kiiska diidmada ka saarista meel xariga ka baxsan?**

Haddii "xukunka ka saarista" iyo ee ay DHS kugu soo xirtay, waxaad xaq u yeelanaysaa inaad warsato xaakimka Laanta Socdaalka si hoo loogu dhigo curaartaada. Curaartu waa lacag aad ku bixinayso si aad uga baxdo xariga dibna aad kusoo laabanayso kadib markuu kiiskaaga dhammaado, inta uu socdo dhegeysi maxkamadeedkaaga iyo wareysigaaga dalkana uga baxdo haddii taasi ay tahay waxa uu xaakimku amray. Haddaad leedahay kiis aad u culus ama ku leedahay dalka Mareykanka isku xirnaan qoys ama beel, xaakimku waxa uu go'aan ku gaari karaa inuu kaa saaro xariga adigoon bixin wax lacag ah, oo ay ku saleysan tahay balantaada aad uga soo qeybgaleyso dhegeysigaaga oo idil. Tani waxaa loogu yeeraa waa lagu sii daayey "aqoonsigaaga." Si kastaba ha'ahatee, haddii aad noocyo kale oo dembi ku oogid ah, xaq uma yeelan doonto inaad curaar ka dhiibto sii deynta xarigaaga.Si loogu qanco haddii aad xaq u leedahay curaarta iyo sida loo codsado loo diyaariyo dhegeysiga curaarta, waa inaad aqridaa buugyare kale "Ku saabsan Dhammaan Curaarta."

Haddaad ka baqeyso inaad ku laabato dalkaaga waxaana laguuguna xiray laanta socdaalka ee gegida diyaaradaha ama xuduudo kale, waxaad u qalantaa waxa loogu yeero sii deyn waqtigeeda la gaarin. Haddii lagu siiyey sii deynta aan waqtigeeda la gaarin waxaad awoodaa inaad ka baxdo xariga siina wadato dagaalanka aad uga jirto kiiskaaga laanta socdaalka adigoo dibada jooga.

Si aad xaq ugu yeelato sii deynta aan waqtigeeda la gaarin ee aad xaqa u leedahay, waxaa waajib kugu ah inaad marka hore marto waxa loogu yeero Wareysiga Cabsida Suuroobi karta ama Cabsida Sababta leh. Tani waa markii aad u sharaxdo saraakiisha Laanta Socdaalka inaad ka cabsaneyso dib u celinta dalkaaga iyoo sababta aad uga cabsaneyso. Haddaad marto heerkan kadib waxaad warsan kartaa siideynta aan waqtigeeda la gaarin. Guud ahaan, si aad ugu qalanto siideynta aan waqtigeeda la gaarin waa inaad tustaa arimaha soo socda:

1. Inaad tahay qofkaa aad sheeganayso inaad tahay (aqoonsigaaga)
2. Inaadan aheyn mid duulimaadka qatar gelinaya, iyo
3. Inaadan halis ku aheyn bulshada

Si kastaba ha'ahaatee, qofkasta xaq uma laha siideynta aan waqtigeeda la gaarin xitaa haddaad tusto waxyaabahaas. Haddaad su'aalo qabto ula hadal sarkaalkaaga laanta socdaalka.

**Wixii macluumaad dheeeri ah oo arintan ku saabsan, aqri buugyaraha loogu yeero "Sida DHS loo codsado kasii deynta xabsiga."**

Haddii xariga lagaa siidaayo, waxaa weli lagaga baahan yahay inaad xabsiga ku laabato (ama Maxkamada Laanta Socdaalka ee u dhow halka aad degen tahay) si aad kiiskaaga meesha uga sii wado. Haddii xariga lagaa sii daayo maxkamada ha iska soo xaadirin markii lagaaga soo baahdi, xaakimka ayaa amar ku bixinayo in lagaa saaray. Hadhow dambe, waxa aynu sharaxeynaa waxa la sameynayno haddii xariga lagaa saaro.

**Maxaan sameeyaa haddii aanan ka bixi karin xariga oo aanan adkeysan karin inaan sii xirnaado?**

**Ma warsan karaa in la iiga saaro ama si ikhtiyaari ah u boxo kadibna dib ugu soo laabto dalka Mareykanka?**

Aad bay u adagtahay inaad xirnaato mudo dheer, waana wax caadi ah inaad dareento madluunsanaan, murug iyo niyadjab. Dad badan baa waxay dareemaan inay tahay wax xun inayan shaqeysan karin oo aynan waxba siin karin qoyskooda, ama waxayba dareemayaan in waqtigooda uu ka dhumayaba. Haddii aadan bixin karin curaartaada, waxaadba ku fikireysaa inaad faraha isaga qaado zuquuqdaada ogolaatana amarka ka saarista dalka Mareykanka, sidaa darteed kuma sii bixineysid waqti badan inaad sii xirnaato.

Haddii **aadan** ka baqeyn inaad ku laabashada dalkaaga, ama haddii, buugyarahan markaad aqriso kadib, go'aansato inaadan u qalmin magangelyo ama diidmo, oo aadan u qalmin noocyo kale oo is difaacid ah ogolaanshaha in lagaa saaro ama codsashada "bixid si ikhtiyaari ah"ayaa waxay noqon kartaa waxa aad xaqa u leedahay inaad sameyso.



**Balse haddii aad ka baqeyso inaad dib u laabato, hadda quursashada ayaa qalad weyn ah.** Ugu horreyn, waa inaad ka fikirtaa noloshaada iyo qatarta aad wajaheyso haddaad laabato.

Tan labaad, haddii aad ku fikirayso inaad mustaqbalka ku soo laabato dalka Mareykanka, ogolaanshaha in lagaa saaro ama si ikhtiyaari ah u baxdo ayaa qalad noqon karta.. Haddaad dalka Mareykanka ugu laabato si sharci daro ah kadib iyadoo lasoo saaray ama ka saarid ah ama bixid ikhtiyaari ah, ma heli doontid fasax shaqo waxaadna had iyo jeer halis ugu jirtaa inay DHS tu ay ku qabtaan. Haddii lagu qabtana waxaa laguusu soo oogayaa dambi ah inaad dalka si sharci daro ugu soo laabatay kadib iyadoo la soo saaray amar in lagaa saaro ah. Tani waa dambi weyn oo kuu keeni kara in xabsi lagu dhigo. Haddii ay jiraan sheeko dambiyeed aad gashay, xaaladaha qaar, sharciga wuxuu leeyahay waxaad xabsiga ku soo dhameysaneysaa ilaa 20 sano sabateedu tahay sharci darada aad dalka Mareykanka ku soo gashay!

Haddii laguugu soo qabto dib ugu soo laabashada dalka Mareykanka oo kadibna codsatay magangelyo, waayo xaakimku waxa uu go'aan ka gaari karaa inaadan codsan magangelyo ama sii hayn markii ugu dambeysay ee aad dalka Mareykanka joogtay, dhab ahaantii kama baqeyso inaad ku laabato dalkaaga.

Ugu dambeyntii, ogolaanshaha in lagaa saaro ama xitaa hesho "bixid ikhtiyaari ah" way kugu adkaan kartaa xitaa haddii aysan kuu suuroobeyn inaad si sharci ugu soo laabato dalka Mareykanka, xitaa haddaad halkan ku leedahay qoys si sharci ah ama siyaabo kale aad kusoo dageyso. Haddaad dalka Mareyknaka si sharci daro ah ugu soo noqoto iyadoo kadib lasoo saaray amar ka saarid ah, DHS waxay kaa qaadeysaa talaabo sharci loogu yeero "Dib-u-soo-saaris xukun dal ka saarid ah" halkaasoo ah meeshii hore amarka dal ka saaristaada laguugu soo saaray amarka xukunka dal ka saarista ayaa hadana "dib -looga-soo-saarayaa-xukunka". Tani macnaheedu waxay tahay in DHS markale ay dalka kaa saari doonto, kahor intaan dalka lagaa saarin xaqna uma yeelanaysid inaad aragto Xaakimka Laanta Socdaalka ilaa aad ka soo muujiso cabsida aad ka qabto dib ugu celinta dalkaaga waxaadna mareysaa wareysi baqdin macquulgal ah.

Sidaad aragto, waxaa jira sababo badan keeneysa inaad u dagaalanto kiiskaaga hadaba hadaad leedahay kiis aad u dagaalanto.  Laakin waxaad ku fikireysaa waxyaabo ku saabsan inaadan codsan inaad joogto dalka Mareykanka oo waxaadna rabtaa inaad wax badan ka ogaato sida dalka Mareykanka la isaga saaro oo saameyn ku leh mustaqbalka, waa inaad aqridaa buugyaraha loogu yeero, "**Sida Loo Codsado Bixida Ikhtiyaariga ah**."

**Haddaan codsado magangelyo ama ka haynta dal ka saarista, miyaan halis u keenayaa xubnaha qoyskeyga oo jooga dalkeyga?**

Dadka qaar waxay ka baqaan in macluumaadka codsiga magangelyadooda dib loogu soo celiyo dalkooda loona isticmaalo wax lid ku ah xubnaha qoyska oo weli halkaa jooga. Ilaa aad dalkaaga caan ku tahay raadsatana in la shaaciyo kiiskaaga wax ku saabsan, tani inta badan lagama yaabo. Nuqul ka mid ah codsigaaga magangelyo iyo dal ka saarita lagaa hayo ma tegayo Waaxda Dowlada Mareykanka, balse Waaxdu loogama baahna inay la xiriirto dowladaada iyadoo adiga wax kaa warsaneyso. Waxaa ka yaalo xeerar daboolaya sirta magangelyada ay sheegtaan. Waxaad kaloo Xaakimkaaga Laanta Socdaalka u sheegi kartaa walaacaaga waxaadna warsan kartaa in dhegeysigaaga laga xiro bulshada iyo macluumaadka aad sheegtay inay ahaadaan kuwo sir ah.

**Maxaan sameeyaa haddii aan anigu Ingiriiska fahmi karo balse aysan aheyn si fasiix ah?**

Waxaad xaq u leedahay inaad fahamto su'aalaha oo idil ee lagu weydiiyey inta uu dhegeysiga socdo, waxaa aad iyo aad muhiin u ah inaad <u>waxkasta</u> fahanto ma aha keliya qeyb ka mid ah keliya. Waxaa aad iyo aad muhiim u ah inaad ula hadli karto xaakimka oo xaakimkuna si fiican kuu fahmayo. Sababtan aawadeed, haddii aadan Ingiriiska si fiican u fahmi karin uguna hadli karin, waa inaad u sheegtaa xaakimka. Maxkamada ayaa ku heli doonta turjumaan ku hadla afkaaga.

> ☞ **Haddii aadan Ingiriiska si fiican u fahmi karin uguna hadli karin, u sheeg xaakimka.**

**Waa maxay waxyaabaha looga baahan yahay marka la qaabilayo magangelyo ama ka haynta dal ka saarista hoos imaneysa qeybta INA 241(b)(3)??**

Si aad u hesho magangelyo ama diidmada dal ka saarista ee hoos imanaya Qeybta INA 241(b)(3), waa inaad tusidaa saddex waxyaabood:

1. Inaad sababo fiican u haysato baqdinta
2. In laguugu saxariiriyey ama ku weyday noloshaada iyo xoriyadaada
3. Sababo la xiriira faracaaga, diintaada, dhalashadaada, fikir siyaasadeed, ama ka tirsanaansho koox bulsho gaar ah.

Waxaynu hadda sharaxeynaa waxyaabahn loo baahan yahay mid ka mid ah.

**Maxaa ah inaan tusiyaa waxyaabaha ku saabsan sababta aan u baqayo?**

Si aad u hesho magangelyo, waa inaad tusidaa guud ahaan in dalkaaga laguugu celiyo ka baqeyso sabab fiicanna u haysato ee aad siyaababan dareemayso. Si aad u hesho diidmada dal ka saarista ee hoos imaaneysa qeybta INA 241(b)(3), waa inaad tusidaa ma aha keliya inaad sabab u haysato in maleynayso <u>inaanan laguugu</u> saxariirin haddii aad dib u laabato, balse taasi waa laga yaaba inay u badan tahay aysan aheyn in lagu saxariirin doono. Haddii aad keliya tusido in laga yaabo in lagu saxariiriyo, xaakinku kuma siin karo wax sii hayn ah. Haddii horey laguu silciyey, waxaa sahlan inaad tusido in laga yaabo in lagu silciyo markale haddaad dib ugu laabato, balse waa inaad tusidaa saxariirinta inay tahay id ka mid ah sababaha aad soo xustay. Waxaa aad muhiim u ah inaad codsigaaga ku sharaxdo oo aad xaakimka u sheegto wax iyada ku saabsan, faahfaahin badan, inta lagu jiro dhegeysigaaga.

**Maxay "saxariirintu" tahay?**

Si aad u hesho magangelyo, waa inaad muujisaa inaad ku soo dhib kasoo martay saxariirinta dalkaaga ama aad halis uga jirto saxariirinta haddii aad ku laabato waayo waxaad haysataa mid ama sababo shan ka badan, iyo sababahan dhowrsoon inay ahaayeen ama ay ahaan doonaan mid sabab udub dhexaad u ah saxariirinta. Noocyo kala duwan oo dhibaateyn ah ayaa loo tirin karaa "saxariirin," oo isugu jira waxyaabaha loo arko inay ka halisooda yar yihiin hadey mar ay dhacaan laakin haddii ay soo noqnoqdaan lagu dari karo saxariirin. "Saxariirin" waxay isugu jirtaa tusaale halka kaasoo gaartay/so halis la xiriirta hanjabaad, dhaawac, garaacid, afduub, xarig, xabisid, silcin, xadgudub galmo, ama dil, ama tahay/aheyd in xoriyadaada lagaa qaaday ama ay xadidan tahay. Sidoo kale haddadan awoodin inaadan shaqo heleyn, iskuulna aadi karin, ama haddii ay dad badan oo wadankaaga jooga ku soo wajahayaan dhibaateyn, waxyaabahan markii dhammaan la isku daro waa saxariirin. **Maxaa loola jeedaa saxariirinta sababo la xiriira fikirkeyga siyaasadeed, xubinimada koox bulsho gaar ah, farac, diin ama dhalasho?**



Ma'aha mid qofkasta oo wadankiisa kusoo wajahda halis inuu u qalmo magangelyo ama ka hayn. Adiga waxaad keliya kiiskaaga ugu guuleysan kartaa haddii uu qofku ama dadku ay ka baqayaan ama ay ku saxariiriyeen ama doonayaan inay kugu saxariiriyaan mid ka mid sababaha soo socda:

**<u>Fikirkaaga siyaasadeed</u>**. Dad badan ayaa waxay ka cabaadaan saxriirin la xiriirta sababo ku aadan fikirkooda siyaasadeed. Waxbo ka micno ma'aha haddii aad taageereyso ama mucaarad ku tahay dowlada. Kuwa ku guuleystay magangelyada way isugu jiraan waayo waxaa lagu saxariiriyey fikradahooda siyaasadeed waana: araday, ka qeybqaadatay mudaaharaad, ama gadood ay dowlada uga soo horjeedaan, dhaqdhaqaaq midoobay, xubno koox siyaasadeed, xubno dowladeed.

Mararka qaarkood, xitaa haddaadan fikir siyaasadeed qabin, qof ayaa si xun kuula dhaqmi kara waayo isaga ama iyada waxay <u>moodeysaa</u> inaad qabto qaar ka mid ah fikradaha siyaasadeed. Isaga ama iyada ayaa waxay moodi kartaa sidan waayo magaalada aad degen tahay, xubnahaaga qoyska, waxyaabo inaad u sameyso, koox aad kala qeybgasho, dad inaad waqti siiso, ama sababo kale Marxaladan oo kale, waxaad sidoo kale u qalantaa magangelyo ama ku hayn.

Sharciga waxa uu leeyahay haddii horey ama hadda aab ka baqeyso in laguug qasbo ilmo iska soo ridid ama lagu soo sifeeynayo, ama haddaad horey ama hadda uga baqeyso in laguu saxariiriyo sababo la xiriira waayo aad diiday ama aad diidi doonto inaad ka qeyb qaadato barnaamijka xakameynta dadweynaha lagu qasbayo, waa laguugu silciyey ama kugu soo wajahaysa saxariirin sababo la xiriira fikirkaaga siyaasadeed.

**<u>Kooxdaada bulsho</u>**. Dad badan ayaa waxay ka cawdaan saxariirin sababo la xiriira waxay qeyb ka yihiin "koox bulsho." Koox bulsho macnaheedu waa dad wadaaga waxyaabaha qaar ee aysan badali karin ama ayan aheyn inay bedelaan. Tusaale ahaan, waxay noqon karaan dad ku qoys, qabiil ama sinji ah ama u jiheesmid dhanka jinsiga oo gaar ah.

Tusaale, kasoo qaad dowlada dalka inay rabto ina burburiso dhaqanka guud ahaan, oo ay leyso xubnaha qabaa'ilka qaarkood. Xubnaha qabaa'ilka ayaa waxaa loo saxariirinayaa sababo la xiriira inay kasoo jeedaan "koox bulsho." Ama kasoo qaad jabhadawadanka joogta ayaa waxay afduubtaan xubno ka mid ah qoys loogu yeero Martinez. Haddii jabhada ay si xun ula dhaqmeyso xubmaha qoys ka mid ah Martinez sababo la xiriira

xubnimomadooda qoyskaa, qoyska Martinez waaxaa loo tixgelinayaa koox bulsho.

Saxariirintaadu waxay kaloo noqon kartaa xitaa sababo la xiriira koox bulsho haddii laguu dhibaateynayo ama laguu dhibaateeyey, ama laguugu hanajabay sababo la xiriira khaniisnimadaada. Tusaale ahaa, hadii dowlada wadankaaga ay saxariiriso dadka sabao la xiriira inay yihiin khaniisiin, adna khaniis ayaad tahay waxaana loo saxariiriyey ama ay ka baqayaan saxariirin, waxaad u qalantaa magangelyo ama ku hayn.

Dumarka ayaa wadamada qaar waxay qeyb ka yihiin koox bulsho haddi si xun loola dhaqmo waayo waa haween iyo hadey gaar ahaan ay ka soo horjeedaan habdhaqan xumida. Tusaale ahaan, wadamada qaar ayaa, waxaa jira dhaqan lagu jarjarayo cowrada dumarka markay gaaraan da'da qaar. Haddii aad wadankaaga uga baqeyso sababo la xiriira waxyaabahan ama habdhaqanxumi kasta oo halis ah waayo waxaad tahay dumar kuma raacsanid habdhaqan xumidaas, waxaad u qalmi kartaa magangelyo ama ku hayn.

**<u>Isirkaaga</u>**. Dad badan ayaa si xun loola dhaqmaa sababo la xiriira isirkooda ay kasoo jeedaan. Haddii laguugu saxariiriyey ama aad halsi uga jirto sababo la xiriira midabka jirkaaga, asal ahaantaada, ama taariikh nololeedkaaga, waxaad u qalmi kartaa magangelyo ama ku hayn.

**<u>Diintaada</u>**. Dad badan ayaa si xun loola dhaqmaa sababo la xiriira diinooda ay kasoo jeedaan. Haddii aan laguu ogoleen inaad ku dhaqanto diintaada ama si xun laguula dhaqmo sababo la xiriira diinta aad aaminsan tahay, waxaad u qalmi kartaa magangelyo ama ku hayn.

**<u>Jinsiyadaada</u>**. Dhalashadaada waa loola jeedaa dalaka aad asal ahaan ka timid ama dalka aad jinsiyadiisa haysato. Hal tusaale waxay noqon kartaa hadaad tahay muwaadin Elsalvador balse ku nool dalka Honduras, waana lagu saxariiriyaa sababo la xiriira inaad tahay qof Salvadoran ah

Si aad ugu qalanto magangelyada, waa inaad aasaasataa in faracaaga, diintaada, jinsiyadaada, kooxdaada bulshada gaarka ah ama fikirkaaga siyaasadeed uu ahaa ama uu ahaan doono ugu yaraan mid sabab udubdhexaad u ah saxariirinta aad ka baqeyso ama aad soo martay.

**Miyuu qofka ama dadka aan ka baqayo ahaadaa qof ama kuwo dowlada ku jira?**

Maya. Qofka ama dadka aad ka baqeyso waxay ahaan karaan ciidan, boolis, askar, saraakiil la doortay, ama ungyo ciidan gaar ugu tababaran dilka, balse waxay noqon karaan koox aysan dowlada xukumi karin ama doonayn inay xukunto, sida jabhada ama koox kale oo mucaarad ah, roondeynta shacabka, ama koox kasta oo ayan dowlada xukumin ama aanan doonayn inay xukunto.

**Bal ka waran haddii la ii hanjabo ama si xun la iila dhaqmo sababo shaqsiyan ah?**

Keliya <u>hadduu qof si xun kula dhaqmo</u> sababo shaqsiyan la xiriira, uma qalantid magagelyo ama ku hayn. Tusaale, waxaad u qaameysan tahay dad wax ku deymiyey lacag waa ayna ku daba joogaan sababtaas darteed, taasi ma aha wax ku saleysan sheegashada magangelyada ama ku haynta. Xiataa haddiii qofka lacagta ku daymiyey askari yahay, dhibaatadu markaa waa shaqsiyan aslamba, oolaba qofood ka dhexeysa.

Si kastba ha'ahaatee haduu qof ku daba joogo sababo kala duwan, ee aan aheyd dhamman waxyaabaha shaqsiyanka ah, waad u qalmi kartaa. Tusaale ahaan, haddu askariga lacagta deynta kugu leh kuugu hanjabo inuu militariga u sheegayo inaad adigu tahay qarandumis, oo ay noqon karto ina lagu saxariiriyosababo siyaasadeed (sababo la xiriira inay dowladu moodo inaad tahay cadowga wadanka) kadibna run ahaantii waad u

qalantaa magangelyo ama ku hayn.

**Bal ka waran haddi mudooyinkii la soo dhaafay la iigu saxariiriyey mid ka mid ah sababahaas, balse la iigu saxariirin doonin mid ka mid ah sababahaas haddan ku laabto dalka?**

Waxaa jirta laba siyaabood macquulgal ah oo magangelyo laguugu siin karo.

1. Madaxa Laanta socdaalka ama DHS ayaaba ku qancay inaad ka cabatay saxariirintaa argagaxa leh ee aan kugu dhici karin haddii aad dalkaaga ku laabato. Waa wax aad muhiim u ah inaad u sheegto DHS ama Xaakimka Laanta Socdaalka dhamaan iyadoo faahfaahsan waxyaabaha aad ka cabatay waqtiyadii tegay.
2. Haddii waqtiyadii tegay laguugu soo saxariiryey mid ka mid ah shantaas sababood ee kor ku taxan oo ay ahaan doonaan wax halisteeda leh sababo kale marka loo fiiriyo hadii lagu celiyo. Halkani waxaa ah tusaale: waxaa laguugu soo saxariiriyey diintaad waa' hore lasoo dhaafay. Dalkaaga isbedelo ayaa ka dhacay hadana dadka diintaada haystaan lama sii saxariiriyo. Balse adigu waxaad ka baqeysaa haddii laguugu celiyo dalkaaga waayo si halis ah ayaa laguu dhibaateynayaa waxyaabo sababo kale la xiriira. Waxaad awoodi kartaa inaad hesho magangelyo.

Fadlan xusuusnow inaadan ku hayn oo dal ka saaris ah ku heli karin mida hoos timaada INA qeybta 241(b)(3) labadaas siyaabood midkood. Waxaad si macquul li awoodi kartaa keliya inaad hesho magangelyo.

**Bal ka waran haddii aan uga soo tegay inaanan dooneyn inaan ka qeybqaato dagaalka?**

Ugu horreyn, waxay ku xirantahay <u>sababta aadan u doonayn inaad ka qeybqaadato.</u> Hadii aadan dooneyn inaad adeega militariga qabato ama haddaad diido inaad ku biirto ciidanka ama jabhada sababo la xiriirta waxaad rabtaa inaad la joogto qoyskaaga, ma aha sababo la xiriira inaad si qumman, wadaad u tahay, ama siyaasad ahaan uga soo horjeedo hal dhinac ama kan kale, way adkaanaysaa inaad hesho magangelyo. Hadaan si kale u dhigo, way adagtahay inaad muujiso in lagu saxariirinayo sababo la xiriira fikir siyaasadeed oo aadan fikir siyaasadeed qabin.

Waxay ku hadba ku xirantahay <u>maxaa adiga laguu saxariirinayaa</u>. HAddii diidmadaadu tahay inaad u hogaansanto adeega militeriga ay hogaamiso dowlada ama jabhada oo ay aaminsan tahay inaad hal dhinac taageersan tahay, ama hadey si xun kula dhaqmaan, sababo la xiriira inay kuu tixgeliyaan inaad cadawgooda tahay, waxaa la dhihi karaa in dowlada ama jabhada ay ku saxariirin doonaan,sababo la xiriira fikirkaaga siyaasadeed Iama sababo la xiriira waxay moodaan inaad fikradaha siyaasada qaarkood aad haysato).. Laakin tusaale ahaan, haddii xubno dowlada ka mid ah kugu xabisaan ama kuu xiraan ciqaab ahaan ee ayan qeyb ka aheyn ka qeybgalida adeega militaraiga, ama sababo la xiriira inaysan moodin inaad taageersan tahay jabhada, ma haysatid sheegashada gundhiga magangelyo siyaasadeed, waayo wax ay fikirkaaga siyaasadeed ka haysato ma jiraan.

Hal dhibaato guud oo jirta ayaa waxay tahay dadka codsanaya magagelyada kadib markay diidaan inay ka qeybgalaan dagaalka ayaa xaakima wuxuu dhihi karaa dhibaateynta ay ka cawdeen ayaa waxay tahay sababo la xiriira inay dowladu doonayso inay meelmariso sharciga, ee ma aha inay dadka saxariirinayso sababo fikir siyaasadeed la xiriira. Waxaa awoodi kartaa inaad u qalanto magagelyo, hadaad tusido in adiga ama dadka kale ee isku xaalada wada tihiin lasoo silciye, la laayey, ama si xun loola dhaqmay si aan sharciga aheyn, waayo taasi waxay muujin kartaa in lagu soo saxariiriyey ama lagu saxariirin doono sababo siyaasad la xiriirta ee aysan aheyn sharci meelmarinta dalkaaga.

**Ma u qalmaa inaan magangelyo helo ama ku hayn hadaad u imaaday inaan nolosheyda bedelo oo wadankeyga wax halis ah kuma qabo?**

Haddaad dalka Mareykanka u timaaday keliya sababo la xiriira shaqo la'aan ama faqri, uma qalantid. Balse, waxaad u timaaday dalka Mareykanka sababo la xiriira waayo faqiir baad aheyd iyo sidoo kale noloshaada halis ayey dalkaaga ugu jirtaa in si xun loola dhaqmo sababo la xiriira fikirkaaga siyaasadeed, koox bulsho, sinji, dhalasho, ama diin waad qalmi kartaa.

**Bal ka waran haddii aan habdhaqan xun la baqayo balse sababo kale ah?Bal ka waran haddii aan u baqayo sababo habdhaqan xun ama sababo kaleba?**

Magangelyo ama ku hayn oo dal ka siiris hoos imaanaysa qeybta INA 241(b)(3) ilaa aad ka muujiso saxariirin la xiriirta mid ka mid ah shanta sababood aynu soo sharaxnay. Balse <u>haddaad u baqeyso inuu ku silciyo sarkaal dalkaaga jooga, ama haddaad tusinayso ina dowladaada ay rabitaan leh u ogolanaysoin lagu silciyo, balse aadn cadeyn karin inay tahay mid ka mid ah shanta sababood ee aynu soo sharaxnay, waxaad awoodi kartaa inaad hesho badbaadodalka Mareykanka ahoo ku saleysan wax loogu yeero **"Shirweynihii Qaramada Midoobay ee La dagaalanka daaweynta ama ciqaabta Silcinta iyo Xasadnimo Kale, Biniaadan ka baxnimada ama Sharafdhac"**</u> **(ama iyadoo gaaban, ("Shirweynihii La dagaalanka Silcinta").**. Badi aqriska buugyarahan ee doodeena sida loo codsanayo badbaadinta hoos timaada Shirweynihii La dagaalanka Silcinta.

## YAANAN U QALMIN MAGANGALYO AMA LOO HAYO RARITAAN?

**<u>Sharciga kuuma ogolaanayo inaad codsato magangalyo haddii:</u>**

1) Aad joogtey wadanka Mareykanka in ka badan hal sano ka hor intaadan buuxinin codsiga magangelyada (waxaa jiro waxyaabo ka reeban sharcigan!)
2) Haddii aad magangelyo ka codsatey maxkamada socdaalka ee Mareykanka hada ka hor oo ay kaa dhuntey (waxaa jiro waxyaabo ka reeban sharcigan sidoo kale!).

**<u>Sharciga kuuma ogola inaad hesho hibo magangelyo haddii:</u>**

1) Haddii aad horey ugu soo aasaastey xiriir adag ee wadan kale kaasoo laguu tixgeliyey in halkaas lagaa siiyo "dib u dejin dhab ah".
2) Haddii laguugu soo oogey dembi oo "dembi weyn" (oo goor danbe la sharaxayo).
3) Haddii laguugu soo oogey "dembi qaas ah oo qatar ah" oo qatar ku ah bulshada (oo goor danbe la sharaxayo).
4) Haddii aad ka qeybqaadatey dhibaato qof kale loo geystey, sababo jinsi, diin, dhalasho, ka mid ahaansho qabiil gaar ah, ama fikrado siyaasad.
5) Haddii aad ku gashid dembi qatar ah meel ka baxsan wadanka Maraykanka kaasoo aan eheen dembi siyaasadeed.
6) Haddii laguu tixgeliyo inaad argagixiso tahay ama aad qatar ku tahay amniga wadanka Mareykanka.

**<u>Sharciga kuuma ogola inaad hesho heyn oo raritaan ah haddii:</u>**

1) Haddii aad gashey "dembi qatar ah oo qaas ah" oo khatar ku ah bulshada (oo goor danbe la sharaxayo)
2) Haddii aad ka qeybqaadatey dhibaato qof kale loo geystey, sababo jinsi, diin, dhalasho, ka mid ahaansho qabiil gaar ah, ama fikrado siyaasad.
3) Haddii aad ku gashid dembi qatar ah meel ka baxsan wadanka Maraykanka kaasoo aan eheen dembi siyaasadeed.
4) Haddii laguu tixgeliyo inaad argagixiso tahay ama aad qatar ku tahay amniga wadanka Mareykanka.

Haddii lagugu soo oogey dembi "dembi weyn" xaq waad <u>u lahaan kartaa ama uma lahaan kartid</u> in lagu haayo. Haddii aad leedahay hal ama in ka badan oo dembiyo waaweyn ah oo xukunka dembiyadaasi waaweyn lagu daro mudo shan sanadood ah, xaq uma lihid in lagu haayo. Haddii xukunka xaalada xun ee dembiga weyn ama dembiyada waaweyn ay ka yar yihiin shan sano, waxaad xaq u yeelan kartaa in lagu haayo laakin kaliya haddii aad cadeyso in jariimada ama jariimooyinka aysan eheen "kuwo qatar ah". Goor danbe ayaan ka xaajoon doonaa sida loo diyaariyo kiiskaan oo kale.

**Muxuu yahay sharciga aad ku dalban karto magangalyo mudo hal sano gudahooda oo imaansho ah?**
Laga soo bilaabo bishii Abriil 1deeda, 1988, ma codsan kartid magangelyo ilaa aad ka muujisid inaad ku sugneyd wadanka Mareykanka in ka yar hal sano ka hor intaadan buuxin codsiga. Adiga ayay ku quseysaa inaad garsooraha u cadeyso mudadii aad halkaan joogtey. Waxaa jiro waxyaabo ka reeban sharcigan.

**<u>Mida halka-sano ku dhamaanayo adiga kuuma dalbaayo haddii aad muujiso tan iyo intii aad ku sugneyd wadanka Mareykanka, mid ka mid ah labadaan shey way dhacaan:</u>**

1) Waxaa jira **isbedelo muhiim ah** - sida isbedelka wadankaada asalka ah, noloshaada, ama sharciyada magangelyo ee wadanka Mareykanka - kaasoo waxyeelaayo kiiskaada magangelyo. Tusaale ahaan, Haddii aad ku sugneyd wadanka Mareykanka labo sano kadibna wadankaada dowlad ka curato taasoo dadka adiga oo kale ah dhib u geysaneyso, waxaad muujin kartaa cudurdaar wanaagsan oo aadan ku dalbaneynin magangelyo (maadaama aadan qatar hore ku jirin).

**AMA**

2) Waxaa jirtey "**daruuf aan caadi aheen**" taasoo aadan kontorooli karin (macneheedu waa waxaad ku jirtey xaalad aan caadi eheen) taasoo kaa ilaalisey inaad codsi magangelyo ku buuxiso sanad gudihiisa ee soo gelitaankaada wadanka Mareykanka. Halkaan waxaa ah xoogaa tusaalooyin:
   - Aad baad u xanuunsaneyd
   - Waxaad ku sugneyd xaalad aad u dheer oo maskax iyo jir xanuun ah, oo ay ka mid yihiin dhibaato dhinaca dareenka iyo jirkaba maxaa yeelay khalalaaso adiga lagaaga soo horjeedo ama dhibaato aad dhibsatey.
   - Waxaad eheed qof aan qaangaarin oo aan la nooleyn waalidkiisa ama qofka wakiilka kaa ah.
   - Waxaad leheed qareen, qareenkaasina kuuma sheegin inaad is diiwaangeliso sanad gudahiisa oo soo galitaan ah.
   - Waad diiwaangelisay codsigaada mudo hal sano ee imaanshahaada laakin sabab jirto awgeed dib ayaa laguugu soo celiyey adigana si dhaqso leh ayaad mar labaad u diiwaangelisey.
   - Qareenkaada ama qof ka socdo qoyskaada ayaa dhintey ama wuxuu qabey xanuun qatar ah.

- Waxaad leedahay "aqoonsi ku meel gaar ah oo la ilaaliyey" oo ah sharci qaas ah; dal kugalka dadka aan muhaajiriinta eheen; waa sharci deganaansho joogto ah; ama aqoonsi la yiraahdo "siideyn aan waqtigeeda la gaarin."

Dhibaato malaha waxa kaa fogeeyey buuxinta codsiga mudo hal sano ah ee soo galitaanka wadanka Mareykanka, weli waa inaad muujisaa inaad buuxineysid codsiga magangelyada mudo "macquul ah" oo leh waqti kugu filan. Tusaale ahaan, haddii isbedelka dowlada wadankaada ay qatar ku geliso mudo 2 sanadood ka hor oo aad adigana ka warqabto, garsooraha waa macquul inuu ogaado inaad waqti dheer sugeysey oo aadan hadda dalban karin.

☞ **Haddii aad buuxinayso codsigaada magangelyo in ka badan hal sano ka dib markii aad timaado wadanka Mareykanka, isku diyaari inaad u sharaxdo garsooraha!**

Ku dar codsigaada magangelyo cadeyn kasta oo muujineysa sababta aad u sugtey.
Tusaale ahaan, haddii aad qabtey dhibaato dhinaca jirka iyo dareenka, warqad kasoo qaado dhaqtarkaada ama la taliyahaada, haddii aad u tagtey midkood.

**Xasuusnow haddii garsoorka uu go'aansado inaad seegtey waqtiga kama danbeysta ee halka sano oo aadan dalban karin magangelyo, weli waxaad dalban kartaa heyn raritaan ah.**

**Muxuu yahay sharciga haddii horey laguugu diidey magangelyo wadanka Mareykanka?**
Haddii aad magangelyo ka dalbatey wadanka Mareykanka ee Xafiiska Magangelyada laakiin aan eheen maxkamada socdaalka, marlabaad ayaad dalban kartaa magangelyo. Sidaa daraadeed, qofka la dhahaayo "Madaxa Magangelyada" ayaa wuxuu kaa qaadaa weydiimo su'aalo. Laakiin haddii aad dalbatid magangelyo oo uu kuu diido garsoorka socdaalka ama maxkamada sare oo la yiraahdo Gudiga Racfaanka Socdaalka, ma dalban kartid magangelyo waqtigaas.

Si kastaba ha ahaatee, sharcigan laguma dabaqaayo haddii aad muujin kartid in isbedel muhiim ah uu dhacay maadaama aad lumisey kiiskaada magangelyo ama ay jirto "daruuf aan caadi eheen," sida kuwii aan soo sharaxney, kuwaasoo jirey xiligii kiiskaada. **Sidoo kale, xusuuso in sharcigan uusan kaa fogeyneynin inaad codsato in raritaan laguu haayo.**

**Muxuu yahay sharciga haddii "dib u dejin lagaa siiyo" meel kale ka hor intaadan imaanin wadanka Mareykanka?**
Xaq uma lihid magangelyo haddii, ka dib markii aad wadankaada ka soo tagtid, oo "si dhab ah dib laguugu dejiyo" wadan kale. Tani macneheeda waa in wadanka kale uu ku siiyey deganaansho sharci ah oo joogto ah, wadaninimo, ama nooc kale oo ogolaasho ah oo aad si joogto ah ugu noolaato halkaasi. Si kastaba ha ahaatee, "si dhab ah dib laguuma dejin" haddii aad muujin kartid:

1) Waa inaad u safartaa wadan kale (ama wadamo kale) si aad uga baxsatid dhibaato ka hor intaadan imaanin wadanka Mareykanka oo aad halkaas joogtey maadaama aad u baahneyd inaad safarkaada sii wadato oo kaliya, mana aadan la sameynin wax xiriir muhiim ah wadankaasi kaasoo kuu ogolaadey inaad baaqi ku ahaato si sharci ah (sida inaad hanti iibsato ama aad ku guursato). AMA

2) Waa lagaa ilaaliyey inaad ku noolaato nolosha caadiga ah halkaasi maxaa yeelay waxaa jiri kara xadeyn ka hor imaaneysa xaqaada inuu shaqeeyo, hantidaada, inaad si fiican ugu noolaato guryeynta, aad safarto, inaad iskool aado, iyo inaad ugu danbeyntii wadani ka noqotid wadankaas.

**Muxuu yahay in lagugu oogo jariimo xun bal ka waran haddii aan galay mid ka mid ah?**

Uma qalantid magangelyo haddii lagugu soo oogey jariimo daran, laakin waxaad awood u leedahay inaad dalbato heyn haddii xukunkaada uu ka yaryahay shan sano.

Hoos waxaa ku qoran jariimooyinka ugu daran ee lagalo. Liis dhameystiran, fiiri majalada 8aad, qeybta 1101 (a) (43) ee xeerka wadanka Mareykanka, ama qeybta 101 (a) (43) ee sharciga socdaalka iyo jinsiyada.

DEMBIYADA AH JARIIMOOYINKA DARAN:

- kufsi
- ku xadgudub galmo ee ilmo caruur ah
- dil
- denbiyada hubka ay ka mid yihiin haysashada hubka ama qoryaha la mamnuucay
- jariimo qof shisheeye oo kontorobaan ah (ilaa iney aheyd markii kuugu horeysey ee gasho jariimo kontorobaan shisheeye waxaadna caawineysey seygaada, xaaskaada, cunug ama waalid)
- qayaano ama dakhliga canshuurta oo aad ka dhuumato, haddii uu dhibanaha lumiyo in kabadan 10,000 $
- lacag si sharci daro ku soo gasho (oo ka badan 10,000 $)

Jariimooyinka daroogada qaarkeed ama hubka gelinta suuqa madow, waxyaabaha qarxa ama daroogo.

Daroogada suuqa madow waxaa ka mid ah:

- rarid, qeybin, soo dejin;
- iibin iyo inaad tahay milkiile xaraash;
- **milkiyada daroogada denbiyada qaar** (oo ku tiirsan wareega maxkamad racfaan ee awooda xukunka kiiskaada uu yaalo);
- **milkiyada daroogada ee dembiyada qaar ee fudud**

Dembiyada qaar taasoo laguugu xukumey hal sano ama in ka badan, (haddii aad waqti ka shaqeysey ama aadan ka shaqeynin) ay ka midyihiin kuwaan soo socda:

- tuuganimo (ay ka mid yihiin in lagaa helo hanti lasoo xadey)
- tuugada guryaha jabsata
- dembi khalalaaso (ay ka mid yihiin wax kasto oo khatar ah taasoo xoog loo isticmaalo shaqsi ama hanti, xitaa haddii aanan xoog la isticmaalin)

- been abuur dukumenti (waxaa ka mid ah milkiyad, isticmaal, ama inaad sameyso waraaqo been ah) - ilaa ay aheyd dembigii ugu horeeyey oo aad u sameyso inaad ku caawiso seygaada, xaaskaada, cunug, ama waalid
- carqaladeyn cadaalad, dhaarbeenaad, marqaati laaluush
- laaluush ganacsi, beenabuur, wax aan jirin, baabuurta suuqa madow oo isbedel lagu aqoonsado
- denbiyada qamaarka qaar kaasoo xiliga xabsiga ee hal sano ama in ka badan laguugu soo rogi karo;
- in muuqaalkaada la waayo haddii lagugu soo oogo (1) in lagaa waayo balanta maxkamada ee ah eedeyn jariimo taasoo lagugu xukumi karey ugu yaraan 2 sano (xitaa haddii aan laguugu xukumin 2 sano) ama (2) haddii aadan imaanin inaad ka shaqeyso xukun dembi kaasoo lagugu xukumi karo 5 sano.

Sidoo kale waxaad tahay qof jariimo daran galay haddii dembigaada uu yahay **isku day ama shirqool** inaad gasho mid kamid ah denbiyada kor lagu xusey.

Haddii lagugu soo oogo jariimo daran oo aad caawinaad ka heleyso qareen ka socda waaxda socdaalka, weydii qareenkaada inuu dib ugu laabto dembigaada si taxadar leh. Mararka qaar qareenka waaxda socdaalka wuxuu ku doodi karaa dembigaada inuusan eheen mid jariimo daran ah. Sidoo kale, kiisaska qaar, qareen dembi difaace ah ayaa awood u heli kara inuu dib u furo dembigaada si uu u bedelo xukunka ama dabiiciga dembigaada.

Way adag tahay in dib loo furo kiisaska dembiyada mar haddii lagugu soo oogo dembi kaliya hababka qaar ee badalida maxkamada dembigaada ayaa bedeli karta dembigaada ee ujeedadiisa tahay socdaalka. DHS ayaa kasoo horjeesan karto isbedel dembigaada ama xukun haddii isbedelka la sameeyo kaliya waxaad ka fogaataa in lagaa soo raro wadanka Mareykanka. Si aad u ogaato wax badan oo arintan ku saabsan, waxaad u baahantahay inaad la hadasho qareen waaxda socdaalka oo qibrad leh.

**Ka waran haddii aan galay dembi jariimo daran ah laakin xukunkeyga wuu ka yaryahay 5 sano?**

Xaaladahaas oo kale, xaq uma lahaan doontid magangelyo, laakiin waxaad xaq u yeelan doontaa in laguu haayo raritaan. Garsooraha ayaa go'aan ka gaaraayo haddii dembigaada uu yahay "mid qatar gaar ah," haddii asaga ama ayada uu go'aansado inuu yahay, xaq uma lahaan doontid in laguu haayo raritaan. Si dhaqso leh ayaan u sharaxi doonaa waxa dhabta ah ee uu garsoorka u isticmaalaayo inuu gaaro go'aankan, laakiin waa muhiim in la fahmo taasi, inta badan, jariimada daran waxaa loo tixgeliyaa "dembi qaas ah oo qatar ah." Kaliya haddii aad muujin karto waxyaabo gaar ah oo ku saabsan dembigaada kaasoo soo yareyn kara qatarta dembigaada ayuu garsooruhu kuugu tixgelin karaa inuu raritaan kuu haayo.

**Haddii aan dembi leeyahay kaasoo aan eheen jariimo daran, ma heli karaa magangelyo ama in la ii haayo raritaan?**

Laga yaabo, laakiin ma ahan haddii garsooruhu uu go'aansado in dembigaada uu yahay "dembi gaar ah oo qatar ah." Ma jiro wax liis ah oo la fiirinaayo oo lagu arkaayo haddii uu denbigaada yahay "denbi gaar ah oo qatar ah" ama midaan qatar eheen. Kiis kasta waa kala duwan yahay, garsooruhu wuxuu u tixgelinaa 4 shey si uu u go'aansado haddii dembigaada uu ahaa mid gaar ah oo qatar ah. 4taan shey waa:

1) Dabiiciga dembiga (noocee dembi ayuu ahaa maxaana dhacay);

2) Xukunka laguugu xukumo (ama ha ahaado xukun fudud ama mid culus);

3) Haddii uu ahaa dembi shaqsi laga galay ama dembi hanti; iyo

4) Haddii daruufaha dembiga uu bulshada qatar kaaga dhigaayo.

Haddii aad isticmaasho hub, haddii laguugu xukumo xukun dheer, ama haddii aad dhaawacdo shaqsi ama aad shaqsi qatar geliso markii aad gashey dembi, waxaa macquul ah in garsooraha uu go'aansado inaad gashey dembi gaar ah oo qatar ah midkoodna xaq uma lihid magangelyo ama in laguu haayo raritaan.

**Haddii ay jirto cadeyn taasoo garsoorka ka caawineyso inuu fahmo sababta aad u gashey dembiga ama sababta dembiga ay qatartiisa u yartahay marka loo fiiriyo sida muuqaalkiisa, waxaad siineysaa garsoorka iyo DHS.** Tusaale ahaan, haddii aad dhibsatey dhibaato dhinaca dareenka ah markii aad dembiga gashey oo aad dhakhtar u tagtey ama la taliye ee dhibaatadan, waxaad heleysaa warqad ka socoto shaqsigaasi oo aad siineyso garsooraha taasoo sharaxeysa xaaladaada. Haddii ay jiraan warqado ku saabsan dembiga taasoo u janjeerta iney muujineyso inaadan qatar ku jirin, sida warqad ka timid qareenkaada dembiyada ama qof halkaas joogey markii aad dembigaada galeysey, waxaad siisaa garsoorka iyo DHS. Laakiin raadi ee galka geli waraaqaha sida ugu dhaqsiya badan oo aad awoodo, maxaa yeelay garsoorka ayaa go'aankan ka gaari kara waqti hore ee kiiskaada ka hor intaan la dhageysan sababaha aad uga cabsaneyso inaad wadankaada ku laabato.

Haddii aad dhumisid kiiskaada maxaa yeelay garsoorka wuxuu go'aamiyey dembigaada inuu yahay mid qaas ah oo qatar ah, haddii aad ka hortimaado go'aankan oo aad rabto inaad racfaan qaadato, waad sheegi kartaa racfaankaada in garsoorka uu sameeyey khalad uu ku go'aamiyey in dembigeyga uu yahay mid gaar ah oo qatar ah, waadna sharaxi kartaa sababta. Waxaan ka wada xaajooneynaa racfaanka dhamaadka buugyarahan.

**Ka waran haddii la ii diido magangelyo ama in la ii haayo raritaan sababtoo ah dembigeyga ama dembiyadeyda, laakin waxaan heystaa sabab wanaagsan oo aan uga cabsanaayo dowlada iney i jirdisho?**

Sidaan horey u soo sheegney, haddii aad ka cabsaneysid in dowladaada ama sarkaal xukuumada ka tirsan inuu ku jirdilo, waad ka fogaan kartaa ayadoo laga saaraayo adoo ka codsanaayo ilaalo heyn raritaan ah qodobka 3aad ee wadanka Mareykanka Shirka looga soo Horjeedo Jirdilka (CAT). Tani waxay noqon kartaa dhab haddii xitaa lagugu soo oogey dembi qatar ah. Hoos waxaan uga wada xaajoon doonaa habkaan badbaadada ah faahfaahin dheeraad ah.

**Muxuu yahay sharciga qof qof kale uu soo dhibaateeyey?**

Haddii aad ka qeybqaadatey dhibaato qof kale loo geystey, sababo jinsi, diin, dhalasho, ka mid ahaansho qabiil gaar ah, ama fikrado siyaasad uma qalintid magangelyo ama in laguu haayo raritaan. Tani waa dhab haddii xitaa aad mataleysey amarada madaxdaada.
Si kastaba ha ahaatee, dagaalka looga soo horjeedo askarta kale ama dagaalada ma ahan dhibaato laguu geystey.

**Garsoorka ma ii diidi karaa magangelyada ama heyn raritaan oo ah dembiyo ama falal kale?**

Haddii dembi lagugu soo oogo, sida aan horey u carabaabney, xaq uma lihid inaad hesho magangelyo ama in laguu haayo raritaan haddii uu garsoorka go'aansado: 1) in dembigaada uu yahay "mid gaar ah oo qatar ah;" 2) inaad ka qeyb qaadato dhibaato loo geysto dadka kale sababtoo ah shan sabab oo la ilaaliyey; 3) inaad ku gashey dembi qatar ah meel ka baxsan wadanka Mareykanka kaasoo aanan eheen dembi siyaaso; ama 4) in

laguu tixgeliyo argagixiso ama qatar ku ah amniga wadanka Mareykanka. Intaas waxaa dheer, haddii aad ka qeyb qaadatey xasuuq, jirdil, ama dil dheeraad oo awood ah, sidoo kale xaq uma lihid in lagu haayo. Maxaa yeelay magangalyadu waa nidaam taxadar leh oo lagu bogaado, haddii garsoorka uu go'aansado dembiyadaada ineysan eheen kuwo "gaar ah oo qatar ah," asaga ama iyada ayaa weli waxay dembigaada u tixgelin karaan iney go'aan ka gaaraan haddii aad magangelyada u qalantid. Garsoorka sidoo kale wuxuu kuu tixgelin karaa waxyaabo kale oo diidmo oo adiga kugu saabsan, sida haddii aad isticmaali jirtey waraaqo been ah inaad wadanka ku timaado ama aad shaqo ku hesho. Laakin garsoorka sidoo kale wuxuu xisaabta ku darayaa waxyaabo kale, sida qatarta aad ku wajaheyso wadankaada haddii lagu ceyriyo, caafimaadkaada, da'daada, iyo xiriirka qoyskaada ee ku sugan wadanka Mareykanka.

Xusuusnow, heynta wey ka adagtahay inaad hesho magangelyo maxaa yeelay waa inaad muujisaa in ay macquul tahay marka loo fiiriyo ineysan eheen in nafsadaada iyo xoriyadaada loo hanjabaayo haddii aad ku laabato wadankaada. Mida kale, waxyaabaha reeban qaarkood, haddii aad awoodo inaad muujiso in ay macquul tahay marka loo fiiriyo ineysan eheen in noloshaada ama xoriyadaada in loo hanjabaadey sababo jinsi, diin, dhalasho, fikrad siyaasadeed ama qabiil gaar ah, garsoorka waa inuu ku siiyaa codsigaada xitaa haddii aad leedahay cunsuro diimo ah. Waxyaabaha ka reeban sharcigan waa:

- Haddii aad gashid "jariimo gaar ah oo qatar ah";
- Haddii aad ka qeybqaadato dhibaatada loo geysto dad kale sababtoo ah mid ka mid shanta sababood ee la ilaaliyey;
- Haddii aad dembi qatar ah ku gasho meel ka baxsan wadanka Mareykanka oo aan eheen dembi siyaasadeed;
- Haddii laguu tixgeliyo argagixiso ama qatar aad ku noqoto amniga wadanka Mareykanka; iyo
- Haddii aad ka qeybqaadato xasuuq, jirdil ama dil dheeraad oo awood ah,

Haddii aad ku dhacdo mid ka mid ah qeybahaas, garsoorka kuma siinaayo heyn raritaan ah.

## YAA DALBAN KARA BADBAADO AYADOO LOO MARAAYO SHIRKII LOOGA SOO HORJEEDAY JIRDILKA?

**Muxuu yahay dalabaadka lagugu siinaayo badbaado ayadoo la hoos tagaayo Shirkii looga soo Horjeeday Jirdilka (CAT)?**

In lagu siiyo badbaado ayadoo la hoostagaayo CAT waa inaad muujisaa iney macquul tahay marka loo fiiriyo ineysan eheen in uu ku jirdili doono sarkaal dowlada ka mid ah, ama qof matalaayo ogolaanshaha dowlada, haddii laguu celiyo wadankaada hooyo. Markale, waa inaadan cadeynin in laguu jirdili doono arimo qaas ah. Waa inaad muujisaa in lagu jirdili doono.

Ma jiro waxyaabo ka reeban sharciga kor ku xusan. Isma laha magangelyada iyo heynta raritaanka oo loo maraayo qeybta INA 241 (b) (3), wax dhib ah malaha haddii laguugu soo oogo dembi, haddii aad dhibaato u geysatey shaqsi waqti lasoo dhaafey, haddii aad leedahay astaamo la ilaaliyey, ama haddii laguu tixgeliyo qatar inaad ku tahay amniga wadanka Mareykanka. Haddii aad la kulantid dalabka kor ku xusan, waxaad xaq u leedahay inaad dalbato badbaadada CAT. Tani magangelyo iyo heyn raritaan dhab ah maaha oo hoos tageysa

qeybta INA 241(b) (3) anagoo ka wada uga wada xaajoon doono liiskan waqti danbe. Haddii aad ka cabsaneyso jirdil laakin aadan xaq u leheyn magangelyo ama in lagu haayo, badbaado ka dalbo CAT. Haddii aad xaq u leedahay dhamaan sedaxda hab ee badbaadada, waxaan kuu soo jeedineynaa inaad dalbato dhamaan sedaxdaba.

**Jirdilku muxuu yahay?**

Jirdil ku sameey qof, si ikhtiyaar ah, uu kugu sababo xanuun daran ama dhibaato. Xanuunka ama dhibka wuxuu noqon karaa jirka ama maskaxda. Waa inaad ahaataa shaqsi jirkiisa koontoroola xiliga aad dhibsaneysid jirdilka. Mida kale, awood uma heleysid inaad ka baxsato qofka jirdilka sameeyey. Jirdilka waxaa ka mid ahaan kara noocyo badan oo waxyeeleyn ah sida garaacid jirka ah, kufsi, in koronto laguugu qabto, waxyaabaha maamulka ee maskaxda isbedel u keeni kara, iyo hanjabaad sidaan kuu waxyeeleysa ama shaqsi kale.

**Muxuu yahay micnaha qofka matalaayo ogolaanshaha dowlada?**

Macnaheeda waa sarkaal dowlada ka tirsan ayaa u ogolaanayo shaqsi kale inuu adiga ku jirdilo. Sarkaalka dowlada daruuri ma ahan inaad asaga aragtid markii jirdilka uu dhacaayo. Taasi macnaheeda waa dowlada wey ka war ka qabtaa jirdilka mana laga yaabo iney joojiso, inkastoo dowlada ay awood u leedahay iney joojiso jirdilka.

**Muxuu yahay faa'iidooyinka badbaadada CAT?**

Haddii lagu siiyo badbaado oo ah raritaan oo hoos tagta CAT, malagaa saari doono wadanka halkaasoo aad ka cabsaneysid jirdilka. Midkood ayaa lagu siin doonaa waxa la yiraahdo "heyn ah raritaan" ama "dib u dhigid raritaan."

"Heynta ah raritaanka" ee kiisaska CAT ayaa waxay la mid yihiin heynta raritaanka ee hoos tagta qeybta INA 241 (b) (3) oo looga soo hadley kor. Waxay leedahay faaiido isku mid ah. Tusaale ahaan, waxaad xaq u leedahay in lagaa sii daayo gacanta DHS iyo shaqo sharciga waafaqsan. Awood uma heli doontid inaad noqoto degaan joogto ah oo sharci ah sidoo kale awood uma lihid inaad keento xaaskaada/seygaada ama caruurtaada wadanka Mareykanka.
Nidaamkan badbaadada wuxuu leeyahay xijaab la mid ah kii hore. Dhinaca kale, **waad heli kartaa heynta raritaanka ayadoo la hoos tagaayo CAT kaliya haddii:**

1) Aan laguugu <u>soo oogin</u> "**dembi gaar ah oo qatar ah**" (goor danbe ayaa la sharaxi doonaa);
2) Haddii <u>aadan ka</u> qeybqaadan **dhibaato loo geysto dad kale** sababtoo ah ma jiro wax astaan badbaado ah.
3) Haddii <u>aadan ku</u> gelin **dembi qatar ah meel ka baxsan wadanka Mareykanka** kaasoo aanan eheen dembi siyaasad; iyo
4) Haddii <u>aanan laguu</u> tixgelin argagixiso ama qatar ku ahaansho amniga wadanka Mareykanka.

Haddii aad gashey mid ka mid ah dembiyada aan kor ku xusney ama laguu tixgeliyo argagixiso ama aad qatar ku tahay amniga wadanka Mareykanka, laguma siin karo heyn raritaan ah ayadoo la hoos tagaayo CAT. Si kastaba ha ahaatee, waxaad heli kartaa "raritaan ah dib u dhigid" ayadoo la hoos tagaayo CAT.

Raritaanka dib loo dhigo uma wanaagsana sida heynta raritaanka oo kale. Haddii lagu siiyo raritaan dib loo dhigo, waxaad heleysaa amar raritaan ah, dib ayaa loo dhigay. Tani macnaheedu waa DHS awood uma laha iney ku saaraan, laakin haddii daruufaha wadankaada hooyo ay isbedelaan waqti mustaqbalka, DHS waxay awood u leedahay iney ku celiso xiligaas. Sidoo kale, DHS waxay awood u leedahay iney gacanteeda kugu heyso xitaa haddii aad hesho raritaan dib loo dhigay ayadoo la hoos imaanayo CAT. DHS waxa kaliya ay ku fasaxi kartaa haddii aad cadeyso inaadan bulshada qatar ku eheen. Si aad u ogaato wax badan oo ku saabsan codsiga sii deynta DHS heyntooda, **fadlan aqri "Sida DHS loo weydiiyo iney kaa sii daayaan ilaaladooda."**

Haddii lagu siiyo raritaan dib loo dhigey ayadoo la hoos imaanaayo CAT, DHS wey soo afjareysaa ilaaladaada goor danbe haddii cadeyn la helo oo ah inaan lagu jirdili doonin. DHS kaliya tan waxay sameyn kartaa garsoorka socdaalka ka hor. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad soo afjarto aqoonsiga raritaanka dib u dhigista.

Sababahan awgood, magangelyada iyo heynta wey ka ilaalo fiicanyihiin marka loo fiiriyo raritaan dib loo dhigo. Laakiin, marlabaad, haddii aad xaq u leedahay dhamaan hababkan ee ilaalada, waxaan soo jeedineynaa inaad dalbato dhamaantood. Ogow: Ma dalban kartid raritaan dib loo dhigo; garsoorka socdaalka ayaa go'aansanaayo waxaad xaq u leedahay ee habkaan badbaadada ah haddii aadan u qalmin in laguu haayo raritaan ayadoo la hoos imaanayo CAT.

Fadlan waxaad ogaataa in xitaa haddii aad cadeyn kartid in lagu jirdili doono, DHS waxay xaq u leedahay iney dib kuugu celiso wadankaada haddii dowlada halkaas joogto ay balan qaado inaan lagu jirdili doonin. Marka loo eego DHS, kiisaska noocyadaan ah waa dhif dhif.

**Sidee ayaan u dalbadaa badbaado ayadoo la hoos tagaayo CAT?**

Haddii tani ay tahay markii ugu horeysey ee aad badbaado ka dalbaneyso CAT, waxaad u codsaneysaa sida adigoo dalbanaayo magangelyo iyo heyn raritaan. Waxaad codsi u gudbineysaa garsoorka socdaalka.

**Muxuu yahay codsiga aan u isticmaalaayo inaan dalbado badbaadada CAT?**

Waxaad isticmaaleysaa habka I-589, Codsiga magangelyada iyo midka heynta raritaanka, codsi la mid ah ayaa loo isticmaalaa in la dalbado magangelyada ama heynta raritaanka. Fiiri wada xaajoodkeena danbe oo khuseeya sida loo buuxiyo foomka. Sii taxadar qaas ah Su'aasha 4 ee qeybta B ee codsiga. Su'aasha waxay ku weydiineysaa haddii aad ka cabsaneysid jirdil. Uga jawaab faahfaahin dheeri ah oo macquul ah. Ku dar codsiga faahfaahin qeexan oo ah jirdil kasta oo aad horey u soo martey.

**Sidee ayaan ku cadeyn karaa in lay jirdili doono?**
Goor danbe liiskan waxaan uga wada xaajooneynaa sida loo cadeeyo dacwada magangelyada ama heynta raritaanka. Aqri wada xaajoodkan oo ah fikrado ah sida loo cadeeyo in lagu jirdili doono. Cadeynta waa isku mid. Tusaale ahaan, aad bey kuu caawinaysaa haddii aad warqad ka heshid dad kale oo ka warqaba xaalada siyaasada ee wadankaada ama dhibaatooyinka aad halksaas ka tabaneyso; maqaalada joornaalka oo ku saabsan waxa siyaasad ahaan ka socdo wadankaada, ama dukumintiyo xuquuqda aadanaha ah kaasoo u muujinaayo dadka xaaladaada oo kale ee wadankaada in la jirdilaayo.

Wixii warbixin dheeraad ah oo kusaabsan sida loo cadeeyo dacwada CAT, u qor:

Hay'ada xuquuada aadanaha ee dunida ee wadanka Mareykanka, 2029 NW, Suite 202 Washington, DC 20036
iimeel: info@humanrightsusa.org tel: 202-296-5702 fax: 202-296-5704

Hay'ada xuquuqda aadanaha ee dunida waa hey'ad oo balan qaadeyso iney ka caawiso dadka dhibanayaasha ah jirdilka. Haddii aad u qortid hay'ada, waxaad ahaataa qof si qaas oo macquul ah u qeexaayo waxyaabaha dhabta ah ee kiiskaada iyo sababta aad uga cabsaneysid jirdilka wadankaada hooyo.

## SIDEE AYAAN U DALBADAA MAGANGELYO, HEYN RARITAAN, AMA BADBAADADA CAT?

Asal ahaan, kiiskaada wuxuu leeyahay labo qeybood.

**Qeybta koowaad ee kiiska:**

Bilowga kiiskaada, mid ka mid ah dhageysiga kiiskaada waxaa loo yaqaanaa Macalinka Jadwalka Dhageysiga, garsoorka wuxuu ku weydiin doonaa haddii eedeyn kasta oo lagugu oogey ay dhab tahay. Weydii garsoorka inuu kuu sheego dhamaan eedeymaha. Si taxadar leh u dhageyso su'aalaha ee **haku raacin warbixinada aan dhabta ahayn**. Tusaale ahaan, haddii uu garsoorka ku weydiiyo haddii aad wadanka ku soo gashey baaritaan la'aan (sharci darro) bishii Janaayo 1deeda 1997, laakiin xaqiiqdii aad soo gashey 1998, ha sheegan in eedeynta ay dhab tahay. Haddii aadan garaneynin waqtiga dhabta ee aad wadanka soo gashey, u sheeg tani garsoorka. Tani waa muhiim maxaa yeelay goordanbe, markii aad dalbato magangelyo ama heyn raritaan ah, taariikhda aad bixineyso waxay ku jirtaa dhamaan wixii aad horey u soo sheegtay, ama garsoorka wuxuu u malayn karaa inaad been sheegeysid ama aad wixiiyoo dhan isku qaseyso. Haddii ka jawaabto su'aalaha garsoorka oo aad qirato warbixinada qaar, iska hubi in warbixin kasta ay saxan tahay.

> ☞ **Markii aad ka jawaabayso su'aalaha garsoorka eek u saabsan eedeymaha laguugu soo oogay, ku raac warbixinada keliya hadey si dhab ah u saxan yihiin. Haddii aad aaminsan tahay warbixinada qaarkood inaysan si dhab ah u saxneyn, garsoorka u sheeg.**

**Qeybta labaad ee kiiska:**
Sida caadiga ah, dowlada dhib kuma aha iney muujiso in eedeymaha lagugu soo oogey ay dhab yihiin. Intaas ka dib, garsoorka wuxuu ku weydiinaa su'aalo si uu u arko inaad u qalanto joogista wadanka Mareykanka. Sidoo kale garsoorka wuxuu ku weydiinaa haddii aad ka cabsaneysid inaad ku laabato wadankaada. Haddii aad dooneysid inaad dalbato magangelyo, heyn ah raritaan, ama badbaadada CAT, garsoorka u sharax arintaan. Garsoorka wuxuu ku weydiin karaa su'aalo ku saabsan sababta aad uga cabsaneysid inaad ku laabato wadankaada. Haddii garsoorka uu go'aansado inaad u qalanto mid ka mid ah hababka badbaadada, asaga ama ayada waxay ku siineysaa balan aad ku soo bedesho codsigaada. Kiisaska qaar, garsoorka wuxuu diyaarinaayaa balan maxkamad kale oo go'aamisa haddii aad u qalantid inaad dalbato magangelyo ama heyn ah raritaan. Sidoo kale garsoorka wuxuu ku siinaayaa talooyin qareenka maxkamada DHS wuxuu ku siinaayaa talooyin qoran taasoo aad uga baahantahay inaad tixraacdo oo aad ka galeyso codsigaada maxkamada. Talooyinka qoraalka ee DHS ayaa waxaa cinwaan looga dhigaa *Talooyinka lagu soo Gudbinaayo Codsiyada Qaarkood ee Maxkamada Socdaalka iyo Bixinta warbixinta Laga hayo qof iyo Taariikhda qofka ee Muwaadinimada wadanka Mareykanka iyo Adeega Socdaalka*.

Ka dib markii aad soo bedesho codsiga foomka oo aad soo buuxiso, maxkamada waxay kuu diri doontaa wasaarada ariamaha dibada ee Washington DC ee wadanka Mareykanka. Wasaarada arimaha dibada waxay

aqrinaayaan codsiga waxayna kuu qoraayaan warqad kale oo ku aadan fikradooda kiiska ama waxay warbixinta ku saabsan maxkamada u diraayaan wadankaada. (Wey diidaan inay ka faaloodaan kiisas badan.) Adiga iyo qareenka DHS waxaa laydin siinaa nuqul ah wixii wasaarada arimaha dibada ay u dirtey maxkamada.

Intaa ka dib, Waxaad leedahay dhageysi shaqsiyeed ama "Mudnaan". Tani waa dhageysigii ugu danbeeyey ee kiiskaada markii uu garsoorka dhageysto sheekadaada oo uu ku weydiiyo adiga iyo marqaatiyaalkaada, haddii ay jiraan, su'aalo ku saabsan codsigaada iyo waxkasta oo aad bedeshey oo garsoorka inuu fiiriyo ay tahay.

## CODSASHADA MAGANGELYADA, HEYN AH RARITAAN, AMA BADBAADADA CAT, FOOMAMKEE AYAAN BUUXIYAA SIDEENSE U BUUXIYAA?

☞ **Si aan u codsado magangelyo ama heynta, waxaad u baahantahay inaad buuxiso, nuqul ee gal geli foom la yiraahdo "I-589."**

Foomka aad u baahantahay waxaa la yiraahdaa "Foom I-589" ama Codsi magangelyo iyo heyn ah raritaan." Buuxi foomka adoo isticmaalaayo qoraalka teebka ama qalin. Weydii foomka DHS ama garsoorka socdaalka.

**Ha isticmaalin qalin qori. Sidoo kale, waa inaad ama adiga ku buuxisaa foomka luqada Ingiriiska ama inaad hesho qof kaa caawiya buuxinta foomka.**

Foomka dhamaadkiisa wuxuu leeyahay bog dhahaayo dhinaca kore, "Foom B oo Raacsan." Bogaan waa adiga inaad isticmaasho haddii ay dhacdo inaad kabaxdo sanduuqii aad ku qoreysey ee qeybta muhiimka ee foomka. Waa muhiim in looga jawaabo su'aalaha dhamaan si faahfaahsan, sidaa daraadeed waxaan kugula talineynaa inaad sameysato xoogaa nuqul ah ee "Foomka B ee raacsan" ka hor intaadan wax ku qorin. Ama, mid baad sameysan kartaa adiga. Soo qaado warqad yar oo faaruq ah ee ku qor magacaada, "lambarkaada A" (numberka laajiga), iyo dhinaca kore taariikhda. **Waxaad sidoo kale saxiixeysaa warqad kasta oo aad ku lifaaqdo codsigaada.**

Dhinaca hore ee foomka waxaa ku qoran sharaxaad dheer oo ah sida aad u buuxin leheed. Wuxuu leeyahay in, **ayadoo la raacsiinaayo codsiga foomka I-589, waxaad u baahantahay inaad bixiso DHS warbixintaada ay kaa hayso (sawir dhaqso ah iyo faraha dembiga) iyo sawir la qaado.** Haddii aad gacan kale ku jirtid, waa inaad weydiisaa DHS iney kaa caawiyaan arintaan. Haddii aad ka soo baxsatid gacantii aad ku jirtey ka hor intaadan galeynin codsigaada ama haddii aad codsigaada ku dartid xubnaha qoykaada, waa inaad heystaa sawiro iyo faraha dembiga oo la qaadey, sidaa daraadeed goor danbe ayaan ka hadli doonaa arintaan in badan. Waa inaad u hogaansanaataa warbixin shaqsiyeedka iyo faraha ay DHS u baahantahay haddi kale garsoorka maxkamada waxa uu heli karaa inaad dayacday codsigaada laa aad sabab fiican iga haysato seegida inaad u hogaansanto

**Sameey (ama weydii qofka madaxa ah inuu ku sameeyo) <u>afar</u> nuqul oo <u>sheykasta</u> aad geysey maxkamada. Sii <u>kuwa rasmiga</u> iyo 2 nuqul garsoorka socdaalka. Sii ICE 1 nuqul oo ah <u>waxwalbo</u> aad siisey garsoorka. Nuqulka kale adaa iska leh ee hayso. Ogoow: Marka laga reebo codsiga foomka I-589, waa inaad heysataa dukumintigaada rasmiga ah waa inaad siisaa garsoorka iyo ICE nuqulo dukumintiyadaan ah. Haddii aad bixiso dukumitiyada asliga ah sida warqadaada dhalashada ama baasaboorada oo aad siiso dowlada, awood uma heli doontid inaad dukumintiyada dib u hesho.**



La imow nuqulada ee dhamaan dukumintiyadaada markasto oo aad aadeyso maxkamada, laga yaabe haddii wax aad horey u bixisey ama aad dirtey iney dhumeen ama meel aan la garaneynin la dhigey, ama haddii lacala lagu weydiiyo su'aalo ayaga ku saabsan.
Sidoo kale, **markii aad galeyso foomka I-589, codsiga magangelyada iyo midka heynta raritaanka, weydii garsoorka ama kaaliyihiisa inuu istaambo kuugu dhufto nuqulga!** Waad u baahan doontaa tani lacala haddii lagaa soo daayo xabsi oo aad dooneysid inaad codsato fasax shaqo.

**Codsiga magangelyada iyo midka heynta raritaanka waa (Foomka I-589)**

Waanu ku laabaneynaa su'aalaha habka aad caawinaada u rabtey. Sidoo kale, waa inaad aqrisaa talooyinka oo ku imaanaayo foomka. Sidoo kale waxay kuu sharaxayaan sida aad uga jawaabeysid su'aalaha qaarkood. Waxaan sharaxney sida loo buuxiyo inta badan foomamka lasoo casriyeeyey xiligii aan abuurney tilmaantan, taasoo loo abuurey sida 12/14/06 (Taariikhda foomka la abuurey waxay ku daabacantahay dhinaca hoose ee gacanta midig ee foomka.) Haddii maxkamada socdaalka ama xafiiska socdaalka meesha kiiskaaga laga dhageystey oo la isticmaalaayo foom kale, ka dib numbarada iyo qeybaha aanu ku qeexney foomkaada wey kala duwan yihiin. Sharaxaadaan waxaad u isticmaalaysaa kaliya tilmaan.

Dhanka hoose ee boga koowaad ee qeybta codsiga, waxaa jira labo sanduuq oo dhahaayo "EOIR KALIYA ISTICMAAL" iyo USCIS KALIYA ISTICMAAL." lagaama rabo inaad wax ku qorto sanduuqyadaan. Marka laga reebo taasi, iyo marka laga reebo qeybaha E iyo F, dhamaadka, **waa inaad ka jawaabtaa su'aalkasta**. Haddii aysan su'aasha waxba ku weydiin, ku qor "N/A" taasoo macnaheeda uu yahay "lama heli karo" sanduuqaasi. Haddii aad ka dalbaneysid heynta ah raritaanka ayadoo la hoos tagaayo Shirka looga soo Horjeedo Jirdilka," waa inaad xasuusataa inaad iska hubiso sanduuqa kore ee boga koowaad ee qeybta codsiga kaasoo lagu daabacay ka hor bilowga Qeybta A. I.

**Qeybta A. I: "Warbixin adiga kugu saabsan"**

Hal su'aal waxay ku weydiineysaa magacyada kale ee aad isticmaali jirtey. Daacad noqo! Dad badan ayaa isticmaalo magacyo been ah markii ay DHS qabato. Haddii aad taasi sameysid, waa sharaxi kartaa sababta marlabaad aad u rabto foomka. Sidoo kale, haddii aad guursatid oo aad bedeshey magacaada, ama haddii aad weligaa u isticmaali jirtey habab kala duwan ee magacaada, qor magaca aad isticmaali jirtey.

Hal su'aal waxay ku weydiineysaa sanduuqaaga boosto ee wadanka Mareykanka. Haddii lagu ilaalinaayo, waxaad ku qori kartaa xarunta ku heysato cinwaankeeda.

Hal su'aal waxay ku weydiineysaa haddii aad guursatey. (Waxay leedahahy, "Xaalada guur.") Dad badan ayaa waxaa ay la socdaan shaqsi sanado badan laakin weligood si sharci ama rasmi ah iskuma guursan. Meelaha qaar, waxaa nalii tixgeliyaa inaad si sharci ah isku qabtiin haddii aad u noolaataan sida naag iyo ninkeeda xili waqti badan ah.Guurka noocaan waxaa la yiraahdaa guur "caadi oo sharci ah". Ma ogaan kartid waxa sharciga uu yahay halka adiga iyo ninkaada ama xaaskaada aad deganeydeen, laakin haddii "lagula socdo" haddii aad leheydeen xiriir balan ah oo waqti dheer ah oo u maleysaan in laydiin tixgeliyey "guur," waxaad sixi kartaa sanduuqa ay ku qorantahay "guur" waxaad ku qortaa "sharciga caadiga ah" -- gaar ahaan haddii aad rabtid codsigaada inuu caawiyo ninkaada ama xaaskaada iney ka helaan aqoonsi sharci ah wadanka Mareykanka.

(Haddii aad rabtid inaad ku soo wadato lamaankaada wado dacwo magangelyo oo aadan guursan, waa inaad guursataa ka hor inta garsoorka uusan/aysan go'aan ka gaarin kiiskaada). Ama, haddii lagula "socdo ama socdey" ama idinka dhexeeyey xiriir balan adag lakin aadan is guursan, waxaad sixi kartaa "kali/doob."
Hal su'aal waxay ku weydiin kartaa "jinsigaada, asalkaada ama qabiilkaada." Su'aashan ayaa waxaa laga yaabaa iney kiiskaada muhiim u tahay, gaar ahaan haddii si xun lagula dhaqmey maxaa yeelay waxaad ka dhalatey qabiilada qaar ama koox asal ah.

Hal su'aal waxay ku weydiineysaa haddii aad adiga hada ku sugantahay maxkamada socdaalka sharciga ah. Ee aad ku sugantahay, sidaa daraadeed sanduuqaas ayaad saxeysaa.

Hal su'aal waxay ku weydiineysaa inaad liiska geliso soo gelitaan kasta ee wadanka Mareykanka adoo ka bilaabaayo soo galitaanka kuugu dhow. Sidoo kale waxay ku weydiineysaa nooca "aqoonsigaada" ama "dalkugalka" waqti kasta oo aad soo gashey wadanka Mareykanka haddii aad sharci la'aan ku soo gashey, ku qor "**Baaritaan ma jirin**," iyo meesha ay kaa weydiineyso "numbarka I-94," geli "**Ma jiro**." I-94ka waa warqad aad sida caadada heleyso haddii aad sharci kusoo gashid.

Waxaa jira xoogaa su'aalo ah oo ku saabsan baasaboorkaada iyo dukumintiyada safarka. Hadaadan ka helin dukuminti safar ah wadan, geli N/A oo ah lama heli karo, mid kasta oo jawaabahaada ah.

### Qeybta A. II: "Warbixin ku saabsan xaaskaada iyo caruurtaada"

Su'aalaha qeybtaani waa iney ka jawaabaan xaaskaada ama ninkada iyo caruurtaada. Waa inaad ka jawaabtaa <u>dhammaan</u> su'aalaha loogu talagalay caruurtaada, laakin waxaa jira oo kaliya hal sanduuq oo jawaabo ku saabsan afar caruur ah oo foomka ku yaalo. Haddii aad leedahay in ka badan afar caruur ah, waxaad midkood buuxin kartaa foom lagu magacaabo "Supplement A" dhamaadka codsiga ama waxaad isticmaali kartaa warqad faaruq ah. Tani waa muhiim maxaa yeelay haddii lagu siiyo magangelyo laakin aadan liiska ku darin mid ka mid ah caruurtaada, dhib ayaa kaaga imaanaayo inaad cunugaas u hesho fasax uu ku yimaado wadanka Mareykanka.

Haddii aad isticmaasho warqad faaruq ah, iska hubi inaad ku qorto magacaada, numbarkaada, saxiixaaga, taariikhda, iyo "**Sii-wadis qeybta A.II. ee I-589.**" Kadibna, lambar ku qor su'aalaha sida qeybta A.II ee foomka, ee ka jawaab dhamaantood.

Waxaa jira waxyaabo kale oo ah inaad galeyso u baahan haddii aad ku dareyso xaaskaaga ama ninkaada ama caruur joogta wadanka Mareykanka codsigaada (ay ku jaraan sawiro, astaan gaar ah (faraha dembigalka), nuqulyo dheeraad ah ee codsigaada ah I-589, iyo cadeyn ah xiriirka idinka dhexeeyo dadkaan). Aqri talooyinka la socdo codsiga foomka kuwaasi waxaa ku siinaayo qareenka maxkamada ee DHS ee si taxadar leh u tixraac.

### Qeybta A. III: "Warbixin kusaabsan Asalkaada"

Waxaa jiro su'aalo ku saabsan meeshii aad ku nooleyd ka hor intaadan imaanin wadanka Mareykanka, meeshii aad ku nooleyd shantii sano ee ugu danbeysey, meeshii iyo goortii aad iskool bilowdey, iyo shaqooyinkii aad soo qabatey intii lagu jirey shantii ugu danbeysey. Ka jawaabida mid kasta, ka bilow safka ugu horeeyo ee xaaladaada waqtigan xaadirka. Mida kale, **ka biloow mida ugu sokeysa ee ku dhameey shan sano** (waxbarasho, ku dhameey iskoolkaada ugu horeeyey). Sidoo kale, waxaa jira taariikh, cinwaano, iyo waxyaabo

kale oo aadan xasuusanin. Qor "**ku dhowaad**" taariikhda aanan hubin, ee ku qor "**ma xasuusto**" waxyaabaha aad hilmaantey (sida cinwaanka wadada). Waxaa kaloo jira su'aalo ku saabsan waalidiintaada, walaalahaaga iyo walaalahaada gabdhaha ah. Haddii aad rabtid sanduuq dheeraad ah, waxaad isticmaali kartaa warqad dheeraad ah (kor fiiri).

### Qeybta B: "Warbixin ku saabsan Codsigaada"

Qeybta B waa qeybta ugu muhiimsan ee codsiga. Waxaad qaadaneysaa waqti badan --sidoo kale maalmo -- aad uga jawaabto. Halkani waa meeshii aad uga qancin leheyd garsoorka in lagu soo dhibaatiyeey ama lagu dhibaateyn doono ama lagu jirdili doono haddii aad ku laabato wadankaada. U sharax si aad u faahfaahsan qibradihii aad soo martey ee muhiimka ah taasoo muujineysa sababta aad uga tageyso ama sababta aad uga cabsaneyso inaad ku laabato wadankaada. Iska hubi inaad bixiso dhammaan warbixinada lagaa weydiiyey su'aalaha. Waxaad midkood ku qori kartaa jawaabahaada su'aalaha qeybta B ee codsiga ama waxaad ku qori kartaa cadeyn taasoo ka jawaabeysa dhamaan su'aalaha qeybta B. Waxaad u isticmaali kartaa foomka "Supplement B" cadeynta u isticmaal warqado faaruq ah.

Xasuuso in, ama haddii aad isticmaasho foomamka ama waraaqo faaruq ah, waa inaad gelisaa magacaada, numbarkaada, taariikhda iyo saxiixaada bog kasta. Sidoo kale, kor ku qor "**cadeynta**".


Haddii aad qorto cadeyn kala gooni ah, markii aad ka jawaabto su'aal kasta ee qeybta Bga ee foomka codsiga, waad ka jawaabi kartaa jumladaha qaar ka dibna qor "**Fadlan fiiri Cadeynta**." Habkani waxaad uga jawaabtey dhamaan su'aalahan hal cadeyn.

### Cadeynta



Cadeyntaada waa iney ahaataa sida buug ama filin kaasoo sheegaayo qisada noloshaada. Sida buug ama filin, waxay ka bilaabaneysaa bilowga, oo ah goorta iyo meesha aad ku dhalatey. Intaas ka dib, qisada waxay ku soconeysaa nidaam macquul ah, adoo soo gudbaayo mid ka mid dhacdooyinkii kugu dhacay noloshaada oo muhiim ah una gudbaayo mida kale, adoo muujinaayo qibrada aad leheed oo weliba muujinaayo dadka kuugu muhiimsanaa noloshaada. Waxaad geyneysaa ilaa iyo waqtigan xaadirka ah.

Sida filinka oo kale, waxaa jira qeybo ka mid ah qisada oo si dhaqsi leh u soconaayo, markii aad weyso faahfaahin dheeraad ah, iyo qeybo kale halkaasoo kaamirada ay si tartiib ah ku socoto oo ay muujineyso faahfaahin badan. Kaamirada waxay muujineysaa faahfaahin muhiim ah sidaa daraadeed waxaan arki karnaa wixii aad soo aragtey oo aad dareentay. Ficilka wuxuu u soconayaa dhaqaaq tartiib ah.

Cadeyntaadu waa inay sidaas oo kale noqotaa. Waxaad u baahantahay inaad ka hadasho dhamaan noloshaada, laakin waa inaad sidoo kale doorataa dhacdooyinka ugu muhiimsan ee u qeex si aad u faahfaahsan. Garsoorka, kaasoo doonaayo inuu aqriyo qisadaada, waxba kaama yaqaano qisadaada, ugu dhowaantii weligiis ma tagin wadankaada wax yar ayuu ka ogyahay ama waxba kama oga wax ku saabsan wadankaada. Shaqadaada waa lagu go'aansadaa fahankeeda ama fahankiisa. Markii aad qeexdo dhacdo muhiim u ah noloshaada -- tusaale ahaan, waqtigii laguu hanjabaadey, lagu qabtey, lagu jirdiley, ama lagu dhaawacay, ama qof ayaa ku cabsi geliyey - ka dhig garsoorka inuu  dareemo uu  arko, uu  uriyo, iyo inuu  maqlo waxa aad dareentey, aragtey, urisey oo aad maqashey.

Tusaale ahaan, kasoo qaad adigoo ku nooleyd tuulo oo ku taalo buuraleyda, meel halkaaso dagaalo badan ay ka jiraan. Habeen habeenada ka mid ah, koox rag ah ayaa kuu yimid. Waxay galeen guryaha waxayna amreen

dadka dhan iney banaanka soo baxaan. Si xun ayay ula dhaqmeen dadka waxayna u sheegeen ragga dhan iney ku biiraan kooxdooda ama iney soo noqon doonaan ay dili doonaan.

Ka hor intaadan ku qeexin dhacdadaan cadeyntaada, waa inaad ka hadashaa xaafadaada iyo wixii ay dhibaatadaan oo dhan ay ka bilaabatey. Yaa ku luglahaa dagaalka? Muxuu ku saabsan yahay? Sidee ayay u waxyeeleysay xaafadaada ka hor dhacdadaan? Sidee ayay kuu waxyeeleysay adiga? Ehelkaada ma waxyeeleysey? Deriskaada? Xubnahee qoyskaada, iyo sidee?

Markii aad ka hadleysid dhacdada, waa inaad u qeexdaa si weyn oo faahfaahsan. Goormee ayay dhacdey? Saacadee? Maxaad sameyneysey markii ay raggaan imaanaayeen? Ragga sidee ayay u labisnaayeen? Meeqo ayay ahaayeen? Horey ma u aragtey ayaga? Goormee iyo xagee? Ma waxay ku hubeysnaayeen qoryo mise hub kale? Hub ama aarmi noocee ayay wateen? Yey ahaayeen? Askar? Dagaalyahano? Sidee ayaad ku ogaatey? Sidee ayay u ekaayeen? Maxay ragga sameeyeen markii ay yimaadeen? Dhab ahaantii maxay idin yiraahdeen? Sidee ayay u dhaqan xumeeyeen dadka? Ma kuu hanjabeen adiga? Hanjabaad noocee ah ayay sameeyeen? Maku taabteen ama kula hadleen adiga, ehelkaada, ama deriskaada? Sidee? Ka hadal waxkasta oo aad aragtey, waxkasta oo dhacey, iyo waxkasta aad dareentay. Waqti intee la eg ayaa ka soo wareegtey intii lagu jirey dhacdada? Intaa ka dib maxaa dhacay? Sidee ayay kuu waxyeeleysey adiga iyo dadka kale ee xaafada? Haddii ragga ay soo laabteen markale, qeex waxa dhacay si faahfaahin buuxda ah.

Markii aad qorto cadeyntaada, waa muhiim inaad xasuusnaato magangalyo iyo heyn raritaan noocee ah oo hoos tageyso INA qeybta 241(b)(3 ku saabsan. Ujeedadooda waa iney badbaadiyaan kuwa ku sugnaa ama ku jira qatar dhibaato leh maxaa yeelay fikrada siyaasada, jinsi, dhalasho, diin ama qabiil gaar ah. Sidaa daraadeed, waa muhiim inaad sharaxdo yaa waaye qofka dhibka wada iyo sababta uu asaga ama iyada ay u dooneyso ama uu u doonaayo inuu si xun kuula dhaqmo. Tani waa sida aad u muujin karto iney kugu mataleen ama ay matali doonaan mid ka mid ah shan sababood oo aan horey uga soo hadalney.

Tusaale ahaan, haddii raggii hubeysnaa ay u labisnaayeen sida askar oo ay ku garaaceen, aad ayay macquul u tahay in wax laga qabto dhinaca siyaasada. Haddii aadan carabaabin in ragga aysan unifoom wadanin ama aadan sharaxin sida aad ku ogaatey iney askar yihiin, garsoorka wuxuu u maleynaa in garaacista ay galeen dembiilayaal caadi ah, uusan heynin wax uu ka dhaho dhinaca siyaasada ama dhibaato weyn.

Sidoo kale waa inaad carabaabtaa waxkasto aad tiri ama aad sameysey sawir ama sawiri kara dignoonaanta dadka aad ka cabsaneysid. Tusaale ahaan, haddii aad qeyb ka eheed koox loo tixgeliyo iney kasoo horjeedaan dowlada, waa muhiim inaad si faahfaahsan u sharaxdo howlaha aad ka qeybqaadatey. Sidoo kale waa muhiim inaad sharaxdo in dowlada kooxdaan ay u tixgeliso iney dowlada ka soo horjeedaan, iyo sida aad ku ogaatey arintan. Intaas waxaa dheer, waa inaad ku dartaa macluumaadka muujinaayo in qof dowlada ka tirsan uu ogyahay inaad ka qeybqaadatey kooxdaan, ama iney macquul tahay iney ogaan doonaan. Warbixintaan la'aanteeda, garsoorka wuu go'aansan karaa in dhibaatada aad ka cabsaneysid inuusan eheen mid ka mid ah shantii sababood, waadna weyneysaa kiiskaada.

Waa inaad sidoo kale ku dartaa koox kasta aad leheed, xitaa haddii aadan eheen xubin firfircoon, haddii dowlada ama qofkale uu doonaayo inuu ku waxyeelo ka mid ahaanshada kooxdaan darteed.

## *Dhibaatooyinka caadiga ah*

**>Waqti dheer ayaa kasoo wareegey inta u dhexeyso falka dhibaatada iyo xiligii aad kasoo tagtey wadanka<**

Kasoo qabo dhibkii kugu kalifey inaad wadankaada ka soo cararto ayaa wuxuu dhacay sanad ka hor intaadan soo bixin. Haddii aad joogtey wadankaada sanad ka dib dhacdada, garsoorka wuxuu ku fikiraa inaadan dhab ahaantii ka cabsaneynin joogintaanka wadankaada oo aad ku laaban kartid dhib la'aan. Waa inaad sharaxdaa wixii aad sameyneysey intii lagu jirey sanadkaas. Tusaale ahaan, haddii aad kasoo tagtey gurigaada oo aad is qarisey intii lagu jirey waqtigaan, si aad u hesho lacag aad ku soo safarto, taasoo kaa caawin karta inaad garsoorka u muujiso inaad qatar dhab ah aad ku jirtey.

**>U laabashada wadankaaga<**

Haddii aad ku laabato wadankaada ka dib markii aad la kulantey dhibaato kugu sababtey inaad wadankaada ka soo tagto, garsoorka wuxuu ku fikiraa in aad ku noolaan karto wadankaada dhib la'aan. Waa inaad sharaxdaa wixii aad sameysey markii aad laabatey oo aad faahfaahiso dhibaato kasta oo ku dhacdey intii lagu jirey xiligaas. Waxaa sidoo kale jirto su'aal ku jirto foomka oo ku weydiineyso arintaan.

**> Xubnaha qoyska ama dad kale oo weli degan wadankaada <**

Haddii aad tiraahdo in nafsadaada ay qatar dhibaato ku jirto maxaa yaaley qabiilkaada qaaska ah dartiis, iyo xubnaha qoyskaada ay ku jiraan isla qabiilkaan laakiin weli aanan kasoo tegin wadanka, garsoorka waxaa galaya shaki ah inaad wax dhibaato ah la kumeynin haddii aad laabato sidoo kale. Waa isku mid haddii aad ka qeyb qaadato koox siyaasadeed oo asxaabtaada aad isku kooxda eheydeen ay weli ku sugan yihiin wadanka. Sidaa daraadeed, haddii ay dhab ahaantii, dhibaato qabeen, waxaad warbixintan ku dareysaa cadenytaada. Ama, haddii xaaladaada ay ka duwan xaaladooda, waa inaad sharaxdaa sababta ay nafsadaada uga qatar badan tahay dadka kale ee ku sugan wadanka.

**>Faahfaahin la, aan<**

Maxkamada dhexdeeda, runtuu waa mid aad iyo aad muhiim u ah. Haddii aad dhahday waxyaabo muhiim ah oo dhacay, laakiin aadan xasuusan karin goortay ahayd, intay ku dhamaatay, ama faahfaahin kale, waxaa dhici karta in xaakinku umalaynayo inaad samaysay arintay ama mala awaashey. Faahfaahinta badan oo aad u yeeshay cadaymahaaga ayna ku jirto markaad hadlayso dhegaysigaaga, fursado badan ayaad haysataa oo xaakimkaasi kugu rumaysan karo haddii aadan si cad u xasuusan, usheeg xaakimka inay kugu adagtahay adiga waxyaabaha qaarkood sheeg ama keen taariikhaha <u>ugu dhow</u>.

Dadbadani majecla inay ka hadlaan dhacdoyin ku keenay mooral jab, ama niyad xumo haddii aad aragtay dhimashada dadkii aadjeclayd , ama lagu garaacay ama lagu kufsaday waa arin iska caadi ah inaad sheegto inaadan doonayn inaad ka hadasho wixii dhacay. Si kastaba ha'ahatee, aad iyo aad bay muhiim u tahay inaad samayso ama sheegto si dacwadaadu uguulaysato waxaad u baahantahay inaad sheegto waxkasta oo dhacay iyo shay kasta oo aad aragtay. Marnaba ha ka badbadinin. Waxaa ubaahantahay oo keliya inaad dhiiranato runtana sheegto.

**>Is khilaaf waxyaabaha aad cadeyn u keentay<**

Xaakimka iyo DHS waxa laga yaba inay dib u fiiriyaan foomkaga iyo cadaymahaaga si ay u arkan wax kasta oo aad dhahday inay run yihiin. Dad badan baa sameeya khalad si lama filaan ah kasoo dhaawaca iyaga. Tusaale ahaan, haddii aad foomkaada codsiga aad ku tiraahdo inaad ka shaqeysey wadanka Honduras ilaa Seteembar 1997, laakin maxkamada waxaad ku tiri inaad soo gashay wadanka Mareykanka bishii Ogoosto 1997 (oo aadan dib ugu laaban wadanka Honduras), garsoorka wuxuu ku fikiraa inaad been sheegeyso, maxaa yeelay warbixintan ma ahan mid jirta (mida kale, labadaba ma noqon karaan wax dhab ah). Wadanka Honduras kuma sugnaan karin bishii Seteembar 1997 isla waqtigaasna ma imaan karin wadanka Mareykanka. Intaa waxaa dheer, haddii aad cadeyntaada ku cadeyso in bishii Oktoobar 4teeda rag wata gaari buluug ah ayaa gurigeyga yimid, laakin dhageysigaadii waxaad tiri iney dhacdey bishii Disembar waxaana jirey 5 rag ah oo watey gaari giriij ah, garsoorka wuxuu ku fikiraa inaad been sheegeysid.

Haddii aadan si cad u xasuusan karin, dheh sidan, ee sharax sababta ay kugu adagtahay inaad xasuusato. (Tusaale ahaan, waxay aheyd waqti dheer ka hor, ama waxaad aad uga cabsaneysey inaad ogaato waxyaabaha qaar, ama ma arki karin ama maqli karin waxa dhacay.)

Inkastoo ay muhiim tahay inaad ku darto faahfaahin badan foomamka cadeyntaada, wey kasii muhiimsantahay inaadan cadeyn warbixinada aadan si fiican u hubin gebi ahaan. Haddii aadan xasuusan iney wax dheceen bishii Juunyo ama Luulyo, laakin waxaad ogtahay iney dheceen intii lagu jirey xagaaga, geli iney dhacdey intii lagu jirey xagaaga. Haddii aadan ogeen fogaanta u dhexeyso magaalada aad joogto iyo caasimada kiiloomitir ahaan, laakin waxaad ogtahay iney qaadaneyso maalin dhan oo lug ah, geli taasi. Haddii ay jireen inta u dhexeyso 4 ilaa 6 rag ah, 5 ha gelinin, geli "inta u dhaxeysa 4 ilaa 6." Haddii aad ku fakarto iney wax dheceen sanadkii 1992, laakin waxaa sidoo kale macquul ah inuu ahaa sanadkii 1991, geli "1991 ama 1992." Haddii taariikh la hubi ay tahay maladaada ugu wanaagsan, geli "ugu dhowaan" xitaa foomamka. Intaa waxaa dheer, iska hubi warbixinkasta oo aad gelisey cadeyntaada waa la mid wixii horey ugu sheegtey dhageysigaada.

Dad badan ayaa qaba dhibaatada ah sababo dhaqan awgeed. Dadka ku sugan wadanka Mareykanka si nidaam ayay uga fikiraan waxa dhacey, taasoo ah, ugu horeyntii sidaan ayaa dhacdey, ka dib sidaan, ka dibna sidaan. Dhaqankaada, waxaa laga yaabaa nidaamkan inuusan muhiim eheen. Laakiin waxaad u sharaxeysaa kiiskaada garsoore ku sugan wadanka Mareykanka, sidaa daraadeed, waa inaad ku qasabtaa nafsadaada iney u fakarto sida asaga ama ayada. Sidaa daraadeed, isku day inaad ahaato qof runta ka hadla. Haddii xitaa aadan xasuusan karin sanadka ay wax dhacaan, isku day inaad xasuusato sidi ayadoo eheed ka hor ama ka dib dhacdo kale oo aad dhacdooyinka isku nidaamiso oo aad markasta u sheegto nidaamkan. Wey ku caawin kartaa inaad sameyso liis kaasoo adiga aad dhowreyso kaasoo aad si nidaam ah u geliso dhacdo kasta oo aad dooneyso inaad geliso cadeyntaada. Tusaale ahaan: 1) Waxaan dhashay 1962; 2) Qoyskeyga waxay u guureen San Marcos; 3) Waxaa ka jirey xasuuq magaalada Santa Lucía, iwm.

## > Khaladaadka turjumida <

Markii aad u turjumeyso luqad kale, waa sahal inaad khaladaad gasho. Haddii uu shaqsi kuugu turjumo cadeyntaada luqada Ingiriiska, weydii shaqsiga inuu mar labaad kuugu aqriyo luqadaada hooyo sidaa daraadeed waad hubin kartaa inuusan halkaasi ka jirin wax khaladaad ah. Waa muhiim inaad dib ugu laabato waxkasto oo ku jira foomkaada codsiga iyo cadeynta si aad taxadar u leh.

## Su'aalaha qaar ee Qeybta B

Xasuuso inaad qorto "**Fadlan fiiri cadeynta**" dhamaadka su'aal kasta ee qeybta B haddii aad qorsheyneyso inaad sameyso cadeyn dheer sidii aan kugula taliney.

**Su'aasha 1aad** waxay ku weydiineysaa sababta aad u dalbaneyso magangelyo. Waa inaad saxdaa hal ama inka badan ee sanduuqyada (jinsi, diin iwm.) taasoo kaa dalbaneysa sababtoo ah waxaa jiri kar inka badan hal sabab in qof uu si xun kuula dhaqmey ama uu doonaayo inuu si xun kuula dhaqmo. Tusaale ahaan, waa macquul in lagu dhibaateeyo sababtoo ah jinsigaada iyo ka mid ahaansho qabiil koox qaas ah, ama sababo ah xubinimadaada qabiil koox gaar ah iyo fikrad siyaasadeed.

Waa inaad sharaxdaa sababta aad uga cabsaneyso inaad ku laabato wadankaada, iyo sababta aad uga soo tagtey wadankaada su'aasha 1.A. iyo 1.B. Dad badan ayaa waxay leeyihiin iney wadanka Mareykana\ka u yimaadeen iney ka shaqeystaan oo ay horumaraan. Dad kale waxay leeyihiin iney u yimaadeen in lagu lamaano xubnaha qoyskooda. Xusuusnow in ujeedada magangelyada ineysan eheen in la badbaadiyo dadka masaakiinta ah ee shaqo doonka ah, mana ahan in laysku lamaano qoysaska. Ujeedadiisu waa in la badbaadiyo dadka lagu soo dhibaateeyey mid ka mid ah shatii sababood ee aan kor uga soo hadalney. Sidaa daraadeed, ayadoo lagaa rabo inaad runta sheegto, ma ahan inaad sheegto sabab kasta oo aad u timid wadanka Mareykanka, ilaa ay la xiriirto cabsi dhibaateyn ah ayadoo loo aaneynaayo mid ka mid ah shantii sababood ama cabsi jirdil ah. Haddii aad badbaado ka dalbaneysid adigoo hoos imaanaayo CAT, waa inaad jawaabtaada ku dartaa su'aashan sabata aad uga cabsaneysid in lagu jirdilo haddii aad kulaabato wadankaada.

**Su'aasha 1A** waxay ku weydiisaa haddii, qoyskaada, ama asxaabtaada sokeeye ama dadka aad isla shaqeysaan ay weligood soo mareen waxyeeleyn ama si xun ula dhaqmid ama hanjabaad waqti hore ee qofkasta. Haddii aad ku jawaabto "maya," waxaad u baahantahay inaad sharaxdo sababta aad ugu fikireysid in si xun lagula dhaqmi doono ama laguu hanjabaadey mustaqbalka haddii aadan ku jirin waqtigii la soo dhaafey. Haddii aad saxdo, "haa," waxaad si faahfaahsan u sharaxeysaa waxii dhacay, adigoo isticmaalaayo su'aalaha foomka si tilmaan ahaan.

**Su'aasha 1B** waxay ku weydiineysaa haddii aad ka cabsaneysid waxyeeleyn ama si xun u dhaqmid haddii aad ku laabato wadankada hooyo mustaqbalka. Haddii aad saxdo "haa", waa inaad si faahfaahsan u sharaxdaa, adigoo isticmaalaayo su'aalaha foomka tilmaan ahaan. Waa inaad ka fakartaa waxa dhabta ah ee aad ka cabsaneysid. Ma waxaad ka cabsaneysaa in xoog laguugu qaado oo dowlada ay ku xerto ama kooxo kale? Ma waxaad ka cabsaneysaa in lagu jirdilo? Ma waxaad ka cabsaneysaa in lagu dilo? Ma waxaad ka cabsaneysaa dhamaan waxyaabahan? Sheeg waxa dhabta aad u maleyso iney dhacaayaan. Sheeg sababta aad ugu maleyso iney dhacaayaan. Dad kale maku dhacdey? Sidee ayay kula yihiin?

**Su'aasha 2aad** waxay ku weydiineysaa haddii adiga ama xubin ka mid ah qoyskaada la soo "dacweeyey, eedeeyey, taxaabey, la xirey, su'aalo la weydiiyey," iwm., meelkale oo aan wadanka Mareykanka eheen. Mida kale, weligaa xukuumkada dowlada maku joojisey ama xabsi makugu heysey amaba shaqsi kale? Weligaa ma lagu afduubey ama dowlada makugu heysey meel kale amaba shaqsi kale? Weligaa xukuumada su'aalo maku weydiisey amaba shaqsi kale? Jawaabtaada, waa inaad ku dartaa dhacdooyinkii laguugu dhibaateeyey sidoo kale laguugu qabtey fal dembiyeed, ama ha noqoto wadankaada ama wadan kale. Maadaama ay jirto dhibaato laguu geystey, waa muhiim inaad bixiso dhamaan warbixinta foomka lagugu weydiiyey oo aad sharaxdo sida laguula dhaqmey xiligii xabsiga laguugu haayey.

**Su'aasha 3aad** waxay ku weydiineysaa haddii adiga ama qoyskaada aad weligiin laheydeen ama aad nooc xiriir ah la laheydeen hay’ado ama kooxo wadankaada ku sugnaa. Si fiican uga fikir intaadan ka jawaabin su'aashan si aad iskaga hubisid dhamaan howlahaada iyo howlaha xubnaha qoyskaada oo qatar ku gelin kara.

Iska hubi inaad bixisey dhamaan warbixinada lagu weydiiyey, sida magaca kooxda, taariikhaha aad adiga iyo qoyskaada aad xubno ka eheydeen, masuuliyada adiga iyo qoyskaada waxa ay aheyd, iwm. Waxaad ku dareysaa sidoo warbixinada hoos imaanayo number 3. B. wax kusaabsan haddii adiga ama qoyskaada aad sii wadeen ka qeybgalka hay'adahaan ama kooxahaan.

**Su'aasha 4aad** waxay ku weydiineysaa haddii aad ka cabsaneysid in lagugu jirdilo wadankaada ama wadan kale. Tani waa su'aal muhiim ah. Haddii aad ka cabsaneysid in lagugu hogaamiyo dhibaato dhinaca jirka ama maskaxda oo lagu xadgudbo ama dhib kale, waxaad saxeysaa haa. Su'aasha waa muhiim maxaa yeelay sababaha qaar adiga uma qalintid magangelyo ama heyn, waxaad u qalantaa badbaado hoos imaaneysa CAT. Waa inaad si faahfaahsan u sharaxdaa waxa aad ku fekereyso iney kugu dhacaayaan iyo sababta aad ugu fakareyso iney kugu dhacaayaan. Sidoo kale, haddii lagu jirdiley waqti lasoo dhaafey, waa inaad halkan ku carabaabtaa. Waxaa laga yaabaa inaad horey usoo sharaxdey wixii kugu dhacay waqtigii lasoo dhafey Su'aasha 1aad, laakin waa inaad marlabaad ku xustaa halkan. Intii aad sharaxi leheed waxa kugu dhacay marlabaad, waxaad qori kartaa "Fiiri Su'aasha 1aad."

## Qeybta C: "Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan codsigaada"

**Su'aasha C 1** waxay ku weydiineysaa haddii adiga, ninkaada, ama xaaskaada, caruurtaada, waalidiintaada ama walaalahaa wiilal ama gabdho aad weligiin ka codsateen dowlada Mareykanka aqoonsi qaxooti, magangelyo, ama heyn ah raritaan. Haddii aadan hubin haddii adiga lagugu darey codsi ay buuxiyeen hooyadaa, aabahaaa, ninkaada, ama xaaskaada, ha sixin wax sanduuq ah. Bedelkeeda, geli "mahubo" ee ku lifaaq gabal warqad kaasoo sharaxeyso wixii aad ka ogtahay wax ku saabsan xaalada.

**Su'aasha C 2** waxay ku weydiineysaa wadamadee ayaad adiga, ninkaada, ama xaaskaada ama caruurtaada aad u safarteen ka dib markii aad ka soo tagteen wadankiina. Sidoo waxay ku weydiineysaa inaad sharaxdo haddii adiga ama mid ka mid ah xubnaha qoyskaada uu horey wadamo kale uga codsadey aqoonsi sharci ah. Haddii uu qorshahaada ku jirey inaad uga soo carartey dhibaato wadankaada oo aad timid wadanka Mareykanka maxaa yeelay waxaad dareemeysaa badbaado halkan iyo fursad dhaqaalo oo ka wanaagsan oo aad ka heleyso halkaas, wey fiicantahay taasi. Daacad noqo. Ka hadal wax kusaabsan dhibaato kasto oo kugu qabsatey wadan kasta oo aad safar ku soo martey, tusaale ahaan, haddii aad xukuumada wax ka qariso si aan laguu qaban ama aan lagaa saarin, ama haddii ku nooleyd kaam halkaasoo howlahaada lagu xadeeyey.

**Su'aasha C 5** waa meesha aad ka heshay fursada aad ku sharaxeyso sababta aad ugu fekereyso inaad weli awoodo codsiga magangelyo ee aad dalbaneyso in ka badan hal sano ka dib imaanshahaada ugu danbeeyey ee wadanka Mareykanka. Sida aan horey u sharaxney, waa inaad muujisaa "isbedelada muhiimka" ama "daruufaha aan caadiga eheen" si aad u dalbato magangelyo ka dib halka sano ee waqtiga ugu danbeeyo. Haddii aadan awoodin, weli waxaad dalban kartaa heyn, haddii aad xaq u leedahay.

**Su'aasha C 6** waxay ku weydiineysaa haddii aad wax dhibaato dembi ah leedahay oo waqti lasoo dhaafey ah. Waa inaad ku dartaa dhibaato dembi kasta (ama xubin kasta oo qoyska ka tirsan ee codsiga ku jira) oo aad ku gashey wadanka Mareykanka. Waa inaad ku dartaa dhamaan qabashooyinka ama dembi ku oogida. Waxaa macquul in DHS ay heyso warbixintan oo ay wax ku saabsan ku wediin doonto xiliga dhegeysigaada. Haddii aadan gelin waxyaabahan codsigaada, garsoorka wuxuu ku fikiraa inaad wax qarineyso. Xitaa haddii aad tahay bari, waa inaad liiska ku qortaa waxkasta oo qabasho ah ama eedeyn ah oo laguu diiwaangeliyo. Sidoo kale, waa inaad ku dartaa warbixinta ah inaad ku sugneyd ama ku sugantahay xabsi ku yaala wadanka Mareykanka oo u sheegtaa DHS.

## Qeybta D

Haddii uu qofkale kugu caawiyo diyaarinta foomka I-589 ama uu kuugu turjumo luqada Ingiriiska, qofkaasi waa inuu saxiixaa qeybtaan, oo uu bixiyaa cinwaankiisa/keeda iyo telefoon lambarkiisa/keeda. Haddii xitaa qofkaan uu ahaa shaqsi kale oo la heysto sida adiga oo kale, asaga ama ayada waa iney buuxisaa Qeybta E. sidoo kale foomka wuxuu leeyahay in shaqsiga uu kuu aqriyo dhamaan codsiga (oo uu ku jiro cadeyntaada, haddii ku dartey hal) <u>luqadaada hooyo ee aad u dhalatey</u> (asalkaada ama luqadaada koowaad) ka hor intaadan saxiixin. Awood uma heleysid shaqsi ku hadlaayo labadaba luqadaada iyo luqada Ingiriiska. Haddii uu qof kugu caawiyo dhamestirka foomka asagoo kugula hadlaayo luqad kale oo aad fahmeysid sidoo kale, waxaanu kugula talineynaa in shaqsiga uu xariiq dhexmariyo ereyada "luqadiisa/deeda uu/ay u dhalashey/tey" bedelkii aad dhihi leheed luqadee ayuu asaga/ayada ay kugu caawin jirtey. Tani waxay noqon kartaa muhiim haddii ay cadaato in qofkii ku saacidey uu khalad sameeyey xiligii uu turjumaayey jawaabahaada.

## Qeybta E

<u>Ha saxiixin qeybtaan ilaa maxkamadaada laga dhegeysto.</u>

## <u>Waraaqo Kale</u>

Wey adagtahay in lagu guuleysto kiiskaada adoo si sahal u buuxinaayo foomka oo u sharaxaayo kiiskaada garsoorka maalinta dhageysigaada. Haddii ay macquultahay, waa inaad isku daydaa inaad hesho waraaqo kale ama marqaatiyaal taageero kiiskaada. Badanaa, daliisha ugu weyn ee layska dhaadhaadhicin karo waa marqaati qabiir ah kaasoo cadeynaayo taageerada dacwadaada qaaska ah. Haddii aadan heli karin marqaati qabiir ah waa inaad ugu yaraan heshaa dukumintiyo dheeraad ah, sida waraaqo kaaga yimaada xubnaha qoyska ama dad kale kuwaasoo yaqaano xaaladaada wadanka, maqaalada joornaalada, warbixin xuquuqda aadanaha, sawiro, ama waxyaabo kale taasoo ah in laga sameeyo wadankaada ama adiga, kooxdaada, qoyskaada, ama dhacdo muhiim ah. Haddii aadan galeynin wax warqado ah oo aanan eheen foomkaada codsiga, waa inaad ku sharaxdaa Supplement B ee foomka I-589 sababta aad u soo gudbin weysey dukumintiyadaan oo kale. Daliil kale la'aanteed oo lagu taageero dacwadaada, aad ayay u yar tahay in garsoorka uu ansixiyo kiiskaada.

☞ **Haddii aad awoodo, soo qaado waraaqo dokumintiyo kale oo caawiya cadeynta kiiskaaga.**

Halkaan waxaa ah waraaqo tusaalooyin kale oo aad rabtid inaad siiso garsoorka. Kasoo qabo adoo kasoo tagey wadankaada sababtoo ah waxaad heshay warqad hanjabaad ah oo ka timid koox kasoo horjeeda dowlada. Waa macquul inaadan helin warqadan, laakin haddii aad heysatid, waa inaad ku faylgareysaa Maxkamada.

Sidoo kale, haddii xubnaha qoyskaada aysan kula soconin adiga, wey heli aqbaaraadka cusub ee ka jira wadankaada. Tusaale ahaan, kasoo qabo niman ka socdo kooxdii kuu hanjabtey ayaa guriga tagey ka dib markii aad kasoo baxdey. Haddii aad ku ogaatid arintaan warqad ay kuu soo direen qoyskaada, waa inaad sidoo kale faylgareysaa warqadaan. Xitaa waa inaad u qortaa asxaabtaada ama qoyskaada adigoo weydiinaayo faahfaahin ku saabsan wixii dhacay mudadii aad soo tagtey. Waraaqahaan waxay kiiskaada ugu shaqeynaayaan cadeyn ahaan.

Sidoo kale, haddii aad heysid cadeyn ah xubinimadaada ee koox oo aad ka cabsaneysid dhibaato sababtoo ah ka mid ahaanshaha kooxdan, aad ayay muhiim u tahay inaad keento maxkamada cadeyntan. Tusaale ahaan, haddii aad ka cabsaneysid dhibaato ah sababo diimeed, laga yaabee shahaadadaada dhalashada waxa ku qoran diintaada, ama magaca awoowahaada ayaa muujinaayo xubinimadaada diintaas. Shaqsi kala imaaw culumada diinta kaasoo markhaati u noqon kara macnaha magacaada. Haddii aad eheed askari ka tirsan dowlada oo aad

ka cabsaneysid dhibaateyn sababo ah inaad askari eheed, isku day inaad hesho cadeyn ah adeega militarinimadaada. Haddii aad ka cabsaneysid dhibaateyn sababtoo ah asal jinsi, la imaaw cadeyn ah asalkaada. Haddii aadan heli karin cadeynta noocaan ah, isku diyaari inaad sharaxdo sababta. Cadeynta noocaan ah aad bey muhiim ugu tahay maxkamada.

Intaa waxaa dheer, haddii uu shaqsi kuu heli karo maqaal joornaal ama majalad ama warbixn xuquuqda aadanaha ah taasoo lagu dabaqi karo kiiskaada, waa galeyn kartaa kuwaasi. Maqaalada iyo warbixinada waxay ka hadli karaan xaalada siyaasadeed ee wadankaada, dhibaatooyinka ku dhacay xubnaha kooxdaada, ama dhacdooyinka qaar oo lagu dabaqayo dhibaatooyinkaada.




Inta badan ee maqaalada lagugu dabaqo ama dad kale ee wadankaada ku sugan kuwaasoo aad isku marxalad tihiin, waa maqaalo aad u caawinaayo kiiskaaga. Badbaadada dukumintiyeynta dacwadaada.

## Dukumintiyeenta Badbaadinta Dacwadaada

Taageerida dacwada magangelyadaada, heyntaada, ama CAT dukumintiyada ayaa waxay sameyneysaa kala duwanaanshaha inaad ku guuleysato ama aad ku dhacdo kiiskaada. Waxaad u cadeyn kartaa garsoorka iney macquul tahay in lagu dhibaateeyo haddii aad ku laabato wadankaada hooyo. Si aad u hesho magangelyo, waa inaad cadeysaa mid ka mid ah dhibaateyn hore ama cabsi aad u daran ee dhibaateyn mustaqbalka oo ku saleysan jinsi, diin, dhalasho, xubin ka ahaansho koox qabiil gaar ah, ama fikrad siyaasadeed. **Waa muhiim inaad isku soo uruuriso dukumintiyada caawinaayo dacwadaada.**

Inaad dukumintiyeyso kiiskaada waa muhiim si aad u muujiso inaad runta sheegeysid oo ku saabsan wixii dhacay ama wadankaada hada ka dhacooyo. Dukumintiyada saacidi kara dacwadadaada waxaa ka mid ah:

- Dokumintiyo dowladeed/Rasmi ah (shahaado dhalasho/dhimasho, iskuul ama cashuurta diiwaankeeda)
- Dokumintiyo shaqsiyadeed (warqada dhaarta dabeecada, waraaqo ammaan, awaalmarin, waraaqo ka yimid qoyska ama asxaabta, hanjabaad qoraal ah, warbixino caafimaad, iwm.)
- Waraaqaha dhaarta marqaatofur qabiir ee marxalada wadanka, arimaha dhaqanka, ama arimo qeexan oo ku saabsan xuquuqda bini’aadanka
- Maqaalo joornaal lagu soo qaatay oo si xilliyeysan u muujinaya xaalada wadanka ama xadgudubka xuquuqda bini’aadanka
- Qoraalo Idaacadeeda ama Telefishan
- Buuggaag
- Xuquuqda Bini’aadanka oo ay kasoo baxday dokumintiyo dowladeed ama kuwo aan dowlad aheyn (tusaale Hay’ada Caalaimga ee Xuquuqul Insaanka, Qarama Midoobay, Hay’ada Ilaalinta Xuquuqda Bini’aadanka, Wasaaradda Arimaha ee Dowlada Mareykanka iwm.)

<u>Waxaa jira waxyaabo badan oo aad kusoo uruurin karto dukumintiyadaada aad ku taageereysid dacwadaada:</u>

1. Xubno qoys, saaxiib, jamaaco kuu soo qoraan waraaqo sharaxaya xaaldaada kugu haysata dalkaaga hooyo oo cadeynaysa dacwada magangelyadaada, ay kuu soo diraan maqaalo ama macluumaad kale oo taageeyada kiiskaaga.
2. La xiriir mid ka mid ah hay'adaha ku taxan boggaga soo socda oo ay la jiraan dokumintiyada kiiskaaga.
3. **Xaakimka sii macluumaadkan ama wakiilka awooda u leh, ee kaaga wakiil noqonaya dhegeysigaada.**

Haddii aadan qareen haysanin kadib waxaad sameyneysaa waxyaabahan soo socda:

1. Si aayar ah u aqriso dokumintiyadan. Keliya gudbi dolumintiyada cadeynaya dacwadaada. Ha gudbin cadeymaha ka hor imanaya waxa aad leedahay. Si kale haddii loo dhigo, siticmaal keliya macluumaadka taageeraya waxa aad u sheegi doonto xaakimka socdaalka. Xusuusnow waa inaad muujisaa in waxa aad leedahay ay run yihiin._
2. Hoos ka xariiq, **astaamey**, ama *nuuri* qeybta macluumaadka sida qeexan u taageereysa dacwadaada magangelyo, sameey intaa karto oo isku keen dokumintiyada kiiskaaga kaa caawinaya.
3. **Si aayar ah u aqriso liiska ururada soo socda. Kala bax ururka baahidaada ku habboon inuu daboolo. Buuxi Foomka Codsashada Dukuminyeenta. Fadlan xusuusnow inaad buxiso dhamaan qeybaha uu foomka ka kooban yahay. Haddaad qeyb baneyso hay'ada way ku adkaan doontaa inay isu keento dokumintiyada.**

## Habkii aad ku heli leheed dukumintiyeenta

Waxaa jira wadooyin badan taasoo awood kuu siinaayo inaad ku hesho dukuminti ku saabsan axwaasha wadankaada hooyo.

**KOW**: Haddii adiga ama xubnaha qoyska aad heysatiin barnaamijka internetka, weebsaytyadan soo socdo ayaa bixin kara warbixin kusaabsan wadankaada hooyo:

- **Hay'ada xuquuqda aadanaha ee caalamiga:** http://www.amnesty.org
- **Hay'ada ilaalinta xuquuqda aadanaha:** http://www.hrw.org
- **AsylumLaw.org:** http://www.asylumlaw.org: goobtani waxay leedahay warbixin xuquuqda aadanaha ee macluumaad kala duwan ay ka mid yihiin axwaasha wadanka ee shaqsiyeed baakado ay soo saareen Hay'ada xuquuqda aadanaha ee isbedelka Dukumintiyada (HRDE).
- **Wasaaradda arimaha dibada ee wadanka Mareykanka:** http://www.state.gov
- **DHS Xarunta Warbixinta Macluumaadka**: http://www.uscis.gov/graphics/services/asylum/ric/index.htm

**LABO**: Waxaad wici kartaa ama aad u qori kartaa hay'adahaan soo socda liiska u daabacan gadashada kaasoo dabooli kara wadankaada hooyo ama arin gaar ah:

**Barnaamijka Qaxootiga, AIUSA**
600 Pennsylvania Avenue, SE, 5th Floor
Washington DC 20003
Telefoon: 202-544-0200 x540
Fakis: 202-546-7142

Iimeel: refugee@aiusa.org

**Hay'ada Ilaalada Xuquuqda Aadanaha**
350 Fifth Avenue, 34th floor
NewYork, NY 10118-3299 USA
Telefoon: 1-(212) 290-4700
Fakis: 1-(212) 736-1300
Iimeel: hrwnyc@hrw.org

Si kastaba ha ahaatee, waa inaad ogaataa inuu jiro lacag loo dalbaayo qalabkaani iyo in howshu ay qaadaneyso waqti. Waa inaad biloowdaa isla hadda si aad u hubiso inaad heysato waqti kugu filan oo aad hesho warbixin ka hor intaan dukumintiyadaada aysan u baahan in loo gudbiyo garsoorka. Waa inaad sidoo kale dukumintiga codsigaada aad ku muujisaa waqtigaada kama danbeysta ah, taasoo ah, taariikhda dukumintiyada magangelyadaada laga galeynaayo garsoorka socdaalka.

**SADDEX**: Haddii aad raadineyso warbixin ku saabsan axwaasha wadankaada hooyo gaar ahaan la xiriira wacyigelinta isutaga, aqoonsiga jinsiga, ama aqoonsiga HIVga, kooxahaan soo socdo waxa laga yaabaa iney awood u leeyihiin iney bixiyaan dukuminti ku saabsan wadankaada hooyo oo ah lacag dhimis ama bilaash (fiiri xiriirka warbixinta ee boga xiga):

- **Hay'ada khaniisyada Caalamiga iyo Guddiga Naagaha u galmooda naagaha kale ee Xuquuqda Aadanaha. (KCGNXA)**
- **Wacyigelinta Magangelyada Qaranka ee Kala doorasho Jinsiyadeeda (WMQIL)**

**AFAR**: Haddii aad haysato lacag aad ku bixiso baaritaanka, mid ka mid ah hay'adaha soo socdo ayaa awood u leh iney ku caawiyaan (fiiri xiriirka warbixinta boga soo socda):

- **Xarunta Xogta**
- **Baaritaanka Magangelyo Siyaasadeed iyo Adeega Dukumintiga (BMSAD)**

Nasiib darro, xiliga la casriyeynaayo buugyarahan (Luulyo 2010), ma jiro hay'ado sameyn karo baaritaan ku saabsan axwaasha wadankaada hooyo si bilaash ah.

## Hay'ado

Fadlan si taxadar leh u aqri liiska ee dooro hay'ada kaliya oo ugu haboon baahidaada. Hay'adahaan soo socdo waxaa laga heli karaa iney kaa caawiyan isu keenida dukumintiyadaada si ay u taageeraan magangelyadaada, heyntaada ama dacwada CAT. Hay'adahaan ma bixin karaan talo sharci ah mana matali karaan dhageysigaada. Hay'ado badan ayaa, si kastaba ha ahaatee, bixin kara liis ay si sharci ah ugu doodayaan kaasoo laga yaabaa inay ku caawin karaan.

**Hey'ad:** **Qeexid:**

| | |
|---|---|
| **Hay'ada u dooda xuquuqda ee Caalamiga (AI)**<br>Barnaamijka Qaxootiga, AIUSA<br>600 Pennsylvania Avenue, SE, 5th Floor<br>Washington, DC 20003<br>Telefoon: 202-544-0200 x540<br>Fakis: 202-546-7142<br>Iimeel: refugee@aiusa.org<br>Weebsaayt:<br>http://www.amnestyusa.org refugee/ | **Adeegyada:** Warbixin sanadeed iyo dukumintiyo kale ee 1996 ayaa laga heli karaa websaaytkeena.<br>Ilaalinta maktabada waa iney lahaataa warbixin sanadeedkii dhowaanahan. Haddii aan la heli karin, barnaamijkeena wuxuu diri doonaa warbixin mowduuca raacsan oo ah reboot sanadeed oo loo diraayo shaqsiyaadka la heysto kuwaasoo aanan heysanin barnaamijka intarneetka. Barnaamijkeena wuxuu nuqulyo gacmeed u dirayaa qalabka la aqoonsanyahay ee AI oo aan laga heli karin intarneetka, wuxuuna sameynaa baaritaan macquul ah. Weynu sii wadeynaa xiriirinta dadka iskaaga ah kuwaasoo awood u leh iney bixiyaan warbixin kusaabsan axwaasha ama xaqiijin ku saabsan dhacdo gaar ah ama dhacdo wadan gaar ah.  Waxaan diyaarineynaa warqad faahfaahsan oo ah aasaas xadeysan.<br>**Lacago:** Lacag ma jirto.<br>**Sida loo codsado macluumaad:** Xiriirka iimeelka ayaa la doorbidaa. Shaqsiyaadka xeran xitaa waa laga yaabaa iney soo diraan codsi iimeel ama fakis. Fadlan ku dar numbarkaada qaxooti, wadankaada asalka, warbixinta xiriirka, aqoonsiga kiiska, ay ka midyihiin taariikhda su'aalaha ama dhageysiga. Halkii la heli karo, soo dir sheeko dhameystiran ee dhaartaada ama cadeyntaada, laakin mid ogoow ama waxyaabo kale oo muhiim ah oo aad raadineysey inaad iska xaqiijiso. |
| **Xarunta Xogta**<br>1904 Franklin St., Suite 900<br>Oakland, CA 94612-2912<br>Telefoon: 1-800-735-374<br>Fakis: (510) 835-3017<br>http://www.datacenter.org | **Adeegyada:** Xarunta Xogta waxay dib u heleysaa maqaalada taxanaha balaaran ee faafinta warbixinta ee la xiriira xuquuqda binaadamka iyo rayidka ee axwaasha wadamada caalamka. Dooro (buugaag) iyo warbixino gaar ah ee hay'adaha xuquuqda aadanaha iyo macluumaad tixraac leh oo bixinaayo warbixin dheeraad ah.<br>**Lacagaha:** Shaqo lacagta saacadle ah nuqulyeynta dukuminti, lacagaha gaarsiinta oo ku xiran adeega lagaa dalbadey, iyo helintaanka intarneet xiriirsan iyo dib u helida lacagaha. Baaritaanka caadiga ah waa $300.00-$500.00. Lacag horumarin oo la mid ah qiimihii la qiyaasey ayaa la rabaa, lagu bixin karo jeeg ahaan, VISA ama kaarka mastarka.<br>**Sida loo codsado warbixin:** Qareenkaada ama xubnaha qoyskaada hanala soo xiriiraan wixii ku saabsan codsigaada telefoon ama iimeel.<br>**Lama aqbalaayo wicitaanka telefoonada in la ururiyo.** |

| | |
|---|---|
| **Khaniisiinta Caalamiga & Xuquuqda aadanaha ee Naagaha u tageysa naagha kale Gudiga (IGLHRG)**<br>Dukumintiyada Barnaamijka Magangelyada<br>P.O. Box 550<br>San Francisco, CA 94104-<br>Telefoon: (415) 398-275<br>Fakis: (415) 398-4635<br>mailto:asylum@iglhrc.org | **Adeegyada:** Dukumintiyada Barnaamijka Magangelyada ee IGLHRC waxay caawiyaan dacwadaha magangelyada ay sameysey kuwa ka cabsanayo dhibaateyn maxaa yeelay wacyigelintooda isu taga, aqoonsiga jinsiga, ama aqoonsiga HIV. Waxaan bixinaa numbar la xushey ee axwaasha wadanka, ay ku jiraan dukumintiyada kaa caawinaayo xadgudubka xuquuqda baniaadamka ee dembi laga galay naagaha u tago naagaha kale, khaniisiinta, labeebka, isdhaafka jinsiga, iyo dadka qaba HIV/AIDSka. Waxaan siinaa xirmooyin dadka tixgelinaayo dacwada magangelyo, dalbadayaasha magangelyada, qareenada, u doodayaasha socdaalka, iyo qeybo kale oo xiiseeya. Ma bixino la talin sharci ah, laakin waxaa laga yaabaa inaan bixino liis ah u doodayaasha socdaalka. Fadlan wac, iimeel u dir, fakis u dir ama iimeel kusoo dir codsi magangelyo oo dhameytiran oo ah foom dukuminti ah oo laga heli karo http://www.iglhrc.org. Ogoloow 2-3 usbuuc ee taageerida axwaasha wadanka. Lacag tanaasulid ayaa la heli karaa haddii aadan awoodin lacagaha dukumintiga.<br>**Ururinta wicitaanka telefoonada waa aqbal.** |
| **Magangelyada Qaranka ee Wacyigelinta Kala doorasho Jinsiyadeed (NAPSO)**<br>208 S. LaSalle, Suite 1818<br>Chicago, IL 60604<br>Telefoon: (312) 660-137<br>Fakis: (312) 660-1505<br>Saacadaha Qaadashada: Arbacada 9:00 - duhurnimo<br>Luqadaha: Ingiriiska, Isbaanishka, Faransiiska iyo Carabiga.<br>Luuqado kale waa laga heli karaa codsiga | **Adeegyada:** Shaqaalaha NAPSO waxay caawinaad farsamo siiyaan qareenada wadanka oo dhan kuwaasoo matalaayo shaqsiyaadka wacyigelinta isutaga ama magangelyo ku saleysan dacwad HIV ah. Waxaan bixin karnaa liis adeega bixiyayaasha sharciga ah iyo hay'ado uu dooda xuquuqda qaxootiga iyo magangelyo doonayaasha. Dadka ku xeran kaliya gobolka Galbeeddhexe kuwaasoo u baahan qareen ayaa nagala soo xiriiri kara cinwaanada ama telefoon numbaradii liiska lagu qorey. Tilmaamaha macluumaadka, "Ku guuleysiga Magangelyo, Heyn iyo wacyigelin ku saleysan isutaga ee CAT, Aqoonsiga Jinsi Isdhaafsiga ama Aqoonsiga heilitaanka HIVga" waxaa laga heli karaa xiriirka intarneetka ee; www.MIHRC.org.<br>**Sida loo codsado warbixin:** Fadlan nagala soo xiriir telefoon, fakis ama iimeel. |

| | |
|---|---|
| **Baaritaanka Magangelyo ee Siyaasadeed iyo Adeega Dukumintiyeenta (PARDS)**<br>145 Witherspoon Street<br>Princeton, NJ 08542<br>Telefoon: (609) 497-7663<br>(wax wicitaan ah lama aqbalaayo shaqaale luqad yaqaan lama heli karo) | **Adeegyada:** Codsadayaasha magangelyada waxaan siinaa iyo qareenkoodaba dukuminti iyo barnaamijka wadanka waxaan u soo saarnaa qubaro qaas ah oo doonaayo iney ku laabtaan oo ay qiimeeyaan codsiyada.<br>Waxaynu u hogaaminaa qiimeyn dacwadii horey loo galeeyey si aan u go'aansano mudnaanta dacwada.<br>Waxaan bixinaa dhaar ama marqaati dacwadaha mudnaanta leh iyo qiimeyn la fahmi karo ee warbixinta wasaarada arimaha dibada iyo xuquuqda aadanaha. Tusaalooyinka qaar, waxaan u hogaamin karnaa codsadaha su'aalo waxaanu ka caawinaa diyaarinta dacwo sababeysan. Waxaynu siinaa dowlada dukumintiyo asal ah.<br>**Lacagaha:** PARDS waa lacag loogu talagalay adeega hay’ada. Lacagaha waa laysku dardaraa ayadoo lagu saleynaayo waqtigii la dalbadey iyo nooca codsiga. Inta badan, laakin kuli maaha, qubarada xataa lacag ayay bixiyaan. Lacagaha waxaa laga dhimaa shaqsiyaadka u xeran DHS kuwaasoo aanan heysan wax sharci oo ay soo bandhigaan, iyo kiisaska qaarkood, shaqsiyaadka soo bandhigay asalkii hore.<br>**Sida warbixin loo dalbado:** Fadlan iimeel ku soo dir foom codsi dhameystiran (1) nuqul oo ah foomka I-589 (dalbo magangelyo) iyo dhaar aad u faahfaahsan oo cadeyneysa asalka dacwadaada magangelyo; (2) warbixin ku saabsan aqoonsiga kiiskaada, (3) balanta xigta ee su'aalahaada, dhageysigaada ama racfaankaada iyo (4) adeegyada aad dalbaneysid. Fadlan dir nuqul asalka ha dirin. Dhamaan codsiyada waa iney ahaadaan luqada Ingiriiska, oo lasoo qorey ama lagu soo daabacey qad madow adoo isticmaalaayo xarfo muuqda.<br>Fadlan kusoo dar magacyada iyo telefoon nambaryada lagala xiriiro meel ka baxsan wadanka kuwaasoo aan kala xaajoon karno dacwadaada iyo lacagahaada. ** Ogoow: fadlan iska hubi shaqsiyaadka ay telefoon kula xiriireyso PARDS in ay si fiican ugu hadli karaan Ingiriiska. |

**Fadlan xusuuso: Waraaqadaha codsi magangelyodoon kasta (I-589), ama foomam ee aad dirto waa isticmaal daaqili ah waxayna keliya kaa caawinayaan dacwadaada dokuminti. Macluumaadkan lalama qeybsanayo hay’ad kale, DHS ama hay’adaha kale ee dowliga ah iyadoon adiga lagaa haysan ogolaansho hore.**

Haddii aad jeceshahay inaad la xiriirto mid ka mid ah hay’adaha kor lagu xusey, isticmaal Foomka Codsiga Dukumintiyeenta oo lagu soo lifaaqey dhamaadka buugayarahan.

## Adigoo gaarsiinaayo Waraaqaha & Dukumintiyada Maxkamada

Warqad kasta ama dukuminti oo aad ku galeysey maxkamada oo aan Ingiriis eheen waa iney wadataa turjumid Ingiriis ah. Dhamaadka turjumida, qofka soo turjumey waa inuu geliyaa sida soo socota:

Anigoo ah (magaca qofka soo turjumey), cadeynayaa inaaa ahay qof awood xirfadeed u leh inuu turjumo dukumintiga iyo in turjumida tahay mid run ah sax ah intii karaankeyga iyo awoodeyda.

(saxiixa qofka soo turjumey)/ (taariikh)

**Haddii dukuminti ama warqad aysan eheen Ingiriis, ku soo lifaaq turjumida Ingiriiska!**

Haddii aad warqado ka heli kartid asxaabtaada ama xubnaha qoyskaada kuwaasoo ka warqaba wixii kugu dhacay wadankaada ama waxa ku dhici kara haddii aad laabato, waxaa jira waxyaabo qaar oo ay warqad kasta leedahay:

## SHARCIYADA WARAAQAHA GARSOORKA

1. Waa in lagu cinwaaneeyaa "Garsoorka Socdaalka ee Sharafta leh."
2. Shaqsiga waa inuu cadeeyaa magaceeda ama magaciisa, cinwaan, shaqada, da'da, aqoonsiga socdaalka, iyo xiriirka idinka dhexeeya (tusaale ahaan aboowe, ilmo adeer/abti, deris, madax).
3. Shaqsiga waa inuu ku qoraa warqada hadalkiisa ama hadalkeeda.
4. Haddii ay macquultahay, warqada waa in lasoo marsiiyaa nootaayo.
5. Haddii warqada aysan Ingiriis eheen, waa inay la socotaa turjumid Ingiriis ah, iyo shahaadada turjumida (Isticmaal ereyga dhabta ah ee tusaalaha aan kugu siiney.)

### Maxay dadka ku dhahaayaan waraaqohooda ku socda garsoorka?

Haddii aadan u sheegin asxaabtaada, xubnaha qoyskaada ama madaxaagii shaqada ee hore waxa ay ku qorayaan, ma garan karaan waxa ay ku dhigayaan waraaqahooda. Waxaad ku qortaa shaqsi kasta oo aad rabtid inaad warqad ka heshid. Waraaqaha aad qoreysid, waa inaad:

1. Ku sharax inaad ku sugantahay talaabo sharci ah ee socdaalka oo aad dalbaneysid magangelyo aad baaqi ku noqoto wadankan. Ku sharax oogida dembiga ama dhibaato kale, iyo inaad u baahantahay inaad garsoorka u muujiso inaad u qalanto magangelyo oo aad noqon doonto qof waxsoo saar u leh bulshada.

2. Weydii qofka inuu ku daro:
    - Sida uu asaga ama ayada kuu taqaano (tusaale ahaan, asaga/ayada waa deriskaada, walaashaa, madaxaaga), iyo ilaa intee ayuu ama ayay ku yaqaanaa ama ku taqaanaa.
    - Warbixin kale garsoorka wuxuu doonaayaa inuu ogaado, tusaale:
        - Maxay tahay muhiimada fiican uu shaqsigan kugu yaqaano adiga? Maxay yihiin waxyaabaha wanaagsan ee aad u sameysey shaqsigan ama kuwa kale ee qoyska ama bulshada?
        - Maxaa kugu dhacaayo haddii dib laguu celiyo? Kaliya dadka kuwaasoo shaqsi ahaan u yaqaano xaalada wadankaada, sida xubnaha qoyskaada, ayaa ka jawaabi kara su'aashan.
        - Taariikh shaqo noocee ayaad leedahay? Madaxaaga hore ee shaqo ayaa sheegi kara intee ayaad u shaqeysay asaga/ayada, maxay eheed masuuliyadaada, shaqaale noocee ayaad eheed.
        - Haddii laguugu soo oogey dembi qatar ah, shaqsi si fiican kuu yaqaano ama ka warqabo daruufaha dembiga ayaa ka hadli kara sida aad ugu lugleedahay

dhibaatadan, iyo sababta ay uu ugu fikiraayo ama ay ugu fikireyso inaadan marlabaad ku celin doonin dhaqankan oo aadan qatar ku noqon doonin bulshada. Waxaad sidoo kale awood u heli kartaa inaad warqad ka hesho qareenka kaasoo kugu mataalaayey maxkama dembiyada.

Haddii garsoorka socdaalka uu go'aansado inaad kaliya xaq u leedahay heyn (sababtoo ah uma qalintid magangelyo), garsoorka ma tixgelinaayo waraaqaha kuwaan oo kale. Sidii aan hore uga soo xaajooney, asaga ama ayada oo kaliya ayaa tixgelin kara dembigaada haddii asaga ama ayada ay go'aansadaan haddii aad xaq u leedahay badbaado, mida kale, haddii uu dembigaada uu yahay "mid gaar ah oo qatar ah." Hoos fiiri noocyo kale oo cadeymo ah ayaa lasoo bandhigay in kiiskaada lagu caawiyo haddii dembi laguugu soo oogey.

**Tusmo**

Haddii aad ku soo lifaaqdey waraaqo, maqaalo, ama dukumintiyo kale oo aad la keentid codsigaada, waa inaad sameyso liis dukumiyada ah. Liiskaan, waxaa la dhahaa "tusmo," wuxuu garsoorka ka caawinaa inuu arko dukumintiyada aad la timid sidoo kale waxay siin kartaa asaga ama ayada fursad uu ku fiiriyo haddii dukumintiyo ay maqan yihiin. Dhinaca kore ee liiska, geli magacaada, lambar, iyo ereyada, "Tusmada Dukumintiyada lagu Taageeraayo Codsiga Magangelydada."

**Adeega Shahaadada**

Waa inaad la timaadaa dhamaan waraaqahaada, maqaaladaada, iyo cadeymo kale isla markaasina aad la timaado foomkaada codsiga, haddii aad awoodo. Laakiin haddii aadan awoodin, sida badanaa waxaa laguu ogolaan doonaa inaad galeyso goor danbe (laakiin kahor dhageysigaada). Sidaa daraadeed, waa inaad galeysaa waraaqaha adigoo kusoo diraayo iimeelka intii aad siin leheed garsoorka iyo qareenka DHS ee maxkamada. Haddii ay sidaas tahay, waxaad sidoo kale u baahantahay inaad galeyso warqad taasoo garsoorka u muujineysa inaad soo dirtey nuqul ah DHS. Warqadaas waxaa la dhahaa "Adeega Shahaada" mid ayaad ka heleysaa dhamaadka buugyaraha. Buuxinta, waa inaad gelisaa magacaada, numbar, iyo taariikhda aad iimeel kusoo direysid dukumintiyada. Ka dib, geli cinwaanka xafiiska DHS kaasoo gacanta ku haayo kiiskaada. Madaxda weydii haddii aadan garaneynin cinwaanka. Saxiix Adeega Shahaadada ee sameey afar nuqul.

Waa inaad boosto ugu dirtaa Adeega Shahaadada asalka ah iyo asalka foomka I-589, lagu darey 2 nuqul (ay ku jirto Adeega Shahaadada), ee kusocoto garsoorka. Waa inaad u gudbisaa garsoorka 3 nuqul aah dukuminti kasto oo ku caawinaayo (xaaladaha dacwooyinka wadanka ee ku caawinayo, dacwooyinka gaarka ah ee kiiskaada, baasaboor ama dukumintiyada socdaalka, dukumintiyada aqoonsiga, iyo daliisha xiriirka qoyska). Iimeel nuqul ah u dir DHS dhamaan dukumintiyadaan ee heyso nuqulga ugu danbeeyo adiga nafsadaada. Xasuusnow inaad heysato dukumintiyada asalka ah ee muhiimka ah (tusaale, baasaboor, warqada dhalashada iyo guurka, kaarka aqoonsiga) ee u gudbi garsoorka kaliya nuqul ah dukumintiyadaan iyo DHS. Haddii aad dowlada u gudbiso nuqulga asalka ee dukumintiyada muhiimka ah awood uma lihid oo aad dib ugu hesho dowlada dukumintiyadan muhiim.

**Faraha dembiga iyo Sawirada**

Sidaan horey u soo sheegnay, haddii aad ku dareyso codsigaada xubnaha qoyskaada, waa iney lahaadaan farahooda dembiga (astaan gooni ah) oo laga qaado (ilaa iney ka hooseeyaan da'da 15) iyo iney bixiyaan

sawiro. Sidoo adigana waa inaad soo gudbixaa faraha dembigaada iyo sawiradaada. Haddii lagu xero, waa inaad weydiisaa DHS iney kaa caawiyaan daryeelka arinta. Haddii aan lagu ilaalineynin waqtigaas aad galeysey codsigaada, waa inaad daryeeshaa arintan adiga nafsadaada. Waa inaad raacdaa talooyinka DHS' oo cinwaan looga dhigay *Talooyinka loogu soo Gudbinaayo Codsiyada qaar ee Maxkamada Socdaalka ayadoo la bixinaayo Astaan gaar ah iyo Warbixn ah Taariikh nololeed oo loo diraayo Muwaadinimada wadanka Mareykanka iyo Adeega Socdaalka*, kaasoo qeexaayo sidee, goorta iyo meesha laga helaayo farahaada dembiga in la qaadey (astaan gaar ah) **Waa inaad heshaa astaanta gaar ah oo ay sameeyeen DHS. Hey'ad kale yeysan kuu sameynin arintaan maxaa heelay mala aqbalaayo.** Talooyinka waxaad ka heleysaa qareenka maxkamada ee DHS markii aad u sheegtid garsoorka inaad qorsheyneysid inaad galeyso codsigaada. Fadlan ogoow **haddii aad u fashilanto u hogaansanaanta dalabkan astaamahan leh sabab la'aan, garsoorka wuxuu u fahmaa inaad ka tagtey codsigaada wareegid.**

## KUWA DEMBIGA LAGU SOO OOGEY

Haddii aad codsaneysid magangelyo oo aad leedahay xukun dembi ama cunsuro kale oo diidmo ah ee kiiskaada, xasuuso in garsoorka uu diidi karo kiiskaada magangelyo xitaa haddii uu garsoorka uu aaminsan yahay inaad dhibaateyn uga cabsaneysid wadankaada. Haddii uu kiiskaada ku jiro xukun dembi ama cunsuro kale oo diidmo ah, waxaad la imaaneysaa dukumintiyo u muujinaayo garsoorka inaad ka xuntahay akhlaaqdaada dembi, qatar kuma tihid bulshada, waxaad ahaan doontaa qof wax soo saar u leh bulshada. Tusaale ahaan, qof si fiican kuu yaqaano -- deris, wakiil kaniisadaada ama meelaha caabudka, ama xitaa xubin qoyska ka tirsan -- ayaa wuxuu ka hadli karaa dabeecadaada aqlaaqeed iyo sababta uu asaga ama ayada aysan ugu fikireynin inaad mardanbe dhibaato ku lug lahaan doonin. Haddii aad warqad ka heli kartid madaxa shaqada oo ku siinaayo shaqo markii aad soo baxdo, taasi xitaa wey ku caawin kartaa.

### Cadeyn ku saabsan dembi ku oogid

Dheeraadka waraaqaha aad ka heleyso qoyska iyo asxaabta, waxaa jira sedax shey oo aad isku dayaysid inaad hesho haddii aad leedahay xukun dembi kaasoo kaa caawin kara inaad diyaariso kiiskaada:

1) "Warbixin Xukun hore" ee kiiskaada dembi;
2) Nuqul ah galka DHS oo adiga kugu saabsan; iyo
3) "Warqad garaac ah" oo ka socota FBI

Weynu ka hadli doonaa kuwani waxay yihiin iyo sida loo helo.

**Warbixinta Xukun hore.**

Kani waa warbixin kaasoo mararka qaarkood lagu qoro ka hor intaan shaqsi lagu xukumin kiis dembiyeed. Sida caadada ah waxay ka hadleysaa taariikh shaqsiyeed, taariikh dembiyeedkaada, ay ka mid tahay khalalaaso dembi, iyo daruufaha dembi, ku jirta waxyaabaha kale. Waxay leedahay waxyaabaha saacidaada leh, sidaa daraadeed, waxaad u baahantahay inaad galeyso Socdaalka Maxkamada. Mida kale, waxay ku dhihi kartaa waxyaabo xun oo adiga kugu saabsan. Haddii ay sidaas tahay, ugu dhowaan uma baahnid inaad nuqul siiso garsoorka. Waa fikrad fiican inaad ku laabato warbixinta laga yaabee DHS iney heysato nuqul adiga ayayna kuu isticmaaleysaa. Isku diyaari su'aal kasta oo DHS laga yaabo iney ku weydiiso oo ku saleysan warbixinta.

Waad heli kartaa nuqul warbixintaan ah adigoo wacaayo ama qoraayo qareenka kaasoo kugu matalaayo maxkamada dembiyada. Haddii aadan xasuusan qofkaas midkuu ahaa, waxaad weydiin kartaa madaxa DHS inuu fiiriyo galkaada. Warqada maxkamad dembiyeedka waxay muujineysaa magaca qareenkaada. Haddii

qareenka uu ahaa difaac bulshadeed (mahan qof aad lacag siisey), waxaad wici kartaa ama aad u qori kartaa xafiiska difaaca bulshadeed ee wadanka ama magaalada uu kiiskaada yaalo.

**Galka DHS**

Waad heli kartaa nuqul waxa ku jira galka socdaalkaada adoo sameynaayo **"Warbixin Xor ah /Codsi Sharci ee Qaas ah ee Foomka G-639)."** Waad sameyneysaa tani adigoo buuxinaayo Foomka G-639. Weydii hal madaxa DHS. **Haddii lagu xero, cinwaankaada foomka ku yaalo waa inuu ahaadaa cinwaankaada ee xarunta aad ku xerantahay.** Haddii aysan su'aasha adiga ku codsaneynin, ku qor "lama heli karo." Waa inaad ka saxiixdaa foomka meelo badan. Ugu horeyntii, su'aasha nambar laba hoosteeda, halkaasoo ay dheheyso Saxiixa Codsadaha," ka dib nambar todoba hoostiisa, halkaasoo ay dheheyso "Saxiixa ujeedada diiwaanka," iyo ugu danbeyntii nambarka sideedaad hoostiisa taasoo ka bilaabanaya, "Haddii uu jiro dil inta aad ku sugantahay wadanka Mareykanka...". Adigoo saxiixaayo, waa inaad bixisaa lacagaha qiimaha nuqulga, laakin inta badan kiisaska, ma jiro wax lacag la bixiyo.

Ka dib markii aad foomka buuxiso, iimeel rasmi ah u dir xafiiska DHS baqshada dusheeda ku qor "Codsiga FOIA". Shaqsiga la macaamilo warqadahaan waxaa laga yaabaa inuu cinwankiisa ka duwan yahay marka loo fiiriyo meeshii aad ku dirtey waraaqihii kale, sidaa daraadeed weydii madaxa cinwaanka ee "madaxa FOIA" ee xafiiska DHS degmadiisa meesha aad ku sugantahay. Adiga nuqul heyso. **Maxkamada ha u dirin nuqul foomkan ah.**

Waxay qaadaneysaa waqti dheer inaad jawaab ka heshid codsigaada, waxaad heli kartaa dhageysigaada waqtigaas ka hor. Laakiin, ma dhaawaceyso in la galeeyo foomka weyna ku caawinaysaa ayadoo kuu sheegeysa waxa xafiiska DHS uu isku dayaayo inuu ka cadeeyo maxkamada wixii kugu soo laabanaayo.
Markii aad aragtid galkaada waxay ku siineysaa fursad aad ugu diyaargarowdo inaad ka hadasho taarikhda dembigaada iyo socdaalkaada maxkamada gudaheeda ama inaad diido waraaqaha qaarkood qareenka xafiiska DHS waxaa laga yaabaa inuu doonaayo in garsoorku uu tixgeliyo.

**Diiwaanada FBI**

Haddii aad leedahay eedeyn dembi, mid kamid ah dukumintiyada uu kuu haayo xafiiska DHS ee galalkaada waa "warqad shanqar leh" oo ka timid Hogaanka Baarista dowlada Mareykanka (FBI), taaso liiska gelisey taariikhda dembigaada, ay ku jirto wax xerid ah, xitaa haddii aanan lagu xukumin. Inta badanaa tani waxaad u heli kartaa si dhaqso leh marka loo fiiriyo nuqulga ku jiro galka xafiiska DHS. Dir 1) kaar faro dembiyeed ah oo dhameystiran oo ah (Foomka FD-258), 2) shirkada lacagta ayaa u qoreysa $ 18 "FBI," iyo 3) warqad ku weydiineysa warqada shanqarta. Waa inaad saxiixdaa warqada oo aad muujisaa cinwaanka kaasoo warqada lagu diri doono. Sidoo kale waa inaad muujisaa taariikhda taasoo aad u baahantahay diiwaanka ayadoo qaadaneysa sideed usbuuc. U dir:

Hogaanka Baarista dowlada Mareykanka - Qeybta CJIS
1000 Custer Hollow Road
Clarksburg, West Virginia 26306

**Nuqul ha u dirin Maxkamada ama DHS.**

## MAXAA KU DHICI DOONO DHAGEYSIGA SHAQSI AHAANTEYDA?

Dhageysigaada kama danbeysta ah, waa inaad sheegtaa qisadaada garsoorkana wuxuu gaaraa go'aanka kiiskaada. Dhageysiga, garsoorka Socdaalka, turjume (haddii aadan Ingiriis si is daba joog ah ugu hadleynin), qareenka matalaayo xafiiska DHS (wuxuu u yeeraa "qareenka maxkamada"), dhamaantiin waad xaadiri doontaan. Haddii aad leedahay marqaatiyaal, waa iney halkaasi joogaan sidoo kale. Xafiiska DHS wuxuu yeelan karaa marqaatiyaal mucaarad kugu ah, laakin taasi ugu dhowaantii maba dhacdo.

Haddii aad leedahay xukun dembiyeed kaasoo kaa celin kara inaad xaq u leedahay magangelyo ama heyn ah raritaan, garsoorka wuxuu jadwal u sameynaa dhageysi gaar ah si uu u tixgeliyo haddii derbiga dembigaada ee magangelyo ama heynta raritaanka uu yahay mid xaq ah. Haddii aad ku guuleysato dhageysigaas, waad heleysaa dhageysiga magangelyadadaada ama heyntaada raritaanka.

Dhamaadka dhageysiga magangelyada/heynta raritaanka, garsoorka ayaa inta badan go'aansada haddii lagu siinaayo magangelyo/heyn ama haddii kale. Mararka qaar, inkastoo, garsoorka uu qaadanaayo waqti uu ku fekero ama uu qoro go'aankeeda ama go'aankiisa, waa inaad sugtaa waqti dheer.

**Garsoorka muxuu ku sameynaa dhageysiga?**

Garsoorka wuxuu go'aansanaa inaad ku qalanto magangelyo ama heyn raritaan ama heyn raritaan oo hoos imaaneyso CAT iyo haddii aad codsaneyso magangelyo, haddii aad u qalanto iyo haddii kale. Asaga ama ayada ayaa ku weydiin doonta su'aalo ku saleysan foomka, cadeyntaada, iyo dukumintiyo kale oo aad la timid, si loo fahmo sababta aad uga soo baxdey wadankaada, iyo in la go'aansado inaad runta sheegeysid.

**Muxuu sameyn doonaa qareenka xafiiska DHS (qareenka maxkamada)?**

Sidoo kale qareenka maxkamada wuxuu ku weydiinaa su'aalo. Asaga ama ayada waxay isku dayaysaa inay garsoorka u muujiso inaadan u qalmin magangelyo ama heyn raritaan, ama haddii aad dalbaneysid magangelyo, qareenka maxkamada wuxuu isku dayaayaa inuu muujiyo inaadan u qalmin. Asaga ama ayada wuxuu ku weydiinaa su'aalo taasoo ku wareerinaayo inuu dhaawaco cadeyntaada.  .Qareenka maxkamada wuxuu isku dayi karaa inuu muujiyo qaar ka mid ah jawaabahaada iney ka duwan yihiin wixii aad gelisey codsigaada foomka, ama wuxuu muujin karaa inaad horey shaqo ugu timid wadanka Mareykanka ama inaad ka fogaaneyso howlo militari, ama sababo kale, maaha maxaa yeelay waxaad ka cabsaneysaa in lagu dhibaateeyo. Haddii aad warbixin siiso dhageysigaada kaasoo aadan ku darin markii aad galeyneysid codsigaada, isku diyaari inaad shaaraxdo sababta uusan ugu jirin codsigaada maxaa yeelay qareenka maxkamada ayaa ku weydiin kara.

**Muxuu qofka turjumaanka sameynaa?**

Turjumaanku wuxuu turjumaa su'aalaha uu weydiinaayo garsoorka iyo qareenka maxkamada wuxuu u turjumaa jawaabahaada Ingiriis ahaan. Qofka turjumaanka shaqadiisa waa inuu turjumo su'aal kasta oo lagu weydiiyo iyo erey kasta oo aad sheegto. Haddii dhib ku qabtid fahanka turjumaanka ama aad ku fekerto in turjumaanka uusan si sax ah  u turjumeynin waxa aad tiraahdo, garsoorka u keen tani si uu uga digtoonaado diiwaanka la qoraayo.

**Haddii markhaatiyo ay joogaan, maxay sameynaayaan?**

Markhaatiyaasha waxay ka jawaabaayaan su'aalaha garsoorka, qareenka maxkamada, ama adiga aad weydiiso. Haddii shaqsiga adiga kuu marqaati kacaayo, adiga ayaa ah midka ugu horeeyo oo su'aal la weydiiyo asaga ama ayada. Ka dib markii aad dhameyso su'aalahaada, qareenka maxkamada iyo garsoorka waxay weydiinaayan su'aalo. Waa isku mid markii ay ku weydiinaayan su'aalo. Haddii xafiiska DHS uu leeyahay marqaati adiga kaa soo horjeeda, waxaad leedahay fursad aad ku weydiiso su'aalo sidoo kale.

**Maxaan sameeyaa?**

Biloowga dhageysiga, iska hubi garsoorka inuu heysto nuqulga dukuminti kasta oo aad rabtid inuu arko asaga ama ayada. Haddii aad heshid warqad cusub, maqaal, ama dukumintiyo kale tan iyo markii aad buuxisey codsigaada, garsoorka sii bilowga dhageysiga, iyo nuqul qareenka maxkamada. **Xasuuso markasta inaad heysato nuqul adiga nafsadaada, sidoo kale.**

Waad ka jawaabeysaa su'aalaha uu ku weydiinaayo garsoorka iyo qareenka maxkamada. Waxaad u hadleysaa si waadax ah sidaa daraadeed turjumaanku wuu maqli karaa erey kasta oo aad sheegto. Sii turjumaanka waqti ku filan oo uu ku turjumo hal ama labo jumlo ka hor inaadan sii wadin jawaabtaada ama garsoorka wuxuu maqlaa qeyb ka mid ah waxa aad dooneyso inaad u sheegto asaga ama ayada. Waxaa sii dheer, waxaad si toos ah u fiirineysaa garsoorka markii aad heleyso, ha fiirinin dhulka ama turjumaanka kaliya. Haddii kale, garsoorka wuxuu ku fikiraa inaad been sheegeysid ama aadan hubin waxa aad sheegeysid.

Markii aad ka jawaabtid su'aalaha, waad u wici kartaa dignoonanta garsoorka ee macluumaadka warqada ama dukumintiyo kale oo aad soo gudbisey. Habkaasi, waad iska hubin kartaa in garsoorka uu si aad uga digtoonaayo. Haddii aad leedahay marqaati, waxaad weydiineysaa asaga ama ayada su'aalo. Waxaad weydiineysaa magaciisa ama magaceeda, cinwaan, shaqo, iyo sida asaga ama ayada ay kugu garaneyso. Haddii uu shaqsiga ogyahay dhacdada kaa soo waday wadankaada, waxaad weydiineysaa wax ku saabsan su'aalahaas gaar ahaan. Weydii su'aalo furan sida "yaa waaye?" "Goorma?" "Xagee?" "Sababta?" iyo "Intaas ka dib, maxaa dhacay?" Sidaa daraadeed qisada waxay ka imaaneysaa qofka hadaladiisa bedelkii hadaladaada ay ka imaan leheed. Isku day inaadan su'aalo weydiinin sida, "Run miyaa in dagaalyahanada ay yimaadeen xaafadeena sedax jeer?" ama "aniga ma ihi qof qatar ah, sax?"

## SIDEE AYAAN U DIYAARIYAA DHAGEYSIGEYGA?

☞ In aad diyaar u noqoto dhageysigaada,

1. Haddii ay macquul tahay, dalbo maqaalada, warbixinada xuquuqda aadanaha, iyo dukumintiyo kale taasoo kaa caawin kara inaad garsoorka u muujiso in lagu soo dhibaateeyey ama lagu dhibaateyn doono haddii aad ku laabato wadankaada.

2. Ku laabashada cadeyntaada, codsigaada iyo waxkasta oo aad geysey Maxkamada. Sameey tani **marar** badan si aad iskaga hubisid wax kusaabsan macluumaadka, taariikhaha, iyo faahfaahimo kale.

3. Samee liis ah dhacdooyinka ugu muhiimsa ee cadeyntaada, gaar ahaan faahfaahin ku saabsan waxyeeleyn ama hanjabaad hore. Garsoorka ama qareenka maxkamada wuxuu ku weydiin karaa wax ku saabsan dhageysigan. Ku celceli adoo ka hadlaayo dhacdooyinkan si qeylo ah. Haddii aad leedahay saaxiib ku caawin kara, weydii asaga ama ayada iney aqriso ama uu aqriyo dukumintiyada oo uu ku weydiiyaa su'aalo sida adigoo joogo dhageysiga. Haddii, dhageysiga, garsoorka iyo qareenka maxkamada aysan weydiin wax kusaabsan dhacdooyinkan, u diyaargarow inaad u sharaxdo nafsadaada.

4. Haddii aad markhaati heysato, u qor su'aalaha ay maxkamada ku weydiin doonto. Dulmar su'aalahan iyo jawaabahooda.

**Sidoo kale haddii aad qabtay dhibaato denbi,**

☞ **Raadi warqado ku caawiya iyo dukumintiyo kale oo xulashadaada ah (ay ka mid yihiin warbixintaada xukun hore, hadii uu ku caawinaayo), ee diyaari inaad ka hadasho wax ku saabsan dhibaatooyinka dembigaada.**

## MAXAA DHACAYO HADDII GARSOORAHA UU GO'AAN KA GAARO KIISKEYGA?

Adiga iyo xafiiska DHS labadiinaba waxaad xaq u leedihiin inaad dagaalka kiiska sii wadaan adinkoo racfaan ka qaadanaayo go'aanka maxkamada sare oo la yiraahdo Gudiga Racfaanka ee Socdaalka (ama BIA). Maxkamadaani waa koox garsoorayaal ah ee magaalada Virginia kuwaasoo fiiriya dhamaan waraaqaha lagu galeeyey kiiska iyo waxkasta oo lagu sheegey maxkamada, waxayna go'aansadaan haddii garsoorka uu sax ahaa. Inta badan kiisaska, ilaa garsoorka uu khalad sameeyo oo ku saabsan sharciga ama warbixinta kiiskaada, Gudiga ma bedeli doonaan go'aanka. Isla markii uu garsoorka kuu sheego go'aanka (ilaa aad heshid goor danbe asagoo qoraal ah), asaga ama ayada waxay idin weydiin doonaan labadiinaba adiga iyo qareenka maxkamada haddii aad rabtiin in "laydiin celiyo racfaan," taasoo ah, haddii aad rabtiin inaad celisaan xaqaada racfaan. Sidoo kale waad ka "tanasuli kartaa racfaan," taasoo macnaheeda uu yahay inaad ka quusato xaqaada racfaan. Haddii labada dhinac "tanasulid racfaan," taasoo ah dhamaadka kiiska. Haddii aad ka "tanasusho racfaan" awood uma heli kartid inaad goor danbe aad bedesho maskaxdaada oo aad ka hor timaado go'aanka garsoorka. Sidaa daraadeed, haddii garsoorka uu diido kiiskaada, xitaa haddii aadan hubin inaad rabto racfaan, waa inaad ceshataa racfaan lacala hadaad u baahato. Haddii qof uu "ceshto racfaan," asaga ama ayada waxay heysataa 30 maalmood ay ku galeyso warqad la yiraahdo "Ogeysiis Racfaan" ee Gudiga ku sugan magaalada Virginia. Haddii xafiiska DHS uu racfaan qaato, waa inuu kuu soo diraa nuqul ah ogeysiiskan haddii aad racfaan qabsato, waa xafiiska DHS u dirtaa nuqul. Haddii dhinacna uusan galeynin Ogeysiis ah racfaan ka dib 30 maalmood, ka dib garsoorka socdaalka go'aankiisa ayaa noqda kama danbeys. Ogeysiiska racfaanka waa inuu gaaraa Gudiga Socdaalka ee Racfaanka mudo 30 maalmood gudahooda ka dib go'aanka garsoorka.

### Ka waran haddii xafiiska DHS uu racfaan ka qaato kiiskeyga?

Qareenka maxkamada wuxuu dhihi karaa asaga ama ayada wuxuu doonayaa inuu "celiyo racfaan," laakin taasi macnaheeda maaha xafiiska DHS ayaa xaqiiqdii racfaanka qaadanaayo. Si hubaal ah uma ogaan kartid ilaa 30 maalmood ee go'aanka garsoorka, haddii xafiiska DHS uusan galeynin Ogeysiis oo ah racfaan intaa ka dib, ma qaadan karto racfaan (Waa inaad ogaataa maxaa yeelay waa inaad heshaa nuqul haddii la galeeyey hal.)

Haddii xafiiska DHS ay galeeyaan Ogeysiis ah racfaan, ee foomka, dhahaayo in ay galeyn doonto wax kooban ama hadal qoran goor danbe, Gudiga Socdaalka Racfaanka wuxuu idiin soo diraa adiga iyo xafiiska DHS warqad dheheyso markii xafiiska DHS uu galeeyo warbixin kooban ama hadal iyo markii aad iimeel u dirto Gudiga jawaab kasta oo dooneysid inaad u qorto dood xafiiska DHS. Isku day inaad hesho qareen ku caawiyo arintan haddii aad awoodo.

☞ Waxaa dheeraad ah, haddii guuleysato oo xafiiska DHS uu kuu celiyo xaqeeda racfaan, weydii garsoorka ama xafiiska DHS iney kuu amraan sii deynta ku saabsan aqoonsigaada (adigoo aan wax cadeyn ah aan bixin)!

Sidaan ku soo sheegney biloowga buug yaraha, dadka qaar ayaa waxay u qalmaan iney garsoorka weydiiyaan sii deyntooda, laakiin dadka qaar uma qalmaan oo ay weydiiyaan xafiiska DHS sii deyntooda. Buug yaraha kale wuxuu u sharaxaa tani si faahfaahsan. Haddii aad u qalantid inaad garsoorka weydiiso warqad cadeyn ah oo aad ku guuleysato kiiskaada, weydii garsoorka ka dibna inuu halkaasi ka sii daayo xaqaada. Haddii aadan helin fursada, warqad u qor garsoorka oo weydiineysa dhageysiga cadeynta (haddii xitaa aad heysatey mid hore).

**Haddii aan fashilmo, sidee ayaan racfaan ku qaataa?**

Haddii aad fashilanto oo aad "ceshato racfaan," Gudiga Socdaalka ee Racfaanka waa inuu helaa waraaqahaada 30ka maalin gudahooda ama garsoorayaasha ma aqrin doonaan, waadna ku fashilmeysaa xaqaaga racfaanka. Foomamka waa inaad buuxisaa si aad racfaan uga qaadato go'aanka garsoorka waa:

1. Cadaan "Ogeysiis Racfaan" ee foomka (EOIR -26), iyo
2. maroon "Lacagaha Racfaanka Codsiga Tanasulida" ee foomka (EOIR -26A) (ilaa aad ka bixiso lacag dhan $110, taasoo kiiska ah, tixraac talooyinka ku yaalo "Ogeysiiska Racfaanka" ee bixi lacagta)

Foomamka waxay sharaxaayaan sida loo buuxiyo iyo meesha loo diro.

Haddii, 30 maalmood ka dib, waraaqaha racfaanka aanan laga <u>gudoomin</u> magaalada Virginia, malaguu ogolaanaayo racfaan go'aanka garsoorka wuxuu noqonaayaa kama dambeys. Arinkan daraadiis, waxaanu kugula talineynaa inaad waraaqaha horey u soo dirto sida ugu dhaqsiyaha badan oo aad boostada deg dega ah kusoo dirto ama "boosto sharciyeysan" (iyo risiit cadeyn ah).

Haddii Gudiga uu gudoomo foomamkaada, sidoo kale waxaa fursad la siinaa xafiska DHS uu ku galeeyo waraaqahaada. Xafiiska DHS wuxuu ku siinaa nuqul oo ah warqado kasto oo aad galeysey.

Haddii lagu xero inta lagu jiro howlaha racfaanka, sida caadada ah waxay Gudiga ku qaadataa afar ilaa lix bilood go'aan ka gaarista racfaanka. Haddii aan lagu xerin inta lagu jiro howlaha racfaanka, waxay qaadaneysaa waqti ka dheer. Ma jiro waqti qaabeysan, macquulna maaha in la go'aansado waqtiga uu qaadanaayo racfaanka.

**Bal ka waran haddii Gudiga Socdaalka Racfaanka ay go'aan iga gaaraan?**

Waxaad awood u heleysaa inaad racfaan ka qaadato go'aanka Gudiga ee maxkamad dhexe ah, laakin maxkamada dhexdhexaadka ah kaliya waxay ku laaban kartaa qaar ka mid ah arimaha. Sidoo kale, ilaa aad ka hesho amar qaas ah oo ka imaanaayo maxkamad dhexe ah oo la yiraahdo "joog" ee ah nidaamka raritaanka, xafiiska DHS wuu kaa saaraayaa wadanka ayadoo maxkamada dhexe ay ka fakareyso kiiskaada! Tani waxay u dhici kartaa si dhaqsi leh, sidaa daraadeed haddii kiiskaada ay racfaan ka qaataan Gudiga, waa inaad caawinaad ka heshaa qareenka <u>kahor</u> go'aan gaarista Gudiga sidaa daraadeed codsi aad u joogtid raritaan ayaa lagu galeyn karaa maxkamada dhexe ah isla markii uu Gudiga soo diido racfaanka. Kiiska racfaan ka qaadashada maxkamada dhexe aad ayay u adag tahay, sidaa daraadeed buug yarahan ma sharaxaayo sida loo sameeyo taasi.

## BAL KA WARAN HADDII LAYGA SOO DAAYO XABSIGA KA HOR DHAGEYSIGEYGA?

Haddii laguu ogolaado inaad ka baxdo xarunta lagu xeray ka hor inta uusan kiiskaaga dhamaanin, kiiskaaga wuu sii soconaa. Waa inaad ogeysiisaa Maxkamada Socdaalka cinwaankaada cusub mudo shan maalmood gudahooda isbedel kasta oo jira adigoo isticmaalaayo foomkan EOIR 33/IC. Maxkamada waxay kuu soo direysaa warqad kuu sheegeysa taariikhda, waqtiga, iyo meesha dhageysigaada soo socda. Arintan darteed, aad

ayay muhiim u tahay inaad isku daydo inaad hesho caawinaad sharci ah sida ugu dhaqsiyaha badan oo macquulka ah. Ha is daahinin.

**Markii aad ka baxdo xabsiga, u raadi kiiskaada caawinaad sharci ah!**

Sidoo kale aad ayay muhiim u tahay in adiga ama qareenkaada uu weydiiyo maxkamada in kiiskaada ay u xawisho maxkamado kala duwan, ilaa aad dooneyso inaad tagto maxkamada halka uu kiiskaada yaalo waqtigan xaadirka ah. Tani waxaad sameyneysaa adigoo buuxinaayo foom la yiraahdo "Dhaqdhaqaaqa lagu Bedelaayo Goobta" dushiisa waxaad ku qoreysaa cinwaanka meesha aad qorsheyneysid inaad ku noolaato markii aad ka baxdo xabsiga. **(Tani waa iney ahaa cinwaanka wadada, ma aha xafiiska boostada!).** Dhinaca danbe ee buugyaraha waxaa jira foom kaasoo aad isticmaali karto laakin maxkamadaha qaar waxay rabi karaan inaad isticmaasho foom ka duwan, sidaa daraadeed raadi. Xabsiyada qaarkood, sarkaal ka socdo xafiiska DHS ayaa ku siinaayo foomka ka dib wuxuu siinaa maxkamada ka dib markii aad dhameyso. Raadi sida arimaha loogu sameeyey xabsigaada ee iska hubi inaad galeyso foomka saxda ah ee maxkamada (hal nuqul sii qareenka xafiiska DHS). Markii ay maxkamada hesho warqadaan, galkaada waxaa loo diraa Maxkamada socdaalka ee aad ku qortey cinwaankaada kugu dhow. Intaa ka dib maxkamada waxay kuu soo diri doontaa warqad kuu sheegeysa meeshii iyo goortii aad aadi leheyd dhageysigaada kan ku xiga. Ka dib markii aad hesho warqadan, waxaad u kaliya u direysaa arimahaada maxkamad cusub iyo xafiiska DHS ee ku yaalaa deegaankaada cusub.

**Markii aad xabsiga kasoo baxdo, haddii aadan dooneynin dhageysigaada maxkamada ee kan ku xiga inaad sii joogto meesha aad hada joogtid, galeey "Dhaqdhaqaaqa Isbedelka Goobta!"**

Maxkamadaha qaarkood waxay kaa dalbanaayaan sharaxaad dhameystiran oo intaan ka badan oo ah sababta aad u rabtid inaad bedesho mowqica maxkamada. Xiliga dhageysiga cadeyntaada, weydii garsoorka haddii aad sidaas sameyn kartid.

**Xasuusnow, haddii aad weyso dhageysi, garsoorka wuxuu amraa in lagu saaro asagoo aanan ku siineynin fursad kale aad ku dalbato magangelyo ama heyn ah raritaan!**

**Maxaan sameeyaa haddii aan guuro?**

**Waqti kasta oo aad guurto, waa masuuliyadaada inaad u sheegto Maxkamada Socdaalka iyo xafiiska DHS labadaba!** Waa inaad u sheegtaa Maxkamada Socdaalka mudo shan beri gudahooda ee guuritaankaada iyo waa inaad u sheegtaa xafiiska DHS mudo 10 beri gudahooda ee guuritankaada. Waxaa jira foomam gaar u ah arintan waxaadna ka heli kartaa mid Maxkamada Socdaalka (Foomka EOIR 33/IC) iyo mid ka duwan waxaad ka heleysaa xafiiska DHS (Foomka AR-11) (Madaxda ayaa ku siinaayo foomamka markiii aad guureysid.). U sheegintaanka cinwaankaada cusub Maxkamada Socdaalka iyo xafiiska DHS waxba kama bedeleyso goobta dhageysigaada lagu qaban doono. Bedelka midaas, Foomamka qaaska ee isbedelka cinwaankaada ayaa u sheegaayo Maxkamada Socdaalka iyo xafiiska DHS meesha loo diraayo waraaqaha kiiskaada.

Markii Maxkamada Socdaalka iyo xafiiska DHS ay waraaqo kuu soo diraayaan, waxay kuugu soo diraayaan cinwaankii aad siisay. Haddii Maxkamada Socdaalka oo kaliya ay heyso cinwaankaadii hore, wey soo diraayaan waraaqaha ayagoo kuu sheegaayo goorta dhageysigaada xiga uu ka dhacaayo cinwaankaadii hore, haddii aad imaan weyso maxkamada maalintaas, waxaad heleysaa amar ah raritaan. Tani macneheeda waa

waqtiga xiga xafiiska DHS ayaa xabsiga kuu taxaabaayo, waxaa laguu celinaa wadankaada ayadoo aan lagu dhageysan.

☞ **Haddii aad guurto, u dir Maxkamada Socdaalka cinwaankaada cusub adigoo isticmaalaayo foomka EOIR 33/IC mudo 5 maalmood gudahooda ee guuritaankaada!Sidoo kale waa inaad u dirtaa xafiiska DHS cinwaankaada cusub adigoo isticmaalaayo foomka AR-11 mudo 10 maalmood gudahooda ee guuritaankaada!**

**Waa muhiim inaad xasuusato in Maxkamada Socdaalka iyo xafiiska DHS ay kala duwan yihiin iyo foomamka lagaa dalbadey iney kala duwan yihiin.** Haddii aad u sheegto cinwaankaada cusub xafiiska DHS laakiin aadan u dirin foomka saxda ah (buluug EOIR 33/IC, "Cinwaan Bedel" foom) ee Maxkamada Socdaalka, Maxkamada Socdaalka waxay markasta kuugu soo direysaa waraaqaha cinwaankaadii hore, waadna waayneysaa balanta maxkamada. Haddii ay taasi dhacdo, waxaad heleysaa amar raritaan ah adigoon arkin garsoorka. Tani waa dhab haddii kiiskaada uu racfaan ugu jiro Gudiga Socdaalka ee Racfaanka.
Sidoo kale waa inaad u ogeysiisaa Gudiga Socdaalka ee Racfaanka mudo 5 maalmood haddii aad guurto adigoo isticmaalaayo Foomka EOIR 33/BIA.

**Ma heli karaa fasax shaqo?**
Maxkamada Socdaalka waxaad ka heli kartaa fasax shaqo haddii aad galeyso codsiga magangelyada ama heyn raritaan, laakiin <u>waa inaad sugtaa 150 maalmood ka dib markii aad galeyso codsigaada magangelyo</u> si aad u galayso fasaxa shaqada. Haddii aad horey u dhumisey kiiskaada 180 maalmoodna ay kasoo wareegtay, ma heli kartid fasax shaqo, xitaa haddii aad racfaan ka qaadato go'aanka garsoorka. Haddii lagu siiyo magangelyo ama heyn raritaan ah ka hor inteysan ka soo wareegin 180 maalmood, waad dalban kartaa fasax shaqo ka dib markii aad ku guuleysato kiiskaada. Haddii kiiskaada weli aan go'aan laga gaarin oo laga joogo mudo 150 maalmood tan iyo intii aad galaysey codsiga magangelyadaada ama heynta raritaankaada, waad dalban kartaa fasax shaqo laakin ma heleysid ilaa 180 maalmood ay kasoo wareegto.

**Idanka Codsiga Shaqaaleynta (Foomka I-765)**

Si aad u dalbato fasax shaqo, waa inaad buuxisaa "Foomka I-765" ee u iimeel ugu dir cinwaanka ku haboon ee aad ka heshay talooyinka iyo nuqul ah foomka I-589 (codsiga magangelyo - foomka iyo cadeyntaada) ay la socdaan daliil taasoo aad ku galaysay Maxkamada Socdaallka. Maxkamada Socdaalka waxey ku tiimbareyn doontaa bogaada koowaad ee codsiga magangelyada taariikhda aad galaysay, iyo haddii aad heshid nuqulgaada oo la tiimbareeyey, boga tiimbareysan wuxuu cadeynaa inaad galaysay. Haddii aysan eheen, waa inaad nuqul ah boga koowaad ka heshaa Maxkamada Socdaalka sidaa daraadeed taasi waxaad ku diri kartaa codsigaada. Haddii aad ku guuleysato kiiskaada, ku dar nuqul ah amarka garsoorka iyo foomka I-765. Haddii aad ku guuleysato kiiskaada magangelyo waa inaad raacdaa talada afka ee garsoorayaasha iyo talooyinka qoraalka ah ee aad ka heshay qareenka maxkamada ee xafiiska DHS oo cinwaankeeda uu yahay *Talada Jeega Wareega ee Boostada ee Shaqsiyaadka la Siiyey Gargaar ama Badbaado oo ah Raritaan oo ay siisey Maxkamada Socdaalka*, si ay u helaan cadeyntaada aqoonsi oo ay ku shaqeeyaan dukumintiyo sharciyeysan oo ka yimid xafiiska DHS, muwaadinimada wadanka Mareykanka iyo Adeega Socdaalka. Ogoow: Haddii aad hesho amarka kama danbeynta oo ah heyn raritaan, waa inaad raacdaa talooyinka galeysan ee foomka I-765.

Aqri talooyinka raacaayo foomka codsiga fasaxa shaqada ee ka jawaab dhamaan su'aalaha. Talooyinka sidoo kale waxay kuu sheegaayaan waxa kale ee aad u baahantahay inaad raacsiiso codsiga.

Wixii **Su'aasha #14aad**, haddii aad ku soo gashey si sharci daro ah, qor "soo galay baaritaan la'aan."

Wixii **Su'aasha #15aad**, haddii garsoorka uusan go'aansan kiiskaada, qor "magangelyo/heyn aan go'aan laga gaarin." Haddii aad ku guuleysato magangelyo, qof "magangelyo." Haddii aad ku guuleysato heyn ama Kulanka heynta Jirdilka, qor "heyn la siiyey."

Wixii **Su'aasha 16aad**, haduusan garsoorka weli go'aan ka gaarin kiiskaada, ama haddii aad ku guuleysato laakin xafiiska DHS uu racfaan qaato, geli "(c)(8) ee u dir codsiga Xarunta Adeega ee xafiiska DHS (Talooyinka ayaa kuu sheegaayo midka loo diraayo). Haddii aad ku guuleysato magangelyo oo xafiiska DHS ay racfaan qaataan, geli "(a)(5)" ee raac garsoorka Socdaalka talooyinkiisa iyo talooyinka qoran ee aad ka heshay qareenka maxkamada ee xafiiska DHS oo cinwaankeedu yahay, *Talada Jeega Wareega ee Boostada ee Shaqsiyaadka la Siiyey Gargaarka ama Badbaadada raritaanka ee Maxkamada Socdaalka*.
Waxay dhaqan galeysaa bisha Abriil 1, 2005 haddii aad ku guuleysato heyn (ha noqoto mid guud ama Kulanka Jirdilka) oo xafiiska DHS uusan racfaan qaadanin, geli "(a)(10)" waa inaad galeysaa codsigaada foomka I-765 ee magaalada Chicago Lockbox Facility. Cinwaanka iimeelka ee tooska ah: Sanduuq boostaha muwaadinimada wadanka Mareykanka iyo Adeega Socdaalka waa, P.O. Box 805887, Chicago, IL 60680-4120 ama kuwa aan eheen adeega sanduuq boostada ee wadanka Mareykanka (dhambaal qaadaha gaarka ah) ee muwaadinimada wadanka Mareykanka iyo Adeega Socdaalka, Feejignaaw: FBASI, 427 S. LaSalle – 3rd Floor, Chicago, IL 60605-1098. Haddii lagu siiyo Kulanka Jirdilka oo ah dib u dhigis raritaan oo lagaa soo daayey xabsiga DHS, geli "(c)(18)" raac talooyinka shaqada sharciyeysan ee buugyaraha.

**Nuqul ka sameey Foomka I 765 iyo waxkasta aad ku dirtey galkaada shaqsiyeed, haddii aad ku buuxineyso boosto ahaan, ku dir boosto la hubo oo rasmi ah.** Fasaxa wax lacag ah ma bixineysid marka hore. Waxay jireysaa halsano. Markii aad soo cusbooneysiineyso, waa inaad lacag bixisaa.

Waxay qaadaneysaa 30 maalmood in laga gaaro go'aan quseeyo haddii shaqo sharciyeysan lagu bixin karo. Haddii aadan helin go'aan mudo 30 maalmood gudahooda, waa inaad tagtaa xafiiska maxaliga ee DHS si aad iskugu daydo inaad hesho fasax shaqo oo kumeel gaar ah.

**Ma u safri karaa banaanka wadanka Mareykanka ka dib markii aan xabsiga kasoo baxo?**
**Haddii aad ka tagto wadanka ka hor kiiskaaga intuusan dhamaan, waxaad si otomaatik ah u dhumineysaa kiiskaada. Waa inaadan bixin ilaa aad ka hesho go'aan kama dambeys ah. Xitaa haddii garsoorka uu ku siiyo magangelyo, heyn ama raritaan dib u dhigis, haddii xafiiska DHS uu racfaan qaato, go'aanka maahan mid kama dambeyn ah sidaa daraadeed waa inaadan wadanka ka tegin.**

Haddii aad ku guuleysato magangelyo oo uu go'aanka yahay kama dambeys, waa inaad sugtaa mudo sanad ah kahor intaadan dalban deganaansho joogto ah ("Kaarkaada cagaarka") adigoo buuxinayo Foomka I-485, Codsi aad isku Diiwaangeliso Degaan Joogto ah ama Aqoonsi Hagaagsan. Waad safri kartaa intii lagu jiro waqtigaan, haddii aad weydiiso oo aad hesho fasax ka socdo xafiiska DHS adoo buuxinaayo Foomka I-131, Codsi Dukuminti Safar ama codsasho Siideyn sharafeed Horumar ah, laakin **waa inaadan ku laaban wadankaada ilaa lagaa siiyo deganaansho joogto ah, ama waxa kaa dhumi kar aqoonsigaada sharci.** Haddii aad hesho heyn raritaan ah ama rariraan dib u dhigis ah waa inaad la hadashaa qareenka socdaalka ka hor intaadan ka safrin wadanka Mareykanka.

## SI FIICAN KIISKAADA U DIYAARI

Mararka qaar, farqiga u dhexeeyo guuleysiga iyo guuldarada kiis waa waqtiga iyo tamarta aad gelineyso diyaarintiisa. Haddii aad raacdo talooyinka buugyarahan, waa inaad diyaar u noqotaa inaad soo bandhigto kiiskaada, waxaadna heleysaa fursad fiican oo aad ku guuleysato. Nasiib wacan kiiskaada!

**©Mashruuca Socdaalka iyo Xuquuqda Qaxootiga Inc., Luulyo 2002.** Mashruuca Florence wuxuu bixinayaa fasax ah nuqulga dukumintigan, sida uu yahay, isticmaalka shaqsiyeed ama qeybinta bilaash ah xafiiska DHS, ee la siinaayo dadka ay gacanta ku heyso xafiiska DHS, ama jiritaankooda oo caawinaayo dadkan maxbuusta oo kale. Si kastaba, isbedelkasta oo ku yimaada qalabkani ama qeyb kasta oo halkaasi ah waa inuuu ansixiyaa mashruuca. Ansixinta waa la raadin karaa ayadoo loo qoraayo cinwaanadan soo socdo: Agaasime, Mashruuca Florence ee Socdaalka iyo Xuquuqda Qaxootiga, Sanduuq boosto P.O. Box 654, Florence, Arizona 85232. Iibinta dukumintigan ama qeybkasta oo halkaasi oo faaido lagu doonaayo waxay muujineysaa khalalaaso xuquuqda daabacaada ah.

Elizabeth Dallam ayaa casriyeysay buugyarahan, Agaasimihii hore ee Mashruuca Florence, waxaa soo tifatirey Lynn Marcus, waa barafasoor caawiye la xiriira Jaamacada kolejka ee Arizona ee Sharciga ah. Ururka Ford ayaa bixisey fanka/lacagta. Buugyaraha asalka ah waxaa qorey Ms Marcus bishii November 1993 ayadoo taageero ka heleyso ururka Marshall Fund ee magaalada Arizona

Aad baan ugu mahadcelineynaa Regina Germain, waa qareen ka socda shaqaalaha sharciga ah ee hay’ada Qaxootiga ee Qaramada Midoobey, iyo caawinaada tifatiraheeda. Waxaa kale oo rajeyneynaa inaad u mahadcelino xubnaha dheeraadka ee soo socdo oo ah Gudiga Talo bixinta Qaranka, kuwaasoo loo aasaasey iney ku laabtaan oo ay tifatiraan qalabkaani: Jeanne Butterfield oo ka socda Ururka Qareenada Socdaalka ee Mareykanka, Dan Kesselbrenner oo ka socda Mashruuca Socdaalka Qaranka ee Qareenka Urur Xirfadeedka Qaranka, Linton Joaquin oo ka socda Xarunta Socdaalka Qaranka, Judy Rabinovitz oo ka socda Mashruuca Xuquuqda Muhaajiriinta ee Ururka Xoriyada Sokeeye ee Mareykanka, Mark Silverman oo ka socda Xarunta Macluumaadka Muhaajiriinta Sharciga ah, iyo Carol Wolchok oo ka socda Xarunta Socdaalka Sharciga iyo Cabashada ee Ururka Derbiga Mareykanka.
Wixii khalad ah waxay u taalaa qoraaga.

Qaar ka mid ah fikradaha buugyarahan waxaa laga soo qaadey Kiisaskii Magangelyo ee lagu Guuleystey, waxaa qorey oo soo daabacay Xarunta Muhaajiriinta ee Macluumaadka Sharciga ah sanadkii 1992.

## Dukumintiga Foomka Codsiga.

**Fadlan buuxi qeyb kasta ee u qor si nidaam ah. U dir foomkan mid ka mid hay’adahii lagu qorey boga hay’adaha. Way ku caawineysaa haddii aad sidoo kale dirto codsigaada magangelyo (I-589), waraaqaha ama foomamkii sharaxaayay kiiskaada. Kuwaan waa isticmaal gudaha ah kaliya si ay u caawiso dukumintiga dacwadaada magangelyo. Warbixintan maloola qeybsanaayo wax hey'ad kale, xafiiska DHS ama hey'ad kale oo dowli ah ogolaasho qoraalkaagii hore ku taal la'aanteeda.**

MAGAC: ________________________________________ A#:____________________________________

CINWAAN: ___ (ku dir meeshii aad rabto in warbixinta loo diro)_____________________________________________

MAGAALO: ________________ GOBOL:_____________ SUMADA BOOSTADA:____________________

TAARIIKHDA MAANTA: ________ TAARIIKHDA DHAGEYSIGADA/RACFAANKAADA:___________

FADLAN LIISKA KU QOR DHAMAAN HEY'ADIHII AAD LA XIRIIRTEY:________________________

_____________________________________________________________________________________

MAGAALADAADA, GOBOL, IYO WADANKA ASALKA:_______________________________________

SANADKII AAD TIMID WADANKA MAREYKANKA:_________________________________________

**FADLAN WAREEG GELI EE KA JAWAAB DHAMAAN CODSIGAAS:**

1 MA TAHAY AMA MA EHEED XUBIN KA MID AH URUR SIYAASADEED OO LA SOO DHIBAATEEYEY? HAA MAYA
HADDII AAD HAA TIRI, FADLAN QOR LIIS HAY'ADA:______________________________________________

2 MA TAHAY AMA MA EHEED XUBIN URUR GANACSI OO LA SOO DHIBAATEEYEY? HAA MAYA
HADDII AAD HAA TIRI, FADLAN QOR LIIS AH MAGACA HAY'ADA:_________________________________

3 MA TAHAY AMA MA EHEED XUBIN KANIISADEED AMA DIIMEED OO LASOO DHIBAATEEYEY? HAA MAYA
HADDII AAD HAA TIRI, FADLAN QOR LIIS DIIMEED AMA KANIISADEED:___________________________

4 MA TAHAY AMA MA EHEED XUBIN QABIIL DADKA LAGA TIRO BADANYAHAY LAGU SOO DHIBAATEYEY? HAA MAYA
HADDII AAD HAA TIRI, FADLAN QOR LIIS QABIILEED:____________________________________________

5 DACWADAADA MA WAXAY KU SALEYSAN TAHAY WACYIGELIN ISUTAG (MAXAA YEELAY WAXAA TAHAY KHANIIS, NAAG U TAGTA NAAG KALE, LAGA ROONE AMA IS DHAAFSI JINSI)? HAA MAYA

6 DOWLADA MAKUU SOO DHIBAATEYSEY AMA XUBNO KA TIRSAN DOWLADA? HAA MAYA
HADDII AAD HA TIRI, QOR LIIS KOOX: ___________________________________________________________

7 MAKU SOO DHIBAATEEYEEN DAD KA BAXSAN DOWLADA AMA URUR? HAA MAYA
HADDII AAD HAA TIRI, QOR LIIS KOOX:__________________________________________________________

8 DACWADAADA MA WAXAY KU SALEYSAN TAHAY SABABO DHIBAATEYN DHINACA JINSIGA? HAA MAYA

**BOGGAN QEYBTIISA DAMBE AMA GABAL KA MID XAASHIDA, FADLAN KU TAX TUSAALOOYIN, SHAQSIYAAD, DHIMASHO MAGACYO, TAARIIKHYO QEEXAN, AMA XAALADAHA DALKA AH IN LA DUKUMINTIYADEEYO.**

**Shahaadada Adeega**

Magac: ______________________

A#: ____ -- _____ -- ____

Waxaan cadeynaa in ______________________, _______, inaad u adeegey
(taariikh) (sanad)

kaaliyaha la Taliyaha Kaabaha ee xafiika DHS, Socdaalka wadanka Mareykanka iyo Xoojinta Canshuurta (ICE) uu la socdo nuqul: (Qeexida wixii loo adeegay) adigoo baqshad, boostada la horumariyo, gelinaayo nuqul dhab ah oo dhameystiran, oo ku diraayo boostada, cinwaankeeda uu soo socdo:

Kaaliyaha Kaabaha la Talinta ee
Waaxda Amniga Wadanka ee
Socdaalka Mareykanka & Xoojinta Canshuuraha (ICE)
________________________________
________________________________
________________________________
(Cinwaanka DHS)

(Ku saxiix magacaada halkaan)

**WAAXDA CADAALADA EE MAREYKANKA**
**XAFIISKA FULINTA EE KU LAABASHADA SOCDAALKA**

______________________________________
Magaalada ama gobolka meesha ay maxkamada ku taalo

_____________________________________________

| | | |
|---|---|---|
| Xaalada ) | | NIDAAMKA RARITAANKA |
| ) | | Fayl Lambar. A__________________ |
| ________________________ ) | | |
| (magacaada) ) | | |
| ) | | |
| Eedeysane ) | | **TALOSOOJEEDINTA GOOB BEDELKA** |
| _____________________________________________) | | |

Eedeysanaha waa la casaaray wuxuuna deganaanayaa:

____________________________________
____________________________________

__________________________________
(cinwaankaa ah xabsiga banaankiisa)

Eedeysanaha wuxuu codsanaa in kiiskiisa loo xawilo Maxkamada Socdaalka taasoo dabareyso meeshii uu asaga/ayada degaankiisa yahay.

SHAHAADADA ADEEGA

Dukumintiga asalka ah waxaa lagu diraa boostada:

Xafiiska Fulinta ee ku Laabashada Socdaalka:
Xafiiska Garsoorka ee Socdaalka
________________________________
________________________________
**(u dir cinwaanka maxkamada gacanta ku heysa kiiskaada intii aad ku jirto xabsiga xafiiska DHS)**

Halkaan waxaan ka cadeynaa inaan u adeegey nuqul dhaqdhaqaaqan ah anigoo nuqul ku direy boostada:

Kaaliyaha kaabaha la Talinta ee xafiiska DHS ee Socdaalka Mareykanka iyo Xoojinta Canshuuraha (ICE)
________________________________
________________________________
**(cinwaanka xafiiska DHS taasoo gacanta ku heysa kiiskaada intii aad ku jirtey xabsiga xafiiska DHS)**

Taariikh: ____________________

Saxiix:________________________________
Eedeysane (halkaan ku saxiix magacaada)

**LIFAAQA A: Nicaraguan iyo Sharciga Gargaarka Bartamaha Mareykanka ee 1997 (NACARA) & Sharciga Cadaalada iyo Socdaalka Qaxootiga reer Haiti ee sanadkii 1998 (HRIFA)**

**Qeybta NACARA ee Gargaarka 202 loogu talagalay Dadka reer Cubanka iyo dadka reer Nicaragua**

Taariikhda kama dambeysta ee codsiga noocaan ah ee gargaarka NACARA ee loogu talagalay dadka Cubaanka iyo dadka reer Nicaragua wuxuu ahaa bishii Maarso 31, 2000. Si kastaba ha ahaatee, qaanuun la yiraahdo Sharciga looga soo horjeedo Dhibaatada Haweenka (VAWA) 2005, dadka reer Nicaragua iyo Cubaanka xaasaskooda ama nimankooda caruurtooda kuwaasoo lagu xadgudbey (waxay dhibsadeen xaasidnimo daran) oo ku sameeyey nin ama xaas ama waalid kaasoo xaq u leh qeybta NACARA 202 ama sida dhabta ah noqdey degaan joogto ah oo sharciyeysan oo hoos imaanaayo qeybta NACARA 202 oo u dalbi kara degaan joogto ah oo sharciyeysan oo ay aqoonsanyihiin qeybta NACARA 202. Si kastaba waa inaad si xaq ah u gudbisaa codsigaada bisha Luulyo 2007 si aad u noqoto qof xaq u leh.

Wixii lamaane ah ama ilmo lagu xadgudbey ee sharciga hoos imanaya, lamaanaha is qaba ee lagu xadgubey ama waalidkii waa inay xaq u leeyihiin qeybta NACARA 202 oo la kulmey dalabkaan loo baahanyahay ee soo socda:

1 Muwaadinka dadka reer Nicaragua ama Cuuba;
2 Waqtigan xaadirka wadanka Mareykanka tan iyo bishii December 1, 1995; iyo
3 Loo ogolaan karo wadanka Mareykanka (ma leheyn dembiyada noocyada qaar taasoo ku dhowra iney noqdaan degaan joogto ah oo sharci ah).

Ka maqnaashaha wadanka Mareykanka guud ahaan 180 maalmood oo isku xigta kadib bishii December 1, 1995, wuxuu waaynaa shaqsigaasi gargaarka qeybta NACARA 202. Haddii aadan hubin inaad u qalintid qeybta NACARA ee 202 ayadoo la hoos tagaayo VAWA 2005 waa inaad weydiisaa garsoorka ama xafiiska DHS.

Qeybta **NACARA 203 ee gargaarka loogu talagalay dadka reer Guatemala, El Salvador iyo Yurubta Bari**

Qeybta NACARA 203, waad u qalmi kartaa inaad ka dalbato difaac raritaan ah wadanka Mareykanka oo la yiraahdo "Kabaajinta Raritaanka" haddii aad la kulanto dalabkaada. Haddii aad u qalanto oo aad hesho difaaca noocaan ah, waxaad noqoneysaa degaan joogto oo sharci ah ee wadanka Mareykanka. Mida kale, waxaad heleysaa kaarka cagaaran.

◊ Intii reer Guatemala waxa looga baahanyahay waa:

A. Waxaad ka timid Guatemela;

1. Waxaad soo gaartey wadank Mareykanka bisha Oktoobar ama ka hor Oktoobar 1, 1990 iyo;
2. Oo lagaa diiwaangeliyey faa‘iidada heerka ABC bisha Disembar ama kahor bisha Disember 31, 1991 (Ogoow: Dadka is diiwaangeliyey ABC xaq uma laha haddii la fahmo iney soo galeen ka Dec. 19, 1990); ama
3. Waxaad dalbatey magangelyo bisha Abriil ama kahor Abriil 1, 1990;

IYO

B. Waxaad aasaastey:

1. Waxaad todoba sano si joogto ugu sugneyd wadanka Mareykanka;
2. Waxaad leedahay akhlaaq dabeecad wanaagsan (tani macnaheeda waa weli laguguma xukumin dembiyada qaar ama xabsi kuma qarashgareynin 6 bil ama in ka badan);
3. Ma lagugu soo oogin dembi jariimo daran sida lagu muujiyey qeybta 101(a)(43) ee sharciga Socdaalka iyo Jinsiyada (INA)(haddii aad qabto dembiyo kale qaarkood ama dembiyo socdaal kaasoo aanan kuu ogolaaneynin ama in lagaa soo haajirin karo wadanka Mareykanka weli xaq ayaad u leedahay haddii aad la kulanto dalabyo dheeraad ah); iyo
4. Waxaad dhibsaneysaa dhibaato daran haddii lagaa soo saarey wadanka Mareykanka ama xaaskaada, waalikaada, ama caruurtaada kuwaasoo heystey deganaansho joogto oo sharci ah ama muwaadiniinta Mareykanka ayaa dhibsanaayo culeyskan oo kale haddii lagaa saaro wadanka Mareykanka.

Haddii aad la kulanto dalabyadan kore laakiin aad leedahay xukun dembi, waa inaad weli garsoorka u keentaa qeybta NACARA si uu arko haddii aad xaq u leedahay. Sidoo kale, haddii aadan hubin inaad codsatey magangelyo waqtiga kama dambeyta ah ama haddii aad xubin ka tahay dabaqada ABC, waa inaad garsoorka

weydiisaa haddii aad ku qalanto inaad sii joogto wadanka Mareykanka ayadoo la hoostagaayo qeybta NACARA.

◊ Intii dadka reer El Salvador waxa looga baahanyahay waa:

A. Waxaad ka socotaa El Salvadoor;

1. Waxaad timid wadanka Mareykanka bisha Setembar ama kahor Setember 19, 1990; iyo
2. Waxaad iska diiwaangelisey faa'iidada dabaqada ABC ama kahor Oktoobar 31, 1991 (Ogoow: Dadka iska diiwaageliyey dabaqada ABC xaq uma laha haddii la fahmo ka dib markii ay soo galaan bisha Dec 19, 1990; ama waxaad iska diiwaangelisey aqoonsi badbaado oo ku meelgaar ah ("TPS") isla waqtigaas ama ka hor Oktoobar 31, 1990; ama
3. Waxaad dalbatey magangelyo bisha April ama ka hor bisha April 1, 1990;

IYO

B. Waxaad abaabashey:

1. Waxaad si muuqata ugu sugneyd wadanka Mareykanka si joogto ah ugu yaraan todobo sano; iyo
2. Waxaad leedahay dabeecad akhlaaq wanaagsan leh (tani macnaheeda waa laguguma xukumin dembiyada qaarkood ama xabsi kuma qarashgareynin mudo 6 bilood ah ama in ka badan); iyo
3. Ma laguugu soo oogin dembi jariimo daran ah sida lagu qeexay qeybta 101(a)(43 ee INA (Haddii aad leedahay dembiyo kale qaar ama dembiyo socdaalka ah taasoo aan la yeeli karin ama lagaa haajirin karo wadanka Mareykanka, weli xaq ayaad u leedahay haddii aad la kulanto dalabyo dheeraad ah); iyo
4. Waxaad u dulqaadaneysaa dhibaato adag haddii lagaa saaro wadanka Mareykanka ama xaaskaada ama caruurtaada kuwaasoo heysta deganaansho joogto ah oo sharci ah ama muwaadinimo Mareykan ah uu u dulqaato dhibkaan adag haddii lagaa saaro wadanka Mareykanka.

Haddii aad la kulantid dalabyada kore laakin aad leedahay xukun dembiyeed, waa inaad garsoorka weli ula timaadaa qeybta NACARA si uu arko haddii aad xaq u leedahay. Haddii aadan hubin inaad dalbatey magangelyo waqtiga kama dambeysta ah, ama haddii aad tahay xubin dabaqada ABC ama aad heysato aqoonsiga TPS, waa inaad weydiisaa garsoorka haddii aad u qalanto inaad ku sii sugnaato wadanka Mareykanka ayadoo la hoos imaanaayo NACARA.

◊ Intii dadka reer Bariga Yurub:

A. Waxaad u dhalatey wadanka Midowga Soofiyeeti, Ruushka, Jamhuuriyad kasta oo ka go'ay Midowgii Soofiyeetkii hore sida, Estonia, Latvia, Lithuania, Poland, Czechoslovakia, Romania, Hungary, Bulgaria, Albania, East Germany, Yugoslavia ama gobol kasta oo ah Yugoslaviyadii hore; iyo

1. Waxaad Mareykanka soo gashey bishii Disembar ama ka hor bishii Disembar 31, 1990;
2. Waxaad dalbatey magangelyo bishii December ama ka hor bishii December 31, 1991;

IYO

B. Waxaad abaabushey:

1. Mudo todoba sano ayaad si joogto ah oo muuqata ugu sugneyd wadanka Mareykanka; iyo
2. Waxaad leedahay dabeecad akhlaaq wanaagsan leh (tani macneheeda waa malugugu soo xukumin dembiyada qaar ama xabsi ayaad ku qarashgareysey mudo 6 bilood ah ama in ka badan); iyo

3. Ma laguugu soo oogin dembi jariimo daran ah sida lagu qeexay qeybta 101(a)(43 ee INA (Haddii aad leedahay dembiyo kale qaar ama dembiyo socdaalka ah taasoo aan la yeeli karin ama lagaa haajirin karo wadanka Mareykanka, weli xaq ayaad u leedahay haddii aad la kulanto dalabyo dheeraad ah); iyo
4. Waxaad ka cabaneysaa dhibaato adag haddii lagaa saaro wadanka Mareykanka ama xaaskaada ama caruurtaada kuwaasoo heysta deganaansho joogto ah oo sharci ah ama muwaadinimo Mareykan ah uu u dulqaato dhibkaan adag haddii lagaa saaro wadanka Mareykanka.

Haddii aad la kulantid dalabyada kore laakin aad leedahay xukun dembiyeed, waa inaad garsoorka weli ula timaadaa qeybta NACARA si uu arko haddii aad xaq u leedahay. Sidoo kale, haddii aadan hubin inaad dalbatey magangelyo waqtiga kama dambeysta ah, waa inaad weydiisaa garsoorka haddii aad u qalanto inaad ku sii sugnaato wadanka Mareykanka ayadoo la hoos imaanaayo NACARA.

Haddii aad ahaan leheed xaas ama cunug ah reer El Salvador, Guatemala ama reer Bariga Yurub kaasoo helay joojin masaafurin ama ay qeybta NACARA ay ka baajisey raritaan waqtigaasoo uu shaqsiga helay gargaar ka yimid qeybta hay'ada NACARA, waxaad xaq u leedahay inaad dalbato gargaarka hay'ada NACARA sida qof faa'iideystey maadaama weli uu jiro xiriirkii guurka ama waalidnimo. Sidoo kale xaq ayaad u leedahay hay'ada NACARA, hadaadan guursan wiil ama gabar ee waalid kaasoo gargaar ka helay hay'ada NACARA waxaadna soo gashey wadanka Mareykanka bishii Oktoobar ama kahor bisha Oktoobar 1, 1990.

OGOOW: Dalabyada hay'ada NACARA oo muuqda ee joogtada ah waqtigan xaadirka malagu dabaqaayo haddii aad iska diiwaangeliso ciidamada xooga ee wadanka Mareykanka intii aad ku sugantahay wadanka Mareykanka, adigoo shaqeeyey mudo 24 bilood ah xil la aqoonsanyahay oo firfircoon oo lagaaga soo bixiyey si sharaf ah.

## Gargaarka Dadka reer Haitiyaanka

Bisha Oktoobar 1998, Fadhiga wuxuu soo gudbiyey Sharciga Cadaalada Socdaalka Qaxootiga ee reer Haiti sanadkii 1998 (HRIFA) kaasoo siiyey dad Haitiyaan ah wado ay ku joogaan wadanka Mareykanka waxayna noqdeen deegaan joogto oo sharciyeysan. Waqtiga kama dambeysta ee lagu dalbanaayo gaarka noocaan ah ee dadka Haitiyaanka ah wuxuu ahaa bishii Maarso 31, 2000. Si kastaba, ayadoo la hoos imaanaayo VAWA sanadka 2005, labada is qabta (nin ama naag) iyo caruur (oo ay ku jiraan wiilasha aan guursan ama gabdhaha oo da'dooda ay ka badantahay 21 sano) oo lagu xadgudbey (loo soo dhibaateeyey xaasidnimo daran) oo ay soo dhibaateeyeen xaas/nin ama waalid kaasoo midkood xaq u leh HRIFA ama si dhab u noqdey degaan joogto oo sharciyeysan oo hoos imaanaayo HRIFA weli wuu ka dalban karaa HRIFA deganaansho aqoonsi joogto oo sharciyeysan.

Intii xaasle ah ama ilmo lagu xadgudbey (ay ku jiraan wiil ama gabar) oo sharcigaan lagu dalbanaayo, labada is qabto oo lagu xadgudbo ama waalid waxay xaq u leeyihiin iney hoos tagaan HRIFA oo ay la kulmaan dalabyadaan soo socdo:

Xaas ama waalid lagu xadgudbo:

1 Oo uu si muuqata ugu sugnaa wadanka Mareykanka bishii Disembar 31, 1995;
2 Oo si muuqato oo joogto ah ugu sugnaa wadanka Mareykanka tan iyo ugu yaraan bishii December 31, 1995 oo aan ka maqnaanin wadanka Mareykanka guud ahaan inka badan 180 maalmood tan iyo December 31, 1995;

IYO

3 Magangelyo galeyn oo uu ku sugnaa wadanka Mareykanka ka hor bishii Disembar 31, 1995; ama
4 Oo ahaa mid xabsi laga sii daayey ee wadanka Mareykanka ka hor bishii Disembar 31, 1995 oo loo aqoonsadey inuu cabsi muuqata ku jiro ku laabashada wadanka Haiti ama loo soo daayey sababo deg deg ah ama maxaa yeelay waxay eheed dano bulsho;

AMA

Imaanshaha wadanka Mareykanka:

- oo ahaa da'da ka hooseysa 21 sano oo aan weli guursan oo yimid wadanka Mareykanka waalid la'aan oo baaqi ku noqdey Mareykanka waalid la'aan tan iyo intii imaanshihiisa; AMA
- agoon noqosho ka imaanshaha wadanka Mareykanka; A
  AMA
- ay ka soo tageen waalidiinta ka hor Abriil 1, 1998 oo weli aan gaarin.

Xitaa haddii aysan hay'adaada HRIFA ku xadgudbin xaqa xaaska ama waalid, weli waad u qalmi kartaa hay'ada HRIFA haddii aad tahay xaas/nin ama cunuq shaqsi kaasoo gargaar ka helay hay'ada HRIFA oo aad la kulantid dalabyadaan soo socda:

1 Waxaad u dhalatey wadanka Haiti; iyo
2 Waxaad ku sugantahay wadanka Mareykanka xiliga codsiga degaanka joogtada ee sharciyeysan la galeeyo.

Intaa waxaa dheer, haddii da'daada ay ka weyntahay 21 sano, oo aadan guursan oo waalidiintaada ay gargaar ka helaan hay'ada HRIFA xaq ayaad u leedahay gargaarka hay'ada HRIFA haddii aad muujin karto inaad si muuqato oo joogto ah ugu sugneyd wadanka Mareykanka tan iyo ugu yaraan bishii Disembar 31, 1995.

Haddii aad dembi gashey, waa laga yaabaa ama lagama yaabo inaad u qalantid helitaanka deganaansho joogto ah oo sharciyeysan. Dembiyada qaar, waxa jiri kara tanaasulid macquul ah, sida mid la yiraahdo 212(h). Haddii aad la kulantid dhamaan dalabyada kore, waa inaad u sheegtaa garsoorka Socdaalka ama xafiiska DHS inaad ku fekereyso inaad u qalanto helitaanka deganaansho joogto ah oo sharciyeysan ayadoo la hoos tagaayo Sharciga Cadaalada Socdaalka Qaxootiga ee Haiti ee sanadka 1998. Haddii aad dembi leedahay oo aadan hubin inaad u qalanto, waa inaad weydiisaa Garsoorka Socdaalka ama xafiiska DHS.

Kama xaajoonin howsha lagu dalbanaayo deganaansho joogto ah oo sharciyeysan ee sharcigaan oo si aad iyo aad u faahfaahsan. Waydii Garsoorka Socdaalka, xafiiska DHS ama qareenka sharciga ah sida loo dalbado haddii ku fekereyso inaad u qalanto.